# XEERKA CIQAABTA

## XEER SHARCIYEEDKA lam. 5 ee 16 Dicember 1962, Xeerka Ciqaabta

### Qod.1

Lifaaqan oo ah mid loogu saldhigayo XeerkaN ciqaabta, wuxuu dhaqan geli doona lix bilood ka dib, marka lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

### Qod.2

Nuqul ka mid ah xeerka ciqaabta oo lagu faafiyay Faafinta Rasmiga, waxaa loo gudbinayaa Guddoomiyeyaasha gobollada, gudoomiyeyaasha degmooyinka iyo dowladaha hoose, si looga helo xafiisyadooda muddo lixdan cisho ah si cid kasta u ogaato.

### Qod.3

Taariikhdda uu dhaqan galo xeerkan ciqaabtu, waxaa la baabi’iyay xeerarkii ciqaabta ee dhaqan galka ka ahaa dalka oo laga reebay Qod. 57aad ee ah hab dhaqanka garsoorka oo lagu meel mariyay amarka 2dii Febraayo 1956 lam. 5 iyo dhaqan sharciyeed kasta oo aan la jaan qaadi karin.

## BUUGGA KOOWAAD
Guud ahaan dembiyada

## CINWAANKA 1AAD
Xeerka Ciqaabta

### Qod. 1
### Dembi iyo ciqaab: Jiritaankooda sharciga ayaa si qeexan u sheega

Qofna laguma ciqaabi karo fal uusan si cad sharcigu ugu sheegin in uu dambi yahay iyo ciqaaab uusan sharcigu xaddidin (161).

### Qod. 2
### Isdhaxlidda xeerarka ciqaabta

1) Qofna laguma ciqaabi karo fal aan dambi ku ahayn sharcigii dhaqan galka ahaa goorta falku dhacay.

2) Qofna laguma ciqaabi karo, sida uu ku cad sharciga dambe, fal aan muujinayn in uu yahay xadgudub; haddii horteed lagu caddeeyay, laguna xiray, fulinta iyo ciqaabta ka dambaysay ku caddayntaas iyo xariggaba way joogsanayaan (136 ss., 170 s.; 245 ss. x.h.c.).

3) Haddii sharcigu dhaqan galay wakhtiga xad gudubka la galay iyo wakhtiga sharcigan dambe is khilaafsan yihiin, labadu ka u danta ah eedaysanaha caddaymahooda ayaa la raacayaa, aan ka ahayn markii ku caddaanta falka iyo xabsiga oo si kama dambays ah loo gaaay (246 x.h.c.).

4) Xaaladaha gaarka ah ee ku meel gaadhka sharciga ah, caddaymaha labada farqadood ee hore ayaa la waafajinayaa.

### Qod. 3
### Qasabnimada sharciga ciqaabta.

1. Sharciga ciqaabta Soomaaliyeed waa qasbayaa dhamaan Waddaniyiinta iyo shisheeyaha ku nool dalka Soomaaliya (4/2) marka laga reebo inta lagu xeeriyay xuquuqda guud ee gudaha amba mid calami (1).

2. Sharciga ciqaabta Soomaaliyeed waa qasbayaa xitaa dhamaan Waddaniyiinta iyo shisheeyaha joogta dalka dibaddiisa si kooban xaaladaha sharcigaani xaddiday (7,8) amba xuquuq caalimi.

### Qod. 4
### Muwaadinka Soomaaliyeed, Gayiga Qaranka

1. Xeerka Ciqaabtu wuxuu muwaadinka Soomaaliyeed ulajeedaa dadka ka soo jeeda isirka ama laga doorto goobo ka mid ah dhulka qaranka iyo dadka aan lahayn geyi ee deggen dhulka qaranka (4 Const).

2. Xeerkaka Ciqaabtu wuxuu dhulka Qaranka ulajeeda, geyiga Jamhuuriyadda iyo meel kasta oo hoos yimaada. Maraakiibta iyo dayuuradahana waxa loo aqoonsanayaa goobo ka mid ah dhulka qaranka meel kasta oo ay joogaan, waxa ka baxsan kuwa hoos yimaadda sharciga caalamiga ah, kuwaas oo ku xiran sharciga dibadda.

**Qod. 5**
**Ogaansho la'aanta Xeerkaka Ciqaabta**

Qofna cudur daar kama dhigi karo ogaal la'anta xeerka ciqaabta (28; 31 x.c.b)

**Qod. 6**
**Ku Xad gudubka lagu galo dhulka Qaranka ee aan cidna reebayn**

1. Cid kasta oo gasha fal ku xad gudub ah (115 Pc) dhulka Qaranka gudihiisa (4/2 Const) waxa lagu ciqaabi doonaa si waafaqsan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed.

2. Waxa loo qaadan doonaa in fal ku xadgudub ah lagu galay dhulka Qaranka gudihiisa, marka falku ama barbar marista sharci dhamaan arkaan ama qayb ahaan ay dhacdo ama natiijadeedu dhammaan ahaan ama qayb ahaan dhacdo.

**Qod. 7**
**Ku xadgudubyada lagu galo dibadda ee la ciqaabayo kala sooc la'aan**

Cid kasta ee gashay ku xadgudubyada soo socda mid ka mid ah (15Pc) geyi ajnabi gudihiisa waxa lagu ciqaabayaa si waafaqsan sharciga Soomaaliyeed:

a) dunuubta laga galo shakhsiyadda Qaranka (184 239 Pc)
b) Dambiyada been abuurka shaabadda astaanta qaranka ama isticmaalidooda (360).
c) Dambiyada been abuurista lacagta si sharci ahugu socoto dhulka qaranka gudihiisa (348 Pc), qiimaha shaabadaha iyo kaarka daymaha dadweynaha.
d) Dambiyada ay galaan saraakiisha ummaddu (24 Pc) iyaga oo haya xilka qaranka kuna takri fala awooda xilkooda ama waajibaadkooda (241 ss.)
e) Ku xadgudub kale oo xeerraka ciqaabta Soomaaliyeed loo cuskan karo sharci ahaan (8,9 Pc) ama qawaaniinta caalamiga ah (6 Const).

**Qod. 8**
**Ku xad gudubyada lagu sameeyo dalka dibaddiisa**

1. Marka laga tago xaaladaha ku xusan Qod. 7aad, sida uu qabo xeerka ciqaabta Soomaaliyeed, waa in la ciqaabo cid kasta oo dalka dibaddiisa dambi dhibaateynta dowlad amba waddaniyiinta Soomaaliyeed ku gasha (4/1), haddii:

   a) falkaas dambi looga arko dalka lagu galay;
   b) dhibbanaha cabashadiisa gudbiya (81 ss.; x.h.c.), haddii aanu dambiga qaranka oo kaliya ku dhibbanayn;
   c) dambi falaha laga helay dalka gudihiisa (84) waqtiga dalabka ama bilowga dacwada (73 x.h.b.).

2. Marka laga gudbo saadaalada qod. 7aad, sida uu qabo sharciga Soomaaliyeed, waa la ciqaabayaa cid kasta oo fal dambiyeed ku gasha dalka dibaddiisa oo aan la xiriirin arrin siyaasadeed dhibaateyna ku ah Dowlad kale amba qof ajnabi ah, waa shardi in:

   a) falkaas looga arko dambi xataa meesha lagu galay sharcigeeda;
   b) dhibbanuhu codsi cabasho sameeyay (81 ss.; 21 x.h.c.);

c) dambi falaha laga helo dalka gudihiisa (4/2) wakhtiga cabashada la sameeyay ama dacwadda ciqaabta ahi bilaabantay (73 x.h.c.);
d) maxaabiis isku celinta la ogolaan maayo ama laga aqbali maayo dawladda dambiiluhu ka yimid ama dembiga lagu galay dalkeeda;
e) in baadhista ku amro (13/5, 74 x.h.c.) wasiirka caddaaladda.

3. Xeerkakan dhexdiisa dembi siyaasadeed waxa looga jeedaa dembi kasta oo leh ujeeddo siyaasadeed qayb ahaan ama dhammaantiis.

**Qod. 9**
**Xaaladaha aan la qaadi karayn fal dambiyeedka**

Marka laga reebo dacwooyinka ku qeexan Qod. 7, qaadista denbiyada fal denbi laga galay waddanka dibadiisa, laguma qaadi karo qof dambiga laftiisa dibadda lagu waayay dambigaas ama ay ku caddaatay oo dhammaystay xariggii ciqaabta uu lahaa.

**Qod. 10**
**Aqoonsiga fal dibadeed xukun ciqaabeedkiisa**

1. Xukun ciqaabeed dibadeed lagu dhawaaqay denbi la galay waxaa la aqoonsan karaa:

a) In la garwaaqsado in dambiiluhu yahay (61 Pc) ama la garwaaqsaday natiijo fal dambiyeed caddaaday ama lagu dhawaaqo in dambiiluhu yahay “Caadayste” ama ku walfay xirfad ahaan (64 Pc)
b) Marka ku caddaantu ay u baahan tahay kordhin ciqaabeed sida ku cad xeerkaka Soomaaliyeed (101 Pc)
c) Marka iyada oo la cuskanayo xeerka Soomaaliyeed qofka dambigu ku caddaado ama la sii daayo uu u baahdo tallaabooyin nabad gelineed (161 Pc), haddii uu ku sugan yahay ciidda dhulka qaranka (4/2).
d) Marka xukun dibadeedku amro ururinta ama magdhabid khasaare ama waxyeelo (158 160 Pc) ama ay tahay in dacwo qaadista loo gudbiyo dhulka qaranka (4 dastuurka 4 Pc) iyada oo loola jeedo in la helo dheeraad ama mag dhow khasaare ama dhaawac ama ujeeddo kale oo madani ah (158 160 Pc)

2. Xukun dibadeed kasta si loo aqoonsado waa in uu ku dhawaaqo madax garsoore ee dal shisheeye, kaas oo axdi isku gudbin lala leeyahay (19 Dast 11 Pc).

3. Haddii aanay jirin heshiis noocaas ah waxa haddana la aqoonsan karaa xukun dibadeed qaranka, haddii Wasaarada Cadaaladdu ay codsato sidaas.

**Qod. 11**
**U gudbin dambiilaha waddanka uu dambiga ku galay**

Waxa la samayn karaa xaaladaha iyo dariiqada sharcigu dhigayo ee uu oggol yahay axdiga caalamiga ahi (19 dast, 8 Pc).

1. Gacan u gelin lama bixin karo haddii falku aaanu kelifayn baahi denbi awgeed oo xeerka Soomaaliyeed iyo xeerkaka dibadda (15 Pc)

2. Qofna laguma kelifi karo in cid kale gacanta loo geliyo sababo siyaasadeed awgeed (19 dast Pc).

**Qod. 12**
**Dib u tirinta iyo dhicista muddada**

1. Marka xeerkaka ciqaabtu uu sugo si sharci ah muddo dhaaf waxa tirada lagu salaynayaa kalandar sanadeedka caadiga ah.

2. Maalinta bilowga laguma darayo tirada (88 x.h.c.).

**Qod. 13**
**Arrimaha lagu salaynayo xukunkooda in ka badan hal xeerka ciqaabeed ama in ka badan hal caddayn xeerka, xeerka ciqaabeed kali ah**

Marka dhowr sharci ciqaabeed amba nidaamiyo habab kala duwan ee ciqaabeed lagu dhaqo hal shay, sharciga qaaska ah ayaa nasaqaya sharciyada caadiga ah iyo nidaamyada kaleba, haddii aan si kale loo dhigin.

**Qod. 14**
**Xeerka Ciqaabta gaarka ah**

Nidaamka xeerkan, waxaa lagu dhaqayaa xitaa shayga lagu dhaqo sharci ciqaabeedyo kale, haddii uusan isla sharcigaani si kale u sheegin.

**CINWAANKA LABAAD**
Dembiyada ku xad gudubka

**Cutubka 1aad**
Xad gudubyada la galay ama la isku dayay

**Qod. 15**
**Ku xad gudubyada: kala suuradaynta denbiyada iyo ganaaxyada**

Ku xad gudubyadu waxay u kala barxaan dembiyo iyo gefef, taas oo ku xiran noocyada kala geddisan ee ciqaabtooda uu qeexayo xeerkakan (90 Const).

**Qod. 16**
**Ku xad gudubyada la galo**

Haddii aanay ku qeexnayn xeerka ciqaabta (ex qodob 218, 437 Pc) ku xad gudub waxaa loo qaadanayaa in la galay marka fal la galo, ama laga taagsado dhinaca ku xad gudbuhu uu sameeyay arrin dhaawac ama khasaare keenaysa oo ku cad xeerkaka ciqaabta (20 Pc).

**Qod. 17**
**Iskuday dembi**

Waxa la odhan karaa dembi ayaa la galay ama aan la gelin haddii si toos ah ay u sababayso dhacdo (19 Pc) oon gebi ahaan aan la dhamaystirin, oo dhacdadii aanay natiijo keenin 125 Pc.

**Qod. 18**
**Ka noqosho kuna hawl galo toobad keenis**

1. Marka ku xadgudbuhu uu iskii uga waantoobo falka laguma ciqaabayo wixii ka horeeyay, ka toobad keenka, haddii falalku aanay ku xadgudub keenin.

2. Marka ku xadgudbuhu, isaga oo fulinaya dhamaystirka dhacdada uu iskii u joojiyo, dhacdada waxaa lagu ciqaabayaa caddaymaha waafaqsan isku dayga dembiga, iyada oo la dhimayo ilaa saddex dabool ama nus (badh) qodob 40 F, Pc).

**Qod. 19**
**Isku day falid dulmi aan suura gal ahayn**

1. Isku day laguma ciqaabi karob marka uu yahay mid aan haboonayn falkiisu ama sheygu aanu jirin, kolkaas dhacdadu waa ma dhacdo.

2. . Haddii dhammaan ay ka wada qeyb galaan falka iyo xubnihii dhalin lahaa dambi kale, waxaa lagu qaadayaa ciqaabta loogu talo galay dambiga la galay.

3. Xaaladaha lagu xusay farqadda koobaad, Garsooruhu wuxuu amri karaa in eedaysanaha la sii daayo, oo uu hoos yimaado tallaabooyin nabadgelyo (161 Pc).

**CINWAANKA 2AAD**
Xubnaha koobaya ku xad gudubyada

**Cutubka 1aad**
Xubnaha dheliya ku xadgudubyada

**Qod. 20**
**Falka iyo dhacdada: xidhiidhka sababta iyo natiijada**

1. Qofna uma furna in lagu ciqaabo fal gelis ama dhaafid xeerka ku qeexan in uu gef yahay haddii dhacdadu tahay mid khatar leh oonay taasi qofkaas falkiisu keenin waxyeelo Pc 16.

2. Marka ay jirto sharci ka soo horjeeda joojin dhacdo oo ay istaagi waydo waxay la mid tahay iyada oo keliftay dhacdada.

**Qod. 21**
**Sababaynta Dhacdada**

1. Dhacdada waxa horeyba u jiray oo lala wadaagay fulintiisa inkasta oo falku ama ka joogsigu si madaxbanaani ah u dhacay, lagama saari karo xidhiidhka fulinta ama ka joogsiga iyo dhacdada (20 Pc).

2. Waxa la wadaagga sababaynta laga reebi karaa marka falistu ama ku tegistu ay si ku kooban u caddahay in lagu tallaabsan karo, laakiin haddii falku ama ka tegista hore loo galay ay tahay ku xad gudub, ciqaabta u qoondaysan ayaa lagu qaadayaa.

3. Nidaamyadan hore ayaa lagu dhaqayaa xitaa dhacdada, haddii ay horay u jirtay, isla mar kulantay, cir ka dhaca ahayd amba fal cid kale oo sharci darro ah.

**Qod. 22**
**Ku xadgudubyada lagu ciqaabayo jiritaan xaaladeed**

Marka sharcigu u baahdo jiritaan xaaladeed si loo sababeeyo fal ciqaab mudan, ku xad gudubuhu wuxuu mas'uul ka yahay ku xadgudubka in kasta oo natiijada loo baahan yahay in ay noqoto xaalad keeni karta fal ciqaab mudan oo aanu qofku si u kas ah ula jeedin.

**Cutubka 2aad**
Unugga Saykoolojiyadeed ee la xiriira dembiga

**Qod. 23**
**Unugga Saykoolojiyadeed**

1. Cidna laguma ciqaabayo fal ama ka tegis uu sharcigu u arkay in uu yahay ku xad gudub haddii aanu isaga oo yaqiinsan si kas ah u fulin.

2. Cidna laguma ciqaabayo fal ama ka tegis sharcigu u arkay inuu yahay dembi haddii aanu ulajeedo kas dambiilanimo ah u fulin, waxa ka reeban xaaladaha ulajeedadaas horteeddenbiah mid si kas ah loo wadaagay, taas oo uu xeerkaku si tafatiran uu u muujiyay (24 Pc).

3. Meel ka dhacyada, qof waxa uu ka jawaabi karaa falkiisa ama ka tegistiisa uu sameeyay isaga oo ogsoon kas ahaan u fuliyay keligiis ama ka qayb qaatay si ulajeedo denbileh.

**Qod. 24**
**Kaalinta saykoolojiyadeed ee denbiyada falalka loo galo ula jeeddo denbi ku tala gal ahaan ama denbi saa'idin**

1. Dambi:

    a) Wuxuu yahay mid leh ula jeedo dambi, marka dhacdada kahtarta ahi ama waxyeelada lihi ay keento fal galid ama saarid la sii arkayay oo uu go'aansaday dambiiluhu cawaaqibkeeda, iyo marka sharcigu ka dhigo dambigaas mid dhacdada ku tiirsan (f. ex Art 434 Pc);
    b) Mid aan ku tala gal ahayn, ama la sii arkayn, taas oo dhibaatadu ama khatarta dhibaatadu ay ka timid falidii ama fal la'aantii ay ka dhigtay mid ka khatar badan tii uu dambiilubu go'aansaday (f. ex art 414 Pc)
    c) Dambi saaidin, ama ku lid ku tala galka, taas oo dhacdada xataa haddii la sii arkayay aanu go'aansan dambiiluhu, oo dhacda si leh cawaaqib dhayalsi ah, farsamo la'aan ama dhawris la'aanta shuruucda, xeerkaarka awaamiirta ama tilmaamaha.

2. Kala saaristadenbiyadala galo si dambiilanimo iyo kan loo galo si denbi saa'idin ah, kaas oo ku qoran qodobkan ku saabsandenbiyadawaxaa loo cuskan doonaa oo kale ku xad gudubyada marka sharcigu ka dhigayo cawaaqib qaynuun ama cawaaqib qaynuun oo kala qeexaya arrintaas (f. ex art 513 Pc).

**Qod. 25**
**Falalka si khalad ah loo qaato**

Falalka si khalada loo qaato inay dambiyo yihiin qof kasta oo gala fal aan ahayn denbigiisa oo u haysta inay denbi tahay ciqaab ma mudan doono.

**Qod. 26**
**Shilka ama lama filaanka**

Qof kasta oo gala fal si shil ah ama lama filaan ah ciqaab ma mudan doono.

**Qod. 27**
**Awooda xoogga oo si qasab ah loo adeegsado**

1. Qof kasta oo gala fal uu ku qasbay dad kale oo loo adeegsaay awood xoog oo uu caabiyi waayay, oo uu si kalena uga carari waayay ciqaab ma mudan doono.

2. Qof kasta loo adeegsada xoog wuxuu masuul ka noqon doonaa falka uu galay ee waxyeeleeyay qof kale (362 Pc).

**Qod. 28**
**Qaladka xaqiiqada**

1. Dambi ma noqonayso fal uu ka galay qof qof kale sabab qalad xaqiiqo oo ku saabsan aldenbiah, laakiin marka qaladka loo galo sidenbisaaidin ah ee xaqiiqaduna ay keentodenbiloo galay dambiilanimo (24 Pc) ciqaabta meesha lagama saarayo.

2. Qaladka xaqiiqada ee keenaya faldenbigaar ahaaneed, ma reebayo hoos imaatinka ciqaab, marka falku keenodenbinooc kale ah.

3. Qaladka sharciga ee aan ahayn kan Xeerkaka Ciqaabta wuxuu reebayaa hoos imaatinka ciqaabta, marka qaladka sharcigu uu dhalo qalad xaqiiqo, fal keenaya denbi (5, 29, 30 Pc).

**Qod. 29**
**Qalad ka yimid khiyaamo cid kale ku kacday**

Caddaymaha qodobka aynu soo dhaafnay waaa loo cuskan doonaa, qaladka xaqiiqo ee falka keenayadenbimarkuu sababeeyo khiyaamol qof kale uu galay, markan si kastaba ha ahaatee qofka wax khiyaameeya inuu galo falka ciqaab la mid ah ayuu mudan doonaa.

**Qod. 30**
**Dhaawaca qof gaadha aan ahayn kii loola jeeday**

1. Qof kasta, oo sabab qalad gala isticmaalana adeegsi fal samayn ah, ama sabab kale dhaawaca u sababeeya qof kale aan ahayn kii loola jeeday dhaawca, dambiiluhu wuxuu mudan doonaa sidii qofkii uu falka ula jeeday oo kale oo uu doonayay inuu dhaawaco isagoon ku xad gudbin cadaymaha Qod. 43aad ee ku saabsan xaalad xumaynta.

2. Marka algu daro qofka kale ee qofka dhaawaca loola jeeday uu dhaawacmo ama waxyeelo gaadho, dambiiluhu wuxuu hor iman doonaa ciqaabta ku xusan ee ku saabsandenbiyadakhatarta ah oo la kordhiyay ilaa nus ½.

**Qod. 31**
**Dhacdada ka duwan taa uu doonayay dambiiluhu**

1. Marka laga reebo xaaladaha ku xusan qodobada hore, ee ku salaysan ujeedo qalad ee loo isticmaalo adeesidenbisamayn ah, ama ujeedo kale oo kasta, ee fal uu sababeeyo, marka laga reebo kuwa uu go'aansaday, dambiiluhu wuxuu hor iman doonaa dhacdada aanu go'aansan, marka falka loo galo si denbi saa'idin ah (24 Pc).

2. Haddii uu dambiiluhu uu haddana sabeeyo dhacdo uu ku tala galay inay timaado, caddaymaha xukumaya so noqnoqoshadadenbiyadaama iska daba dhacadenbiyadaayaa loo cuskan doonaa (44 Pc).

**Cutubka 3aad**
Duruufaha Baajinaya Ciqaabta

**Qod. 32**
**Ogolaanshaha dhinaca dhibaatadu gaadhay**

Cid kastoo waxyeelaya ama carqaladeeya xaq uu ka ogolaaday qof awood u leh ogolaanshaha ciqaab ma hoos iman doono.

**Qod. 33**
**Ku talaabsi xaq ama qabasho waajib**

1. Ma ahadenbila sameeyay isticmaalideedu xaq uu qof u leeyahay ama gudashada wajaib ee uu sharcigu saaray ama amar qaynuun ama sharci oo sarkaal dadweyne.

2. Haddii fal keenayadenbila galo amar sarkaal sare page 131 (240 Pc) sarkaalka amarka bixiyay ayaa dambigu hoos iman doonaa. Qofka amarka fuliyay isaguna wuxuu hoos iman doonaa dambiga hadaanay qalad qancis ah rumayn inuu qaadanaayay ama oofinayay amar sharci ah.
3. Qof kasta oo fuliya amar khalad ah lama ciqaabi doono, marka aanu sharcigu u ogolaan inuu su'aal ka keeno sharciyada amarka (37 Pc).

**Qod. 34**
**Is Difaac Bannaan**

Qof kasta oo fal sameeya, oo ay ku khasabay baahi is difaac naftiisa, ama difaac qof kale xuquuqdiisa oo laga difaacayo khatar sugan oo keenaysa dhaawac sharci daro ah, lama ciqaabayo haddii is difaacu mid la miisaana yahay waxyelada iman lahayd (37).

**Qod. 35**
**Isticmaalidda bubka ee Sharciga ah**

1. Iyadoo la raacayo tilmaamaha labada qodob ee aynu soo dhaafnay, sakraal dadweyne (240 Pc) lama ciqaabayo haddii, ula jeedadu ay ahayd fulinta xilka xafiiskiisa uu ka shaqeeyo, ama aanay ahayn awaamiirta dadka u xil saaran hubka, ama aan dhaawac jidh aanay ku khasbin baahidu, ama aanu joojinayn xoog ku muquunin, ama si sharci ah loo xidhay, ama aanu ahayn la hayedenbiuu sameeyay.

2. Caddaymaha farqada koowaad waxay qabanayaan qof kasa oo si sharci ah sakraal dadweyne u codsaday inuu siyo gacan.

3. Xaaladaha kale ee isticmaalidda hubka, ama talaabooyin kale oo isticmaalid xooga, waa la ogolyahay sharci baana qeexi doona (37 Pc).

**Qod. 36**
**Xaaladda Baahida**

1. Qof kasta, oo wax falla, oo ay ku qasabtay baahi badbaadinta naftiisa ama awaamiir khatar sugan oo keenaya dhaawac jidh, oo khatartaasi qofku si kam'a ah u sababtay, ama haddii kale aanu baajin karaynin lama ciqaabayo, haddii wax fallidu la miisaan tahay khatarta, oo qofku sharci ah aanu isugu ban dhigi karayn khatartaas.

2. Caddaymaha faqradda koowaad, waxaa iyana lagu qaadayaa haddii xaaaladda baahidu ay sababtay, cabsi dad kale, xaaladdan si kastaba ha ahaatee, qofka qof kale ku khasba in uu wax fallo waxaa la ciqaab marinayaa wax fallidii uu qofka kale sameeyey (e 7-37 Pc).

**Qod. 37**
**Wax falidda dheeraadka ah ee dambiilenimada**

Marka uu qofku fallo wax fallida ku xusan qodobadda 33,34,35 iyo 36 xadka ay keentay baahidu ay ku kordhiyo dambiiilenimada, marka wax fallidu ay noqotodenbiwax falliddenbiyeelasho caddaymaha ku saabsan dunuubta la gallo ee dembiilanimada ayaa lagu qaadayaa.

**Qod. 38**
**Xaaladaha loo arkayo inay ka reeban yihiin ciqaab**

Marka qof si khalad ah u qaato inay jirto duruufo ka reebo ciqaab, kuwaa waa lagu xisaabtamayaa si isaga u dan ah, laakiin markaa khaladka ay sababto dambilanimo iyo marka wax fallidu ay keenaysodenbifallid dambiilenimo, ciqaabtu ma baajinayso inay reebo (13 Pc).

**Cutubka 4aad**
Duruufo dembi yeelashada

**Qod. 39**
**Sii qasid duruufo caadi ah**

Waxa noqonaya sii xumayn duruufaha caadiga ah ee dambiga marka aanay ahayn unugyo xidhiidh ah ama ahayn sii xumayn gaar ahaaneed ee duruufaha (117,123 Pc).

a) Marka wax loo falid loo sameeyo shay ama dano.
b) Loo falo dambiga, si wax falid ah ama la qariyodenbikale ama si loo helo ama loo badbaadsado si shakhsi ah ama ka faa'iidaysi ama ka samato bixid, denbikale.
c) Xaaladaha dambiyadda la galodenbilahaan (24 Pc) oo la falo iyada oo la sii ogyahay dhacdada.
d) Isticmaalid ka baxsan aadaminimada ama falid si naxariis darro ku ah dad.
e) Iyada oo laga faa'iidaysanayo duruufahaas wakhtiga meel ama qof si la isku hor taago difaac shakhsi ama dadweyne

f) Dambiyada ku lid ah mulki (480,504 Pc) markuu dhaawac halis ah u gaysto hantida dhinaca la waxyeeleeyay markuu, sii siyaadiyay ama isku dayay inuu sii kordhiyo waxyeelada cawaaqibka dambiga la falay.
g) Xaaladda dunuubta ku lidka ah lahaanshaha (480, 504 Pc) taas oo sababtay waxyeelo xun, oo ku timaada lahaanshihii dhianca wax la yeelay.
h) Marka la siyaadiyo ama la isku dayo in la siyaadyo cawaaqibdenbila galay.
i) Marka loo galo falka iyadoo la ceebaynayo awooda ama lagu xad gudbayo waafjibaadka ku xeerkaan xafiis dadweyne ama adeeg dadweyne.
j) Marka fal laga galo sarkaal dadweyne (240 Pc) ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne (240 Pc) ama laga galo Diblomaasi ama qunsul wakiil u ah Qaran ajanebi ah wixii ku saabsan ama saab u ah fulinta shaqooyinkooda ama adeega.
k) Marka la galo fal iyadoo la ceebaynayo mas'uuliyadda ama xidhiidhka u gaarka ah ama la ceebaynayo jago qof xafiis ama la xidhiidha gudasho shaqo kula noolaan guri ama fidin ama qaadasho marti gelineed.

## Qod. 40
## Duruufaha sii xumaynaya xaaladaha caadiga ah

1. Kuwa soo socda ayaa sii xumaynaya duruufaha dembiyada haddii aanay ahayn kuwa nuxur ah ama si gaar ah u sii xumaynaya duruufaha 117, 123

   a) Marka falka loo sameeyo iyadoo la leeyahay hamo maskaxeed oo gaar ah ama aragti bulsho
   b) Marka xaalad cadho falka loo galo, taas oo ay sababtay fal sharci darro qof kale.
   c) Marka falka loo galo saamayn shirar ama kulamo sharcigu mamnuucayo ama ay mas'uuliyiin mamnuucayaan, oonu dambiiluhu ahayn mid caadaystay ama mid aanay xirfad u ahayn dambiilenimo, markaas dunuubta xaaladaas ee saamaysa lahaansho ay sababatay dhaawac la dhayalsaday (482 Pc) oo ku saabsan hantida dhinaca la waxyeeleeyay.
   d) Marka lagu daro wax fallida ama waxbaabi'inta dambiilaha falka la galay ee leh ulajeedo dambiile ee ka timaada dhinaca wax la yeelay ay gacan ka geysaato sababta dhacdada.
   e) Marka garsooridda ka hor dambiiluhu si buuxda u bixiyo mag dhowga khasaaraha, ama wixii suura gal ah uu ogolaado ama marka garsooridda ka hor marka arrintan laga reebo, faqraddii u dambaysay ee Qod. 18aad si is daba jooga oo wax ku ool ah uu u qaado si uu u cidhib tiro ama u yareeyo dhaawicii iyo khasaarihii cidhib dambeedka dembiga.
   f) Duruuf kasta oo kale uu garsooruhu u arko inay suurta gal ka dhigayso in la yareeyo ciqaabta.
   g) Xaalad kasta oo garsooruhu u tixgeliyo in sabab u noqon karto yaraynta ciqaabta.

2. Duruufaha kordhinta ku xusan xarafka G ee faqradda koowaad waxaa loo qaadanayaa mid ka mid ah duruufta taas oo ku lamaanaan karta mid ama in ka badan duruufaha aynu horey u soo sheegnay.

## Qod. 41
## Duruufaha dabiiciga ah ama kuwa dadku keeno ula jeeddada Xeerkaka Ciqaabta:

a) Duruufaha dabiiciga ahi waa kuwa la xidhiidha dabeecadda, nooc, shayga, adeegsiga, wakhtiga, meesha iyo qodob kasta oo la xidhiidha falka, soo jiidashada dhaawaca iyo khatar ama xaaladaha shakhsi ama sifooyinka dhinaca la wax yeeleeyay.

b) Duruufaha dadku keeno waa kuwa la xidhiidha ilaa xad ujeedada dambiilaaha ama xadka dembiilanimada (24 Pc) ama xaalada shakhsiga ah ama sifooyinka dambiilaha, ama xidhiidhka ka dhexeeya dambiilaha iyo dhinaca la dhaawacay.

**Qod. 42**
**Duruufaha aan la ogayn ama si khalad ah loo qaato**

Haddii, kale aanu sharcigu qeexaynin, siyaadinta (39 Pc) ama dheeraynta duruufaha waxaa loogu xisaabtamayaa labada dhinacba, ku lidka ama u danta ah dambiilaha, inkastoo aanu isagu ogayn ama si khalad ah uu u aaminay isagu sidii waxaan jirin, haddii qofku si khalad ah ay uga muuqato xaaladdu kordhinaya duruufaha kuwaas laguma xisaabtamayo in ay ku lid yihiin ama u dan yihiin.

**Qod. 43**
**Qiimaynta duruufaha khaladka ah ee ku saabsan waxyeellada dambiilaha**

1. Xaaladda khaladka ku ah dhinaca la dhaawacay (130 Pc) ee ku saabsan xaaladda iyo qiimaha dhinaca la dhaawacay ama xidhiidhka ka dhexeeya ka denbiiyo dambiilaha xisaabta looguna darayo dambiilaha duruufaha xumaynta ee loo qaato si khaldan (40 Pc) ee ku saabsan xaalada aynu horey u soo sheegnay sifooyinka ama xidhiidhka ee ka soo horjeeda waxa loo qaadanayaa si isaga u danaynaysa.

2. Caddaymaha qodobkan looma cuskanayo arrinta duruufaha ku saabsan da'da dhinaca la waxyeeleeyay.

**Cutubka 5aad**
Dhicista dambiyada

**Qod. 44**
**Jebinta qodob ama caddaymo kala duwan**
**ee sharciga ee mid ama hal fal ama in ka badan**

Qof kasta oo hal fal sameeya ama baabi'iya oo buriya caddaymo sharci oo kala duwan, ama fala in ka badan jebin kaliya oo caddayn sharci 'waxa lagu ciqaabayaa dambiyadii kala duwanaa ee sharcigu u qeexay xaaladan' ciqaabaha lagu qaadayaa garsoorid isku mida oo sharciga gaynaya. Waxaanay ku xiran tahay darajada ugu saraysa ee sharcigu qeexay 126139.

**Qod. 45**
**Dambiga joogtada ah**

Qofka sameeya, in ka badan hal fal ama baabi'in ulajeedo dambiile oo isku mida fala wakhitaas ama wakhtiyo kala duwan. In ka badan hal burin cadayn kaliya oo sharci oo isku mida ama kala duwan wuxuu noqonayaa qof danbiile ah, dambiyo aan joogsi lahayn, xaaladaas ciqaabtu waxay noqnaysaa mid loo cuskaday iyadoo loo eegayo falalka jabinta sharciyada kuwa ugu culus iyadoo la saddex laabay (5/1, 73/3 x.h.c.).

**Qod. 46**
**Dambiyada murugsan**

1. Cadaymaha labada qodob ee aynu soo dhaafnay (45 44) looma cuskanaayo, marka qaanuunku arko uguyo ama duruufo saa'idinaya haldenbifalal iyaga laftoodu noqonaya dambi.

2. Mar kasta oo sharcigu isaga oo sugaaya ciqaabta denbi murugsan wuxuu tix raacayaa ciqaabta loo dhigay ee ku saabsan dambiyo gooni ah ciqaabta ugu saraysa ee ay dhigayaan qodobada 134, 133 lagama badin karo.

**CINWAANKA 3AAD**
Dambiilaha

**Cutubka 1aad**
Dembiga

**Qaybta 1aad**
Sharci qabasho

**Qod. 47**
**Awoodda wax fahanka iyo wax fahmi la'aanta**

1. Qofna laguma ciqaabi karo wax falid denbi ah, wakhtiga uu falka galay haddii aanu ahayn mid sharcigu qabanaayo.

2. qof kasta oo leh baaxad wax faham waxa uu ku ciqaabmayaa (48,49,50,53,56,57,58, iyo 59).

**Qod. 48**
**Gacan siin fal galid qof aan dhamayn ula jeeddo sababaysa galis dambi**

Qof kastoo gacan siiya qof aan awood lahayn wax faham ama wax fulin (47 Pc) ula jeedo ah inuu falo denbi (wuxuu mas'uul ka noqonayaa dambigii qofka aan dhamayni uu galay.

**Qod. 49**
**Galinta ku riixista ee u kastaa qof aan lahayn awood wax faham ama garasho wax fulin:**

Qof kasta oo iska dhiga mid aan awood wax faham ama fulin (47 Pc) ulajeedada wax faliddenbiama in uu keeno cudur daar naftiisa ah waxaa lagu ciqaabayaa dambigii uu galay, ciqaabtana waa la kordhinayaa.

**Qod. 50**
**Qof dhammaantiis maskaxda wax uga dhiman yihiin**

Qof kasta wakhtiga, uu falka galay ahaa qof aan xis dhab ah lahayn dhinaca xaalada maskaxda, taas oo waxyeelaysay baaxadiisii wax fulinta iyo wax fahamka sharcigu ma qabanayo (176,70, x.h.c.).

**Qod. 51**
**Qayb dhinaanshaha maskaxda**

Qof kasta, wakhtiga uu falka galay, haddii uu yahay mid xiskiisu dhan yahay waxyeelaysa wax fahamkiisa oo aanay baaxadiisa wax faham waxba u dhimayn waxaa lagu qaadayaa dambiga uu sameeyay, laakiin ciqaabta waa la dhimayaa 199.

**Qod. 52**
**Xaaladaha caadifadeed**

Sharci qabashadu ma baajinayso, mana yaraynayso xaaladda caadifadeed ama rabitaan awgeed.

**Qod. 53**
**Sakhrad ku timid shil ama si lama filaan ah**

1. Qof kasta markuu falka galay haddii aanu lahayn awood garasho (47 Pc) taas oo ay keentay sakhrad badan oo keentay shil ama wax lama filaan ah, sharciga laguma qaadayo.

2. Haddii sakhradu aanay ahayn mid dhamays tiran, laakiin ay tahay mid yaraynaysa dhacdada ciqaabta, waa la dhimayaa (119 Pc).

**Qod. 54**
**Sakhrad ama sakhraanimo**

Sakhrad aaan keenin shil ama wax lama filaan ah, waxba ma baajinayso mana yaraynayso sharci qabashada

**Qod. 55**
**Sakhradda la caadaysto**

1. Marka dambiga la galo xaalad sakhrad ahayd, uu galo sakhraan caadaysta ahi, ciqaabta waa la kordhinayaa.

2. Ula jeedada xeerka ciqaabta qofkii noqda caadayste sharaabka Al-kaholka ah, had iyo goorna ku jira xaalad sakhradeed, waxaa loo qaadnayaa sakhraan caadayste ah.

**Qod. 56**
**Sakhradda ay keento dawooyinka lagu sakhraamo**

Caddaymaha qodobadaa aynu soo dhaafnay (53,54,55, Pc) waxaa lagu qaadayaa marka falka la galay ay keentay dawooyinka lagu sakhraamo.

**Qod. 57**
**Miyir beelka sakhradda ugu sarraysa**
**ee alkahoolka iyo dawooyinka lagu sakhraamo**

Marka xaaladda falka la sameeyay qofku ahaa sakhraan xad dhaaf ah oo ay keentay alkahool ama dawooyinka lagu sakhraamo, caddaymaha ku jira Qod 50 iyo 51 ayaa loo adeegsanayaa 173, 176.

**Qod. 58**
**Xaalad dhega la'aan iyo Garaad la'aan**

1. Qof dhego la' ama garaad la' wakhtiga uu falka galaya lahayn awood wax faham 47,173,176, sababta oo ah isaga oo aan garasho lahayn, sharciga looma cuskanayo.

2. Haddii awooda wax garashadu ama fahamku ay si weyn isu dhintay, laakiin aanay dhamaanteed noqon waxaan jirin, ciqaabta waa la dhimayaa 118,173.

**Qod. 59**
**Dadka ay da'doodu ka hoosayso afar iyo toban**

Qofku wakhtigaa uu galay falka, hadii aanu gaadhin afar iyo toban jir 177, xeerkaku ma qabanayo (47 Pc).

**Qod. 60**
**Dadka da'doodu ay ka yar tahay siddeed iyo toban**

1. Qof kasta wakhtiga uu falka galay, haddii uu gaadhay afar iyo toban jir oo aanu gaadhin sided iyo toban waa lagu qaadayaa (47 Pc) haddii awoodiisa wax faham ay jirto, ciqaabta waa la dhimayaa 119.

2. Marka xadhiga lagu qaaday uu ka yar yahay shan sano, ku gar niqidu ma wadanayso ciqaabaha dembi qarinta ama ka qayb qaadashada xaaladaha ciqaabtu ay aad u xun tahay, ku gar niqida waxaa la socda ka manuucidda xafiisyada dadweynaha muddo aan ka badnayn shan sano (37, 147).

**Qaybta 2aad**
Dambi ku noqnoqdayaasha, caadaystayaasha iyo dambiilayaasha xirfad ay u noqotay.

**Qod. 61**
**Ku noqnoqoshada**

1. Ku noqnoqde waxaa weeye qofka marka denbi lagu xukumo, mid kale gala.

2. ku noqnoqoshada waa la sii siyaadin karaa (124 Pc):

   a) Marka dembiga labaad uu kii hore la nooc yahay 63,
   b) Marka dembiga labaad la galo muddo shan sano ah oo ka dambeeya ku gar niqidii.
   c) Marka dembiga labaad la galo, muddo uu ku jiray xadhiga hore ama dabadeed ama wakhtiga uu qofka dambiga lagu xukumay uu iskii uga baxsado xadhigii.
   d) Marka ay jiraan in ka badan hal ku gar niqida horteed (124 Pc)

**Qod. 62**
**U banaanida garsooraha xaaladaha ku noqnoqoshada**

Ulajeeddada ku noqnoqoshadu haddii ay tahay, marka laga reebo xaaladaha ku gar niqida 63, garsooruhu wuxuu u madax banana yahay in aanu xisaabta ku darin ku gar niqid hore.denbila galay ama sharci darro marka lagu gar noqdo sharci darro uu galay ama denbi (15 Pc), amadenbila

galay ulajeedo dambiilenimo ama qasdi ama denbiyeelasho (23, 24 Pc) ama sharci darooyin (15 Pc)

**Qod. 63**
**Dambiyada isku nooca ah**

Ula jeedada xeerkakc ciqaabta (61, 62 Pc)denbiyada waxaa loo qaadanayaa kuwa isku nooca ah marka ay lug ku leeyihiin jebinta caddayn sharci isku ah. Dambiyadda isku nooca ah waxay iyana noqonayaan kuwo inkastoo lagu xukumayo caddaymo kala gedisan oo xeerkakan ah ama shuruuc kala duwan, laakiin iyadoo la eegayo dabeecada falka ay isku suuradda yihin ama isku hadafka yihin, keenna wejiyo si aasaasiya midaynaya.

**Qod. 64**
**Caadaysiga fudud ee sharcigu qabo**

1. Qof kasta marka xabsi lagu xukumo dabadeed muddo shan sano ka badan, iyadoo lagu siyaadiyay saddexdenbioo isku nooc ah (636 Pc), oo aan falka u gelin si dambiilenimo ah waxna u fallay muddo toban sano gudahood ah, dambiga u dambeeya kadib, waxaa lagu caddaynayaa in uu yahay caadayste dambiile.

2. Muddada la hayo qofka dambiga lagu xukumo, taas oo ku timid u gar niqid iyo xadhig ama ku timid sababo nabadgelyo awgeed, laguma darrayo ulajeedada tirada tobanka sano ee ku xusan faqrada aynu soo dhaafnay (68,79,70,91,172, Pc).

**Qod. 65**
**Caadaysiga denbiyada fudud ee garsooruhu caddeeyo**

Marka laga reebo dacwadda ku xusan Qod. aynu soo dhaafnay 165, qof waxaa lagu caddayn karaa caadayste dambiile ah, marka maxkamadi ku gar naqdo laba dembi dabadeed iyadoon wax ku fallin si dambiilenimo ah 15, 23, 24, ee haddana lagu garnaqo denbikale oo aanu u fallin si denbiyeelasho ah, marka garsooruhu, isaga oo ku xisaabtamaya dabiicadda iyo culayska dembiyada wakhtiga la galay falka, dabiicadda, nolosha ee demiilaha, dabeecadiisa iyo akhlaaqdiisa iyo duruufaha kale ee ku xusan Qod. 110, ay markaa ra'yiga xaakinka la noqoto mid caadaystay dembiyadda 68, 69 iyo 70.

**Qod. 66**
**Caadayste sharci darro**

Qof kasta oo lagu xidhay xadhig saddex denbi oo isku nooc ah ee haddana lagu xukumo xadhig kale oo sharci darro kale ah, oo siku nooc ah; waxaa lagu caddaynayaa in uu yahay caadayste dambiile, markaas oo garsooruhu isagoo ku xisaabtamaya dabiicadda iyo xawliga dambiyada, wakhtiga la galay falka, akhlaaqda iyo dabiicadda nolosha ee dambiilaha, iyo duruufaha kale ee ku xusan Qod 110, ay ra'yiga xaakimka la noqotay mid aan ka waantoobaynin denbiyada 68,69,70

**Qod. 67**
**Dambiilayaasha ay xirfad u noqotay**

Qof kasta oo fal gala, lagu caddayn karo in uu yahay caadayste dambiile, ee lagu gar naqo denbi kale waxaa algu caddaynayaa inuu yahay dambiile xirfad ka dhigtay, ama sharci daro leh, marka la eego dabeecadda dunuubta, akhlaaqdiisa iyo dabeecada nolosha ee dambiilaha iyo duruufaha

kale ee ku xusan qod 110 la arko inay caqli gal tahay in la rumaysto, in uu si caadayste ah u nool yahay; in kastoo qayb ahaan dambiyaddu ay is daba taxnaayeen 68, 69, 70.

**Qod. 68**
**Natiijada sal guurista dambiga ama ciqaabta**

1. Ulajeedada da' yarnimada iyo caddaynta qof inuu yahay caadayste, ama dambiile xirfadle ah, xisaabta waxaa lagu darayaa ku gar niqida dambiga ama ciqaabta ee la sal guuriyay (damis) 143, 147.

2. Caddaynta hore laguma qaadayo marka gufaacada dambiga ee ku gar niqistu iyana la dambio tahay.

**Qod. 69**
**Ku garniqidda dambiyo kala gedisan hal xukun**

Tilmaamaha la xidhidha caddaynta inuu qof yahay caadayste ama dambiile xirfad ka dhigtay, iyana waxaa lagu qaadayaa marka u gar niqidu dambiyo kala duwan lagu dhawaaqo ku gar niqid kaliya.

**Qod. 70**
**Saamaynta caddaymaha la xidhiidha caadayste iyo dambiilayaasha xirfadda ka dhigtay**

1. Marka lagu daro kordhinta ciqaabta ee ku xusan da'yarida iyo duruufo kasta oo kale oo uu qeexayo sharcigu, ku caddayn in uu qof yahay caadayste ama dambiile xirfad leh ah, waxay keenaysaa in loo cuskado tallaabooyinka nabadgelyada 161.

2. Ku dhawaaqidda inuu qof yahay caadayste ama dembiile xirfad leh ah, waxaa la samayn karaa wakhti kasta, xataa xadhiga dabadeed marka lagu qaado, laakiin marka lagu dhawaaqo xadhiga dabadeed, akhlaaqda dambiilaha markaa kadib laguma xisaabtamayo, ciqabta la saarayna lama beddeli doono.

3. Caddaynta inuu qof yahay caadayste ama dambiile xirfad ka dhigtay, waxay burayaan dib u dejinta dabadeed (marka uu qofku is beddelo).

**Qaybta 3aad**
Ka qayb qaadashada denbi in ka badan hal qof

**Qod. 71**
**Ciqaabta kuwa ka qayb qaata dambi**

Marka hal qof in ka badani ay ka qayb qaataan dambiga isku midka, qof kasta waxaa lagu qaadayaa ciqaabta loo qoondeeyay hadaanay, hadii kale ku caddayn Qod. soo socda.

**Qod. 72**
**Sababaynta qof in aan loo cuskan ama lagu ciqaabin inuu galo fal dambi**

Qof kasta oo sababeeya qof aandenbilahayn, ama aan ciqaab mudanaynin iyadoo lagu xisaabtamayo xaalada qofka iyo awoodiisa, inuu galo dambi, waxaa lagu ciqaabayaadenbiuu fallay qofkaas kale, iyo iyada oo ciqaabta la kordhin doono 118.

**Qod. 73**
**Sii xumaynta duruufaha ama xaaladaha**

1. Ciqaabta lagu qaadi doonodenbila galay waa la kordhin doonaa:

   a) Marka in ka badan shan qof ay ka qayb qaataan in la galo dambi, hadaanay, hadii kale sharciga ku qeexnayn 266, 305, 481,
   b) Dacwada dadka xataa marka laga reebo, dacwadaha ku xusan xubinta faqradda C iyo D ee hoos ku qoran kor loo qaado, ama la abaabulo ka qayb qaadashada dambiga, ama la hor kaco falka dadkaas ka qayb qaatay dambigaas.
   c) Dacwooyinka dadka iyagoo fahmaya awoodooda tilmaamidooda iyo maamulidooda sababeeya dad kale oo hooseeya inay denbi galaan.
   d) Dacwadaha dadka marka laga reebo dacwadaha ku xusan qod aynu soo dhaafnay sababeeya qof sided iyo toban jir ka yar ama qof xaaladiisa maskaxeed ama dhiman tahay (48 Pc), in uu falo dambi.

2. Kordhinta ciqaabta ku xusan xuruufaha A,B iyo C ee faqradii hore, waxaa loo cuskan doonaa xataa haddii qofka mid ah dadka ka qayb qaadanaya falka aan loo cuskan Karin ama lagu ciqaabi Karin 47,26,27,28,32, iyo 38.

**Qod. 74**
**Ka qayb qaadashada denbiyada la galay si denbi lahaaneed**

1. Dacwada denbi la galay si denbi yeelasho ah (24), Marka dhacdadu ay sababtay ka qayb qaadashaa in ka badan hal qof, Qof kasta waxa lagu qaadayaa ciqaabta u qoondaysan dambiga la soo sheegay.

2. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118), dacwada qof sababa dad kale in ay ka qayb qaataan dambigaas, kolka xaaladaha loo asteeyay ee Qod. 72 iyo xarafyada C iyo D ee faqrada koowaad ee Qod. aynu soo dhaafnay uu sugmo.

**Qod. 75**
**Wax ku darista ama murginta duruufaha**

1. Marka garsooruhu ay ra’yigiisa la noqoto kaalmadii uu amaahiyay qof kasta oo ka mid ah dadkaas ka qayb qaatay dambiga sida Qod. ku xusan 71,74, ka qaatay kaalin qayb yar diyaarinta iyo fulinta iyo dambiga wuu dhimi karaa ciqaabta (119).

2. Caddaymihii hore looma cuksanayo dacwadaha ku xusan Qod. 73.

3. Sidoo kale ayaa ciqaabta ayay banaantay in ciqaabta hoos loo dhigo (119), dacwada qof la sababeeyay inuu galayo fal denbi ama inuu ka qayb qaato sidoo kale marka shuruudaha loo dhigay xarafyada ee faqrada koowaad ee Qod. 73 uu sugmo.

**Qod. 76**
**Heshiis in la galo dambi**

1. Haddii ay tahay, ama aanay ahayn mid sharciga ku qeexan (232) Marka dad laba ama in ka badan ay ku heshiiyaan inay denbi galaan; ee aan la falin, qofnaba laguma ciqaabi doono falkii heshiiska uu galay awgeed, laakiin dacwad heshiis indenbila galo, garsooraha waxa u banaan inuu cuskado tallaabooyin nabadgalyo.

2. Cadaymo la mid ah ayaa loo cuskan doonaa dacwada u kor kicida in fal la galo, marka u hor kicida si niyad san loo aqbalo laakiin falkii aan la galin.

3. Marka u hor kicidu koox ahaan uun looga qayb galo ee aan si niyadsan loo aqbalin abaabulaha wuxuu hoos imanayaa talaabooyin nabadgelyo.

**Qod. 77**
**Dambiyada ka duwan kuwa qastigoodu ahaa qof kasta oo ka qayb qaadanaya**

1. Marka falka la galay uu ka duwan yahay kii uu u jeeday qof ka mid ah kuwii ka qayb qaatay qofkaas isna waa uu qabanayaa sharcigu haddii dhacdadu ay noqoto cawaaqibka falkiisii ama burinta (110).

2. Marka dambiga la galay ka khatarsanyay kii loo jeeday, ciqaabta ayaa la dhimi doonaa (119), taasi waxay ku saabsanaan qofkii go'aansaday dambiga ka yar.

**Qod. 78**
**Beddelka dabeecada dambiga ee uu keeno mid uun ka mid ah ka qayb qaadayaasha**

1. Marka iyadoo la eegayo xaalada qofka ama dadnimada dambiilaha, ama xidhiidhka ka dhexeeya dambiilaha iyo dhinaca dhibaatadu gaadhay, dabeecada dambiga ay bedesho mid ka mid ah ka qayb qaatayaasha, kuwa kale waxa qabanaya mid la mid ah dambigaas ay galeen.

2. Laakiin si kastaba ah ahaatee marka falkani uu ka sii khatarsan yahay garsooruhu waxaa u furan yaraynta ciqaabta shuruudaha aynu soo sheeganay, sifooyinka ama xidhiidh aanu jirin.

**Qod. 79**
**Qiimaynta sii xumaynta ama fududaynta xaaladaha**

1. Xaaladaha dabiiciga ah (44) ee kordhiya ama dhima ciqaabta, xataa haddii aanay ogayn dhamaan kuwa ka qayb qaatay dambiga, waxa loo xisaabin doonaa lidkooda ama dantooda.

2. Xaaladaha dadka keena (41) ee kordhiya ciqaabta marka loo eego qof kasta oo ka mid ah kuwa dambiga ka qayb qaatay, wuxuu kale oo nqon doonaa mid ku lid ah kuwa kale, xataa hadaanay ogayn iyagu markii ay gacanta siinayeen sharciga dambiga.

3. Xaalad kale oo kasta oo kordhisa ama dhinta dambiga waxa loo xisaabin doonaa oo keliya qofka iyadu ay saameyso (42).

**Qod. 80**
**Qiimaynta xaalada reebaysa ciqaabta**

1. Xaaladaha dadka keena (41) ee reebaysa ciqaab ku saabsan qof ka mida dadka ka qayb qaatay dambiga waxay qabanaysaa oo keliya dadka loo cuskanayo.

2. Xaaladaha dabiiciga ah (41) ee reebaya ciqaabta waxay qaban doonaan dadka oo dhan kuwaas ka qayb qaatay dambiga unuga labaad dhinaca dhibaatadu dambigu gaadhay.

**Cutubka 2aad**
Dhinaca dhibbanaha wax gaadheen

**Qod. 81**
**Xaqa samaynta dacwad**

Marka laga reebo denbiyada ku saabsan kuwa qaranku uu soo qaban qaabiyo,denbi kale waxa lagu ciqaabi doonaa dacwad qaybta la dhaawacay u dhigan.

**Qod. 82**
**Isticmaalidda xaqa dacwada dadka naafaysan**

1. Marka dhinaca dhibaatadu gaadhay uu ka yar yahay 14 sano da’ ahaan ama uu yahay naafo marka la eego dhinaca maskaxda oo dhamayn xaqa samaynta dacwad waxa samayn kara wakiilkiisa sharciga ah.

2. Dacwada maqnaanshaha ama naafanimada wakiilka sharciga ee wakiilka sharcigu wuu leeyahay dano ka soo horjeeda kuwa dhinaca dhibaatadu gaadhay, xaqa dacwada waxa samayn kara wakiil gaar ah 85,86,87,88,89.

**Qod. 83**
**Dacwada in ka badan hal qof la dhibaateeyo**

1. Fal laga galay in ka badan hal qof waxa ciqaab lagu mudan doonaa xataa haddii dacwada uu soo gudbiyo mid ka mida oo kaliya dhinaca la dhaawacay.

2. Dacwada way shqayn doontaa si mid ah xaqa ku lid ah kuwa kale ee ka qayb qaatay oo dhan ku shuruga dambiga.

**Qod. 84**
**Xadaynta wakdhtiga ee dacwada**

Haddaan hadii kale sharcigu tilmaamin, xaqa dacwad samaynta waxa la qaban karaa markay dhamaadka hal bil kaliya marka laga bilaabo taariikhda ee falka dambiga la galay la hor keeno ogaanshaha dhinaca la dhaawacay.

**Qod. 85**
**Xaqa samaynta dacwada**

1. Xaqa samaynta dacwada waxa la isticmaali karaa marka si cad ama si fasiran ugu sheego qofka xaqa u leh inuu isticmaalo xaqu waxa loo qaadan karaa in la isticmaalay marka qofka xaqa u leh dacwada inuu sameeyo uu ka talaabsado falal ka soo horjeeda ujeedada xaqa isticmaalida.

2. Wargelintaas waxay fidsanaanaysaa si iskeed dadkii ka qayb qaadatay shuruga dambiga, si kastaba ha ahaatee saamayn kuma yeelan doonto marka loo eego qof kale oo ka mida dhinaca la dhaawacay oo xaq u leh inuu dacwada.

**Qod. 86**
**Ka noqoshada dacwada**

Haddii sharcigu uusan si kale u tilmaamin, dacwad waa laga noqon karaa si cad garsooridda horteeda muddada marxalada u horaysa maxkamaddda inta aan la sheegin, meesha ay jiraan in ka badan hal dacwo, ka noqoshada mid ka mid ah iyaga uma shaqayn doonto ka noqosho oo kale marka loo eego kuwa kale 87,88.

**Qod. 87**
**Aqbalaadda ka noqoshada dacwada**

1. Ka noqoshada dacwad saamayn ma yeelan doonto marka qofka dacwada laga sameeyey uu si cad u diido.

2. Ka noqosho u dana mid kali ah dadka ka qayb qaatay ku shuruga dambiga waxay u fidsanaan doontaa dhamaantood. Laakiin saamayn kuma yeelanayso marka loo eego qof kasta oo kale oo diida.

3. Tilmaamaha Qod. (82) waxay qaban doonaan marka loo eego baaxada aqbalaada ka noqoshada 88.

**Qod. 88**
**Shuruudaha ku saabsan ka noqoshada aqbalaadda ama diidmada**

Ka noqoshada dacwada ama aqbalaadda ama diidmada kuma samayn doono iyadoo lagu xidhayo qodobbo kale ama shuruudo.

**Qod. 89**
**Dambiyada murugsan**

Dacwadda ku cad Qod. (46), qaadista dambiyaa murugsan waxa soo abaabuli doona dawlad qaranka marka mid ka mida denbiyada ay yihiin unugyo ama xaaladaha sii xumaynayaan markaas dacwadaha waa inay soo abaabusho dawlada qaranku.

## CINWAANKA 4AAD
Ciqaabta

### Cutubka 1aad
Noocyada ciqaabaha ee guud ahaan

#### Qod. 90
#### Ciqaabaha waaweyn

1. Ciqaabaha waaweyni ee u qoondaysan denbiyada waxay noqonayaan: dhimasho (16) distoorka (94):

    a) Dil (94)
    b) Xabsi daa'im (madaxa ha ku furto)
    c) Xabsi (96)
    d) Ganaax (kala duwan 97)

2. Ciqaab madaxeedyada loo cuskanayo sharci darrooyinka waxay noqon doonaan:

    a) Xabsi 98
    b) Ganaax

#### Qod. 91
#### Bayaaminta ciqaabaha ugu waaweyn

1. Ereyada "ciqaab haynta" ama ciqaabo xayiraya xorriyadda qofka (44 Const) waxa ku jiraya xabsiga madaxaa ha ku furto, xabsiga dembiyada iyo xabsiga sharci darrooyinka (95,96,98 Pc).

2. Ereyada "ciqaabta fudud", waxa ka mid ah ganaax dunuubta iyo ganaaxa sharci darrooyinka (97,99).

#### Qod. 92
#### Ciqaab kororsiimada

1. Ciqaab kororsiimada dambiyadu waxay noqon doontaa

    a) Ka joojinta xafiisyada dadweynaha (101-102)
    b) Ka joojinta xirfad ama ganacsi (103,104)
    c) Ka joojinta maamul garsoor

2. Kordhinta ciqaabta sharci darrooyinka waxa noqon doontaa ka hakin muddo xagga ku shaqayn xirfad ama ganacsi (107)

3. Xeerkaka Ciqaabta ayaa tilmaami doona xaaladaha ciqaab saayidinta lagu qaadayo denbiyada sharci darrada.

**Qod. 93**
**U cuskashada ciqaabaha waaweyn iyo ciqaabo kordhinta**

Ciqaab madaxeedka (90) waxa qaadi doona garsoore marka ku garniqidda ciqaab kordhinta (92) waxay daba socon doontaa hawlgalka sharciga oo ah cidhibka ku garniqidda.

**Cutubka 2aad**
Ciqaabaha ugu waaweyn

**Qod. 94**
**Ciqaabta dilka**

Ciqaabta dilku (90) waxa loo qaadi doonaa dil toogasho ah meel gudaheed ama meel kasta oo kale ee masiirka caddaaladdu tilmaamo (108).

**Qod. 95**
**Xabsiga madaxaa ha ku furto (xabsi daa'im)**

Ciqaabta xabsiga madaxaa ha ku furto (90) waxa lagu qaadan doonaa xarun loo qoondeeyay ujeedada iyada oo la raacinayo shaqo khashab ah 44,62,105.

**Qod. 96**
**Xarigga dambiyada**

Xadhiga denbiyada (90) waxay gaadhi kartaa ciqaabta shan ilaa 24 sano waxaa lagu qaadan doonaa xarun loo qoondeeyay ujeeaddada iyada oo lagu darayo shaqo khasab ah (44, 102, 105, 106).

**Qod. 97**
**Ganaaxa dunuubta**

1. Ciqaabta ganaaxa ee dambiga (90) waxay ka koobnaan siin dawladda qaranka qadar aan ka yarayn 10/= Sh aan kana badnayn 50,000/= Sh.

2. Dambiyada ay soo jiitaan dan faa'iido in kasta oo ciqaabta sharcigu u dhigay ay tahay cabsi kali ah, garsooraha waxa u furan dheeraad ahaan ganaax taxan 10/= Sh ilaa 20,000/= Sh.

3. Meesha sharcigu u qoondeeyay ganaaxa haddii ay u muuqato inay shaqaynayso iyada oo ay sababtay xaaladda lacageed ee dambiilaha, xaakimku waxa u bannaan in uu kordhiyo qadarka ilaa saddex laab.

**Qod. 98**
**Xabsiga sharci darrooyinka**

1. Ciqaabta xabsiga sharci darrooyinku (90) waxay fidsanaan kartaa shan cisho ilaa saddex sano, waxaana lagu qaadan doonaa xarun loo qoondeeyay ujeeddada ama xubin gaar ah oo ka mid ah xarumaha loo qoondeeyay in loo isticmaalo xabsiyada dambiyada, iyo shaqo khasab ah 107, 136.

2. Qofka lagu xukumay xabsi, waxaa u furan in loo shaqaaleeyo mid ka duwan taas caadiga ah ee la tilmaamay ee gudaha xarunta iyadoo loo eegayo wax qabadkiisa iyo shaqooyinkiisii hore (44)

**Qod. 99**
**Ganaax sharci darrooyinka**

1. Ciqaabta ganaaxa sharci daarradu wuxuu ka koobnaan doonaa in la siiyo dawladda qaranka qadar lacag ah oo aan ka yarayn laba shilling kana badnayn toban kun oo shillin.

2. Meesha sharciga loo dhigay ganaaxa uu u muuqdo in aanu shaqaynayn taas oo sabab u tahay xaaladda lacageed ee dambiilaha, garsooraha waxaa u furan inuu kordhiyo qadarka ilaa saddex laab.

**Qod. 100**
**Xadaynta iyo isku qiyaasidda ciqaabta yaryar**

1. Xaaladaha ciqaabta yar yar wey sugan yihiin kuwa lagu dhererinayana sharciga ayaa qeexi doona.

2. Ciqaabaha isku dhererinta ma yeelan doonto meel ay ku joogsanayso oo ugu sarraysa.

**Cutubka 3aad**
Ciqaabaha dheeraadka ah

**Qod. 101**
**Ciqaabaha dheeraadka ah**

1. Ka xayiraadda xafiisyada dadweynaha (92) waxay noqon kartaa mid joogto ah ama ku meel gaadh ah.

2. Haddii sharcigu aanu si kale u dhigin, ka xayiraadda joogtada ah ee xafiisyada dadweynuhu waxay ka qaadi doontaa qofka lagu garnaqay:

   a) Xaqa doorashada ama in la doorto, iyo xaq kasta oo kale oo siyaasadeed,
   b) Xafiis dadweyne oo kasta, arrin kasta oo shqo oo dadweynuhu leeyahay oo khasab ahayn, iyo xuquuqda la xidhiidha ku saabsan ahaanta sarkaal xafiis dadweyne ama qof kale oo lagu aaminay xil dadweyne.
   c) Xafiiska ilaalinta ama wakiilka garsoorka, xataa ku meel gaadh ahaan, iyo xafiis kale oo kasta oo ilaalineed ama jago wakiilnimo oo garsoorka.
   d) Jagooyin tacliineed, darajooyin ama astaamo sharafeed dadweyne.
   e) Gunnooyin, hawl gabyo iyo gunnooyin dawladda qaranka ama noqosho meel ummadeed xubinimadeed.

   f) Sharaf kale oo kasta, xafiisyo kale oo kasta, shaqooyin kale oo kasta, darajooyin kale oo kasta, xurmayn iyo caleemo saarid ku xusan faqradda aynu soo dhaafnay.

   g) Awood uu ku qabto ama helo xaq, xafiis, shaqo, xil, darajo, caleemo saar iyo sharaf ku xusan faqradda aynu soo dhaafnay.

3. Ka xayiraada ku meel gaadh ahi waxay qofka xukumay ka qaadaysaa awooda inuu helo kushaqeeyo ama ku raaxaysto, muddada xayiraada, xuquuqda aynu soo sheeganay, xafiisyada, shaqooyinka, qiimaha, darajooyinka iyo sharafyadda. Muddada xayiraadaas ku meel gaadhka ahi kama yaraan doonto hal sanno hadana kama badnaan doonto shan sano.

4. Xaaladaha ka xayiraadda xafiisyo sugan waxaana qeexi doona sharciga.

**Qod. 102**
**Xaaladaha xarig ee ay daba socoto xayiraadda xafiisyada dadweynaha**

1. Xadhig xabsi daa'in (90, 95) iyo ka xabsiga dambiga ah (90, 96) muddo aan ka yarayn shan sanno, waxaa daba socon doona xayiraad waarta oo qofka la xukumay ka xayiraysa xafiisyada dadweynaha (101 pc). Xadhig xabsi oo dambi (96 pc) muddo aan ka yarayn saddex sanno, waxaa daba socon doona xayiraad xafiisyo dadweyne muddo shan sanadood ah (101 pc).

2. Caddayn in qof caadayste yahay iyo dambiile xirfad ka dhigtay (64, 65, 67 pc) waxaa daba socon doona ka xayiraad joogto ah xafiisyadda dadweynaha (101 pc).

**Qod. 103**
**Ka xayiraad xirfadaha ama ganacsiga**

Xayiraadda xirfada ama shaqda (92 pc waxay ka qaadaysaa qofka lagu garnaqay awooda isticmaalista, muddada xayriaada, xirfadda farshaxanka, warshadda, ganacsiga iyo baaayac mushtariga, marka loo eego rukhsad kasta oo gaar ah, shahaado, amar bixin liisan loo baahan yahay, waxaana daba socon doona burinta rukhussadaas, shahaado, amar bixin ama liisan. Muddada xayiraaddu kama yaraan doonto bil, haddana kama badnaan doonto shan sanno marka laga reebo xaaladaha sharcigu si cad u qeexay.

**Qod. 104**
**Ku garniqid dembiyo dhacay iyada oo la socoto meel**
**kaga dhac xafiis dadweyne ama xirfad ama ka xayiraad ganacsi**

Ku garniqid kasta marka loo eego dembiyadda la galay oo ay la socoto meel kaga dhaca awoodaha, ama burinta waajibaadka madaxa ka saaran xafiis ama adeeg dadweyne, ama xafiisyo kasta oo ku cad faqradda labo (C) ee qodob 101 iyo meel kaga dhac xirfad kasta, taasi waxaa daba socon doona ka xayiraad xafiisyadda dadweynaha ku meel gaadh ahaan ama xirfadaha farshaxanka wershadda, ganacsiga ama baayac mushtarka (106 Pc).

**Qod. 105**
**Xayiraadda garsoorka**

1. Qof kasta oo lagu xidhay xabsi daa'im (95 Pc) wuxuu hoos iman doonaa xayiraadda garsoorka (92 Pc).

2. Qof kasta oo lagu xidhay xabsi denbi (91, 96 Pc) muddo aan ka yarayn shan sano wuxuu hoos iman doonaa xayiraad garsoor (106 Pc) muddada ciqaabta.

Ula jeedada muujinta iyo maamulidda hantida iyo noqoshada wakiil ahaan ee la xidhiidha taas caddaymaha sharciga madaniga ah ee xayiraadda garsoorka ayaa lagu qaadi doonaa.

**Qod. 106**
**Xadhig dambiyada la galay ee dambiilenimo**

1. Tilmaamaha Qod. 102 iyo faqradda labaad ee Qod. hore looma cuskan doono xaaladda xadhiga dembiga la galay dambiilenimo (24 Pc).

2. Caddaymaha Qod. 104 looma cuskan doono xaaladaha xadhigadenbila galay si dambiilenimo (24 Pc) meesha ciqaabta la saaray ay ka yar tahay xabsi saddex sano ah ama meesha la saaray ciqaab yar oo keliya.

**Qod. 107**
**Ka joojinta isticmaalidda xirfad ama ganacsi**

1. Ka joojinta isticmaalidda xirfad ama ganacsi (92 Pc) waxay ka qaadaysaa qofka lagu gar naqay baaxada isticmaalidda muddo aan ka yarayn shan iyo toban maalmood kana badnayn laba sano, xirfad, farshaxan, wershad, ganacsi ama baayac mushtari marka loo eego rukhsad gaar ahaaneed, shahaado, u fasixid ama baahi liisan.

2. Xadhig ku saabsan sharci darro la galay oo ay la socoto ku xad gudub xirfadeed, farshaxan, wershad, ganacsi, ama baayac mushtari ama ku xad gudub waajibaadka la xidhiihd taas halka ciqaabta la saaray aaanay ka yarayn xabsi sannad ah, waxa daba socon doona ka joojinta isticmaalidda xirfadahaas ama ganacsiga (98 Pc).

**Qod. 108**
**Muunadda cadaaladeed ee qof lagu xukumay dil**

Muunadda cadaaladeed ee qof lagu xukumay dil (94 Pc) waxay la mid noqon doontaa ta qof xabsi daa'im lagu xukumay oo kale (95 Pc).

**Cutubka 4aad**
Adeegsiga iyo asal doorinta ciqaabta

**Qaybta 1aad**
Caddaymaha guud

**Qod. 109**
**Awoodaha dheeraadka ah ee garsooraha iyo ciqaab saarida: xuduudaha.**

1. Ku xadaynta sharcigu qeexayo, garsooruhu wuxuu u adeegsan doonaa ciqaabta awoodihiisa garasho (110 Pc) wuxuu caddayn doonaa sababaha uu u isticmaalay awoodiisan u fasaxan (97 Const)

2. Kordhinta yo dhimista ciqaabta garsooruhu ma dhaafinayo xadka ciqaab nooc kasta loo dhigay, aan ahayn xaaladdaha si cad sharcigu u qeexay.

3. Meesha xaakinku uu ku dhawaaqo xadhig xabsi (91 Pc) muddo aan ka badnayn sannad, xadhiga ha ku jirto ama yay ku jirin ciqaabaha yar yar (91 Pc) oo ku lid ah dambiile aan mar hore ku gar niqid faldenbioo ula jeedodenbileh lagu garniqin (24 Pc), waxa u furan, haddii uu dambiiluhu codsado, iyo isaga oo ku xisaabtamaya xaaladaha ku xusan Qod. (110 Pc), amri u

beddelid xabsiga ciqaabaha yar yar ee u dhigma isaga oo ku xisaabinaya si waafaqsan Qod. (112 Pc).

4. Dambiyadaas aynu ku xusnay Qod. aynu soo dhaafnay waxay ku xidhnaan doonaan shuruuda ah in dambiiluhu, muddada uu garsooruhu caddeeyo, bixiyo qadarka lacagta ah iyadda oo lagu sababaynayo rogis (1,2 Pc), iyo fulin amar madaniya oo kasta oo bixinaya magdhow ay leeyihiin dhinaca dhibanuhu.

**Qod. 110**
**Culayska dambiga: qiimaynta ujeeddooyinka ciqaabta**

1. Iyada oo la isticmaalayo awoodaha dheeraadka ah ee ku xusan Qod. aynu soo dhaafnay, garsooruhu wuxuu xisaabta ku dari doonaa culayska dambiga, kuwaas oo laga soo dheegay:

   a) Dabeecada, shakhsiyadda, wasiiladda, shayga, wakhtiga, goobta iyo xaalad kasta oo kale ee falka.
   b) Culayska wax yeeladda ama khatarta ay sababaysay ee dhinaca dhibanaha kana timid dambiilaha.
   c) Miisaanka qasdiga dambiilaha, ama heerka dambiilenimada (24 Pc)

2. Xaakinku sidoo kale ayuu xisaabta ku dari doonaa mujrimnimada dambiilaha baaxadeeda taas oo laga soo dheegtay:

   a) Hamadiisii inuu galodenbiiyo shakhsiyadda dambiilaha.
   b) Diiwaanka denbi ee dambiilaha, iyo guud ahaan, akhlaaqda iyo dambiilaha dambiga horteed,
   c) Akhlaaqda wakhtigaas ama dambiga dabadeed.
   d) Qofnimada noloshiisa iyo xaaladda bulsho ee nololeed ee dambiilaha (164 Pc)

**Qod. 111**
**Xisaabinta ciqaabta**

1. Ciqaabta muddo wakhtigi ah (96,98 Pc) waxaa loo cuskan doonaa maalmo bilo iyo sannado (12 Pc)

2. Xadhiga lagu ciqaabo muddo wakhti ah laguma xisaabtamayo jar jar maalina iyo xadhiga ciqaabta yar yar, jar jar shillin Soomaali ah.

**Qod. 112**
**Isku midnimada ciqaabaha kala duwan**

Marka ay noqoto lagama maarmaan in la isla eykeysiiyo denbiyada yar yar iyo ciqaabta haynta (91 Pc), xisaabtanka waxaa lagu fadhiisin doonaa salkeeda shan iyo labaatan shilin Soomaali ama jar jar taas ah hal maalin oo ah ciqaabta haynta ee dambiyadda fudud.

**Qod. 113**
**Roggida ciqaabta yar yar**

1. Ciqaabaha ganaaxa denbi (97 Pc) ama sharci darro (99 Pc) ee aan la fullin qofka oo aan awoodi Karin awgeed waxaa loogu rogayaa xabsi (96 Pc) muddo aan ka badnayn saddex sano iyo xabsi

(98 Pc) muddo aan ka badnayn laba sano. Xaaladahan xadka u yar ee ciqaabta haynta aynu soo sheegnay wey ka yaraan kartaa taas ku qeexan qodobadda 96,93.

2. Qofka la xidhay wakhti kasta wuxuu keeni karaa wuxuu ku beddesho ciqaabta si kama dambays ah, isagoo bixinaya ciqaabta oo hoos loo dhigay qadar lacageed oo u dhiganta muddada ciqaabta dambiga uu horey u soo qaatay.

**Qod. 114**
**Haynta xabsiga ka hor**

1. Muddada haynta ee ka horaysay xukumaada marka ay noqoto kama dambays waxaa laga jari doonaa muddada guud ee ciqaabta haynta (91 Pc) ama qadarka ee ciqaabta haynta ee la saaray (91 Pc).

2. Ulajeedada wax dhimista, xadhiga haynta horteed waxa loo qaadan doonaa inay xabsidenbiahayd (96 Pc) ama sharci darro (98 Pc).

**Qod. 115**
**Ciqaabta iyo haynta ka hor xadhiga ku**
**saabsan denbiyada dibadda dalka lagu falo**

Marka qofku dibedda xukun lagu qaaday haddana dalka gudihiisa lagu xukumo, ciqaabtu dibadda ku soo qaatay iyo dabeecadii ay lahayd waa lagu xisaabtami doonaa, marka xadhiga dibedda lagu qaaday ay hayni ka horayso, caddaymaha Qod. hore ayaa loo cuskan doonaa.

**Qod. 116**
**Xisaabinta denbiyada saa'idinta marka la**
**xisaabinayo denbi saa'idinta ku meel gaadhka ah**

(101,103,105,107 Pc) lagu xisaabtamayo mudada wakhtiga qofka la xukumay uu jiro haynta ciqaabta (91 Pc) ama uu jiro talaabooyinka nabadgelyo ee haynta (172 Pc) lagamana xisaabtamyo wakhtiga mudada uu si kas ah ugu fakaday fulinta ciqaabta ama talaabooyinka nabadgelyo.

**Qaybta 2aad**

U cuskashada iyo asal doorinta ciqaabta marka ay dhacaan in ka badan mid ama xaalad xumayn ah ama mid xaalad yarayn ah marka isku dayga falka

**Qod. 117**
**Dhimista ama kordhinta ciqaabta**

1. Marka uu sharcigu qeexo in ciqaab la kordhiyo ama la dhimo xuduud cad oo kordhinta ma dhimista waxa loo cuskan doonaa iskugaynta ciqaabta taas oo uu garsooruhbu saari doono dambiilaha haddii xaaladdu ay sababayso kordhin ama dhimistu aanay jirin.

2. Marka in ka badan bixid xaalad siyaadin ah ama mid xaalad yarayn ah in ka badan dhacdo, kordhinta iyo dhimissta ciqaabtu waxa loo cuskan doonaa isugaynta ciqaabta natiijada kordhinta ama dhimista aynu soo sheegnay.

3. Mar kasta xaalad kasta sharcigu caddeeyo ciqaab dabiid ka duwan ama uu xadido talaabooyinkeed si ka duwan ciqaabta caadiga ah, kordhinta iyo dhimistu xaaladaha kale looma cuskanayo caadiga ee dambiga, waxase loo cuskanayaa ciqaabta xadidan ee xaaladaha aynu soo sheegnay.

4. Marka ay dhacdo in ka badan hal xaalad oo ka mid ah ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan ta kali ah ee ugu dhibaato badan ee u qoondaysan ayaa loo cuskanayaa, laakiin garsooruhu wuu kordhin karaa.

5. Markay dhacdo in ka badan hal xaalad oo ka mid ah kuwa ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan, ta ugu dhibaatada yar ciqaabta ee u qoondaysan xaaladaha aynu soo sheegnay ayaa loo cuskanayaa, laakiin garsooruhu wuu kordhin karaa.

## Qod. 118
## Kordhinta ciqaabta marka hal xaalad murgin ay jirto

Marka ay dhacdo hal mid xaalad kordhin kordhinta ciqaabta aanay xadidnayn sharci ahaan ciqaabta la cuskan doono dambiga la galay waxa la kordhin doonaa saddexaad si kastaba ha ahaato,denbiee loo cuskan doonaa ujeedada kordhinta ma dhaafayso 30 sano.

## Qod. 119
## Dhimista ciqaabta marka hal denbi fududayn xaaladeed jirto

Marka ay dhacdo mid keliya oo xaalad fududayn ah, oo dhimista ciqaabta aan sharci xadidin:

a) Xabsi daa'im (94 Pc) ama xabsi (96 Pc) u dhexeeya 20 ilaa soddon sano ayaa lagu beddeli doona ciqaabta dilka.
b) Xabsi (96 Pc) labaatan ilaa afar iyo labaatan sano ayaa lagu bedeli doonaa xabsi daa'in (95 Pc)
c) Ciqaabaha kale (90, 92 Pc) waxaa la dhimi doonaa in aan ka badnayn saddex dalool hal dalool.

## Qod. 120
## Xadaynta ciqaab kordhinta marka ay dhacdo in ka badan hal xaalad siyaadin ah

Marka ay dhacdo in ka badan hal xaalad siyaadin ah, ciqaabta loo cuskanayo cidhib dambeedkeeda ee krodhinta kama badan doonto saddex laab inta ugu saraysa ee sharcigu u qoondeeyay dambigaas, haddaanay xaaladaha la xusay ahayn kuwa faqradda saddexaad ee Qod. 117, sinaba ugama badnaan doonaan:

a) Soddon sano, marka xadhigu yahay mid denbi (96 Pc).

b) Shan sano, marka xadhigu yahay sharci darro awgeed (98 Pc)

c) Boqol kun ama labaatan kun Somali shilling sida ay u kala dhigan yihiin, marka ganaaxu yahay fal denbi (97 Pc) ama uu yahay fal sharci darro (99 Pc) ama saddex boqol oo kun ama lixdan kun oo shilin Somali ah sida ay ka yihiin, haddii xaakimku ka faa'iidaysto awooda ku tilmaama faqradda 3aad ee Qod. 97 iyo faqradda labaad ee Qod. 99.

**Qod. 121**
**Caddaynta dhimista ciqaabta marka**
**ay dhacdo xaalad fududayn ka badan mid**

1. Marka ay dhacdo in ka badan hal xaalad yarayn ah, ciqaabta loo cuskanayo cidhib dambeedkeeda dhimisyada kama yaraan doonto:

   a) Shan iyo toban sano oo xadhig ah (96 Pc) marka sharcigu tilmaamayo ciqaab dil ah (94 Pc) oo ku saabsan dambi.
   b) Toban sano oo xadhig ah (96 Pc) marka sharcigu tilmaamayo xabsi daa'in (95 Pc) oo ku saabsan dambi.

2. Ciqaabaha kale waa la dhimi doonaa marka haddaanay xaaladuhu ahayn kuwa ku tilmaaman faqradda 3aad ee Qod. 117 ciqaabtu kama yaraan doonto rubuc ama afar dalool oo hal dalool.

**Qod. 122**
**Xadaynta dhicidda xaaladaha**

Hadaanay ahayn kuwa ku cad Qod. 13, halkaas oo xaalad xumaynta ay ku jirto, xaalad xumayn kale, ama xaalad yaraynta ay ku jirto xaalad yarayn kale, xaalad xumaynta ama xaalad fududaynta oo kaliya oo ay daba socoto midba teeda, kordhinta badan ama dhimista badan ee ciqaabeed ayaa loo xisaabin doonaa ku lid ah ama u dan ah dembiilaha. Haddii xaalad xumaynuhu ama xaalad ayaraynuhu ay soo jiidanayaan si isku mid ah kordhinta ama si isku mid ah dhimista ciqaabta, mid kaliya kordhinta ama mid kaliya dhimista ciqaabta ayaa la saari doonaa.

**Qod. 123**
**Dhicista xaalad xumaynta iyo xaalado fududaynta**

1. Marka xaalad xumaynta iyo xaalad fududayntu si siku jir ah u dhacaan ee ka hore uu ka weynaado, xisaabtanka laguma dari doono. Dhimista ciqaabta ee ku saabsan xaalad fududaynta, iyo kordhinta ciqaabta oo kaliya oo ku xusan xaalad xumaynta ayaa loo cuskan doonaa.

2. Marka xaalad fududayntu ay hadheeyaan xaalad kordhinta laguma xisaabtamayo kordhimaha ciqaabta ku xusan arrinta dambe, kordhimaha ciqaabtuna keligood ku xusan arrimaha ku saabsan xaalad fududaynta ayaa loo cuskan doonaa.

3. Marka garsooruhu ku qiyaaso is leekaan ka dhaxeysa xaalad xumaynta iyo xaalad fududaynta ciqaabtii lagu qaadi lahaa haddaanay dhicin mid ka mid ah xaaladaha aynu soo sheegnay ayaa loo cuskan doonaa.

4. Caddaymaha aynu soo sheegnay looma cuskanayo xaalada ku saabsan da' yaraanta (61 Pc) iyo xaalad kale oo kasta oo sharcigu u qoondeeyay ciqaab ka dabiicad duwan ama u xaddayn qiyaasta ciqaabta oo ka duwan kan caadiga ah ee dambiga.

**Qod. 124**
**Kordhinta ciqaabta ee xaaladaha ku noqnoqoshada dembiga**

1. Haaladaha ku noqnoqoshada dembiga (61 Pc) ciqaabta waxaa la kordhin doonaa lix meeloodow hal meel.

2. Marka ay isbiirsadaan xaaladaha ku xusan xarfaha *a),b),c)* iyo *d)* ee faqradda labaad ee qodobka 61, ciqaabta waxaa la kordhin doonaa ilaa saddex daloolow hal dalool.

3. Marka ay isbiirsadaan laba iyo wixii ka badan ee xaaladaha kor ku xusan, faqradda labaad ee Qod. 61, ciqaabta waxaa la kordhin saddex dalool hal dalool ilaa saddex dalool laba dalool.

**Qod. 125**
**Ciqaabta dambiga la isku dayo**

Cid kasta oo ku sugnaata in ay gasho isku day dambi (17 Pc) waa la ciqaabi doonaa:

a) Xabsi (96 Pc) labaatan ilaa sododon sano, marka sharcigu tilmaamo ciqaabta dilka ee ku saabsan denbi la falay (194, 16 Pc)

b) Xabsi (96 Pc) aan ka yarayn labaatan sano, meesha sharcigu qoondeeyo ciqaabta xabsi daa'inka (95 Pc) ee denbila fallay (16 Pc).

c) Xaaladaha kale oo dhan ee ciqaabta ay u qeexan tahay ee ku saabsan fal la galay (116 Pc) waxa hoos loo dhigayaa saddex daloolow hal dalool ama laba dalool.

**Qaybta 3aad**
U cuskashada iyo asal doorinta ciqaabta xaalaaha dhicidda dambiyada

**Qod. 126**
**Ku xukumidda in ka badan hal denbi garsoorid kaliya**

Marka, hal garsoorid, dambiile lagu garnaqo in ka badan hal dambi, caddaymaha qodobadda soo socda ayaa loo cuskanayaa (44 ss; 6 x.h.c.).

**Qod. 127**
**Dhicista falalka ku ciqaaban xabsi daa'in (95 Pc)**

1. Eedeysanaha ku eedeysan dembiyo badan, mid walbana uu keenaayo xabsi daa'im ah, waxaa lagu xukumayaa xabsi daa'im, asaga oo la gelinaayo takoorid maalmeed muddo aan ka yareen hal sano kana badneen shan sano.

2. Haddii uu ka qayb qaato hal dembi oo keenaaya ciqaab xabsi daa'im ah iyo hal dembi ama dambiyo keenaya xukun xabsi ku meel gaar ah, waxaa lagu fulinayaa xabsi daa'im ah, asaga oo la gelinaaya maalintii qolka takoorista muddo aan ka yareen lex bilood kana badneen afar sano.

**Qod. 128**
**Dhicista falalka ku ciqaaban xabsi iyo ciqaabta yaryar ee isku nooca ah**

1. Marka in ka badan hal denbi oo ku ciqaaban xabsi (96, 98 Pc), hal ciqaab kali ah ayaa la saari doonaa, muddo u dhiganta wakhtiga guud ee ciqaabta ee la saari lahaa dunuubta kala gedisan.

2. Marka ay dhacdo in ka badan hal dambi, oo mid kasta ku ciqaaban tahay xabsi (96, 98 Pc) muddo aan ka yarayn 24 sano, xabsi daa'im (95 Pc) ayaa la saari doonaa.

3. Ciqaabaha yar yar (91 Pc) ee isku nooca ah waxa lagu qaadi doonaa ciqaabta oo aan dhinayn.

### Qod. 129
### Dhicidda dambiyadda ku ciqaaban xabsi kala nooc ah

1. Marka in ka badan haldenbiuu ku ciqaaban yahay xabsi kala nooc ah (96, 98 Pc) ciqaab kasta waxa loo saari doonaa si gooni ah ayadoo buuxda.

2. Xabsiga sharci darro awgeed (98 Pc) waxa la fulin doonaa marka u dambaysa.

### Qod. 130
### Dhacdada dambiyadda ku ciqaaban ciqaabta yar yar ee kala nooca ah

1. Marka in ka badan haldenbi uu ku ciqaaban yahay ciqaabaha yar yar (91 Pc) ee kala nooca ah ciqaab kasta waxa la saari doonaa si gooni ah iyo iyadoo buuxda.

2. Marka ciqaabta yar yar (91 Pc) aaan si buuxda loo bixin, qadarka la bixin doon ula jeedada isku bedelka (115 Pc) waxa laga jari doonaa qadarka ganaaxa.

### Qod. 131
### Ciqaabaha loo garto ciqaab kali ah ama ciqaabaha kali kalida ah

1. Haddaanay hadii kale aan sharcigu caddaynayn ciqaabaha isku nooca ah ee la saaray ee ku waafaqsan Qod. 128 waxa loo qaaddan doonaa ciqaab kaliyeed ah ula jeedooyinka cadaaladeed oo dhan.

2. Ciqaabaha kala nooca ah ee la saaray ee la xidhiidha qodobada 129 130 waxa sidoo kale loo qaadan doonaa, ula jeedooyinka sharci oo dhan, ciqaabta goonida ah ee nooceedu ugu khatarsan yahay. Iyaga oo loo xisaabin doono ciqaabo ka duwan ula jeedooyinka fulintooda, u cuskashada tallaabooyinka nabadgelyo (161 Pc) iyo ulajeedo kale oo kasta oo sharcigu qeexay.

3. Marka ciqaabta yar (91 Pc) la saaro iyada oo ku lamaan ciqaab kale oo nooc kale ah, ciqaabaha waxa loo arki doonaa gooni gooni ulajeedooyinka caddaaaldadeed oo dhan.

### Qod. 132
### Go'aaminta dambiyada saa'idinta

Si loo go'aamiyo denbi saa'idinta (92 Pc) iyo cidhib dambeedyadda ku garniqidda dambiyadda kale oo dhan, xisbada waxa lagu darayaa dunuubta gooni goonida ah ee ku saabsan dambiilaha lagu garnaqay, iyo ciqaabta muhiimka ah (90 Pc) eze lagu qaadi lahaa mid kasta oo ka mid ah kuwaas hadddii aanay jirin dhicis dunuubeed.

### Qod. 133
### Xuduudda kordhinta ciqaabta muhiimka ah

1. Lacageed ay tahay in lagu beddelo xukun xabsi ah, ayada oo ay sabab u tahay in uusan isbixin.

2. Karin dembiilaha (Marka dambiyo isbiirsaday ay dhacaan, sida ku xusan qod 128, ciqaabta lagu xukumaayo, sida isla qodobka uu sheegayo, kama sareyn karto shanjibaar ciqaabta ugu culus oo ka mid ah ciqaabaha isbiirsaday, kamana badan karto:

a) soddon sano oo xarig ah (96).
b) lex sano oo xabbis ah (98)
c) Sh. So. 150,000 ganaax iyo 30,000 khasiraad, ama Sh. So 400,000 ganaax ah iyo 80,000 oo khasiraad ah, marka garsooruhu uu isticmaalo awoodda ku cad faqaradda seddexaad ee qod. 97 iyo faqradda labaad ee qod 99 (100/2)

3. Haddii dembiyo isbiirsadaan, oo ku tilmaaman qod. 129, muddada ciqaabta lagu fulinaayo kama badan karto soddon sano. Ciqaabta inta dheeriga ka ahna, waxaa laga jarayaa si kastaba ha noqotee xabsiyeynta.

4. Marka ciqaabaha 133), ciqaabta ugu badan ee lagu xukumi karo kama badan karto afar sano oo xarig ah iyo seddex sano oo xabbsi ah.

**Qod. 134**
**Xuduuda kordhinta ciqaabta saa'idka ah**

Muddada ugu badan ee ciqaabaha dheeriga ee ku meel gaarka ah kama badan karto:

a) 10 sano, marka laga hadlaayo ka reebidda xafiisyada dowladda (101) ama ka reebidda xirfad ama farshaxan (103);

b) 5 sano marka laga hadlaayo dib u dhigidda in uu ku shaqeysto xirfad ama farshaxan (107, 252, x.h.c.).

**Qod. 135**
**Ciqaabaha la saaro xadhigyadda kala duwan**

Caddaymaha qodobadda aynu soo dhaafnay waxaa iyana loo cuskanayaa ku garniqid dabadeed, qof kaliya oo lagu qaado denbi kale oo uu galay ka hor ama ka dib ku garniqis taas aynu sheegnay, marka in ka badan hal xadhig ay tahay in lagu qaado qof kaliya.

**Cutubka 5aad**
Fulinta ciqaabta

**Qod. 136**
**Xarumaha gaarka ah ee lagu qaato xabsiga**

1. Xukunnada xabsiga ah ee dembiyada waxaa lagu qaadanayaa dhismooyin khaas ah oo mid walbaba ay ku jiraan noocyada dad ee soo socdo oo xukuman:

   a) kuwa dembiga caadeystay ama xirfad ka dhigtay (64 ss);
   b) kuwo lagu xukumay ciqaab hoos loo dhigay cudurka maskaxda awgiis (51), ama dhegaha aan wax maqlin afkana aan ka hadlin (58), ama suuxdin joogto ah qabo oo ka dhalatay alkoolka, ama maadooyinka daroogada laga soo saaro (57), khamriya cabka iyo dadka u go'ay isticmaalka walxaha xasaasiga ah ka dhasho maaddooyinka daroogada (55, 56);

2. Dadka xukuman oo ku cad xarafka (b) ee faqradda hore, waxaa lagu cadaadinayaa, haddii ay lagama maarmaan noqoto, daweeyn.

3. Haddii qofka xukuman ay isubiirsadaan xaalado shaqsiyadeed oo kala duwan, garsooruhu wuxuu go'aaminayaa hadba dhismooyinka gaarka ah oo ku haboon ee uu ku qaadan karo ciqaabta. Go'aankaas waa la beddeli karaa inta fulinta ciqabtu socoto.

4. Ciqaabta xabbiska ah waxay dadka kor ku qoran ee xukuman iyo kuwa caadeystay xadgudubyada ama xirfad ka dhigtay ku qaadanayaan ciqaabtooda, haddii ay suurta gal tahay, qaybo dhismo gaar ah oo loogu talagalay in lagu fuliyo ciqaabta kor ku qoran.

5. Haweenka waxay ku qaadanayaan ciqaabta xukunka xabsiga ah dhismooyin ka duwan kuwa ragga loogu talagalay.

**Qod. 137**
**Xadhiga da'yarta**

1. Ilaa ay gaadhaan 18 sano (60 Pc), yar yarku waxay, wixii suurta gal ah, ku qaadan doonaan xabsiga (91 Pc) xarumo ka go'an kuwa ay isticmaalaan dadka waawayni, ama xubno gooni ah oo xarumahaas ka mid ah. Haddii saacadaha aan loo qoondayn shaqada, waxa la siin doonaa awaamiir gaar ah oo loola jeedo dib u dejinta maskaxdooda (44)

2. Waxa kale, wixii suura gal ah loo astayn doonaa xarumo gaar ah sida ku xusan faqradda 1aad A iyo B ee Qod. hore.

**Qod. 138**
**Kormeeridda fulinta ciqaabaha:**

Fulinta ciqaabaha xabsiga waxa kormeeri doona xaakimka awoodda u leh.

**Qod. 139**
**Gunno siinta kuwa lagu xukumo shaqada ay qabtaan**

Xarumaha xabsiga lagu qaato waxaa la siin doonaa kuwa xukuman, guud ahaan shaqada ay qabtaan

**Qod. 140**
**Dib u dhigista khasabka ah ee fulin ciqaabta**

1. Fulinta ciqaabta, ee aan ciqaabta fudud ahayn waxa lagu suuradayn:

    a) Meesha lagu saari doono xabsiga haweenay uur leh (31 Const),
    b) Meesha ay tahay in lagu ciqaabo haweenay in ka yar sannad hore loo xadiday (31 Const)
    c) Marka arji cafis ah (94 Pc) 75 Const) la soo gudbiyo arrin ku saabsan xukun dil ah

2. Xaaladaha ku xusan faqrada 1aad B) ee kor, waalidnimada waa la burinayaa hadduu ilmuhu dhinto ama lagu aamino qof aan hooyaddii ahayn wixii ka badan laba bilood.

**Qod. 141**
**Dib u dhigista ikhityaariga ee fulinta ciqaabta**

1. Fulinta ciqaabta waxa furan in dib loo dhigo:

a) Marka arji codsi cafis (75 Const) la soo gudbiyo, iyo fulinta ciqaabta oo aan loo baahnayn iyada oo la racay Qod. hore
b) Marka qofka ay jirto ciqaab xadidaysa xorriyadiisa shakhsiga ah (91 Pc) in ciqaabta lagu fuliyo ay xaaladiisu tahay mid laxaad ah mid si culus oo naafaysan (33 Const).

2. Xaaladaha ku xusan faqradda (1.a) ee kor, fulinta ciqaabta lagama dhigi karo muddo ka badan, xaaladda xun 6 bilood oo laga soo tiriyo xadhigu yahay kama dambays xataa haddii la cusboonaysiiyo arjiga xafiiska (750) tas dabadeed.

**Qod. 142**
**Dib u dhigista dadka lagu garnaqay ee maskaxdoodu aanay dhamayn**

1. Marka qof lagu garnaqay, ka hor fulinta ciqaabta taas oo ay xadiday xorriyadiisa skakhsiga ah, ama fulintii ciqaabta oo socota ay ku dhacdo dhinaansho maskaxeed, xaakinku wuxuu haddii uu u arko in xis dhinaanshuhu ay is hortaagayso fulinta ciqaabta tilmaami tan dambe in dib loo dhigo qofka la xukumayna in meel lagu magan galiyo, ama (173,176 Pc)

2. Caddaynta hore waxa loo cuskan doonaa xis dhinaansho xiskiisa awgeed oo dib loo dhigay qof dil lagu xukumay in lagu hayo magan galyo aanay jirin.

3. Marka sababahan lagu magan geliyay aanay jirin waxa jabaya magan galyada, si toos ah ayaa loo marinayaa ciqaab.

**CINWAANKA 5AAD**
Tirtiridda dulmiga iyo ciqaabta

**Cutubka 1aad**
Asal doorinta dulmiga

**Qod. 143**
**Dhimashada dembiilaha ka hor ku garniqidda**

Dhimashada dambiilaha dhacdo ka hor ku garniqiddiisa, waxay bakhtiinaysaa dambiga (14 Pc).

**Qod. 144**
**Cafis**

1. Cafis denbi wuxuu bakhtiyayaa marka xadhig la gooyay iyo ciqaabta daba socotay ay baaba'aan.

2. Marka uu dhaco dambi, cafiska waxa loo cuskanayaa dambiga gaarka ah ee ku saabsan bixinta

3. Tirtiridda dambiyadda ay keento saamaxaadu waxa loo cuskan doonaa dambiyadda la galay oo ay ku jirto maalinta loo gudbiyo sharciga ka hor golaha baarlamaanka ee awoodda siinaysa madaxweynaha awooda cafiska (64 Const)

4. Cafis way furantahay in la sameeyo iyadda oo ku xiran shuruudo ama waajibaad

5. Cafis looma cuskanayo dadka da'da yar leh, xaaladaha ku xusan faqradda 2 ee Qod. 61 ama caadaysteyaasha iyo kuwa shaqada ka dhigay dambiga (64,65,67 Pc), haddii aanu xeerkaku haddii kale aanu caddaynayn.

**Qod. 145**
**La noqoshada dacwadda**

Faallada dambiyada ku ciqaabmaya dacwad dhinaca dhibbanaha (81 Pc), haddii aanay ku garniqiddu noqon kama dambays, la noqoshada dacwaddu (86 Pc) ama dhimashada qofka dhibbanaha ah dambigii wuu dami doonaa.

**Qod. 146**
**Lacagaha ganaaxa ah ee lagu bedesho xadgudubyada**

Marka sharci darrooyinka sharcigu u qeexay ciqaab ganaax ah (99 Pc), dambiilaha oo keliya ayay furan tahay in loo oggolaado ka hor bilowga dhegaysiga dacwadda, inuu bixiyo qadar lacageed oo u dhigma saddex daloolow hal dalool ugu badnaan ciqaabta uu sharcigu u dhigay sharcidarradaas oo ay la socoto qiimihii marxaladihii dacwadda bixintaasu waxay burin doontaa dambiga.

**Qod. 147**
**Saamaxaadda maxkamadeed ee dadka ka yar**
**siddeed iyo toban ama ka wayn da'doodu todobaatan sano**

1. Marka, dacwadda dambiilaha galay ka yar sideed iyo toban (60 Pc), ama ka wayn todobaatan, ciqaabta lagu qaadi doonaa waa xabsi mudada ugu badan oo ah saddex sano ama ciqaab yar (91 Pc), ama labadaba, garsooraha waxaa u furan inuu ka hakado in uu galiyo garniqid iyo inuu siiyo naxariis maxkamadeed, halka marka la eego ku saabsan xaaladaha ku xusan Qod. 110, oo ay la noqoto dambiiluhu in aanu fali doonin denbi kale oo dheeraad ah, naxariistaa maxkamadu waxay daminaysaa dambiga.

2. Saamaxaadda maxkamaddu ma furna hal mar wax ka badan.

**Cutubka 2aad**
Tirtiridda ciqaabta

**Qod. 148**
**Dhimashada dambiilaha ku garniqida dabadeed**

Dhimashada dambiilaha ku garniqida dabadeed waxay daminaysaa ciqaabta (143 Pc)

**Qod. 149**
**Hakashada iyo saamaxaada**

1. Hakashada ama saamaxaada (647 cons), waxay keenayaan raxmad dhamaan ama qayb ciqaabta la saaray waxaanay u bedeli doonaan nooc kale oo ciqaab ah oo uu sharcigu xaddeeyay, ma demin doonto ciqaabaha saa'idka ah (92 Pc) hadaanay ahayn, haddii kale caddayn sharciyeed, ama aanay ahayn cidhib dambeed ku gar niqid.

2. Marka ay jirto dhacdo dunuubeed u rogiddu waxaa loo cuskan doonaa oo keliya hal mar, ka dib ciqaabaha dabadeed marka la isu geeyo dhamaantood iyadda oo la raacayo qawaaniinta xukumaya dhacdada dambiyadda.

3. U rogidda caddaymaheedu waxay ka muuqdaan faqradda 3aad ee Qod. 114 oo loo cuskan doono (169; 253 ee x.h.c.)

**Qod. 150**
**Xadhigga hakinta shuruudaysan**

1. Marka lagu dhawaaqayo xukun xabsi ah oo aan ka badneyn lix bilood ama ciqaab lacageed, keligeed ama isugeysan, oo lagu beddeli karo xukun xabsi ah oo muddadiisu la mid tahay, ee eedeysane aan hore dembi u galin, garsooruhu, markuu tixgeliyo xaaladaha ku xusan qod. 110, uuna garwaaqsado sabab uu ku maleyn karo in eedeysanuhu la iman doono mustaqbalka dhaqan wanaagsan, wuxuu amar ku bixin karaa in fulinta ciqaabta la hakiyo (127 x.h.c.).

2. Hakinta ciqaabtu waxay ku xiran tahay shuruudaha soo socdo (128 xhc):

    a) in eedeysanuhu, muddo shan sano gudaheeda ah laga soo bilaabo maalintii xukunka lagu dhawaaqay, uusan gelin dembi culus ama uusan gelin xadgudub oo la mid ah dembigii keenay xukunka.
    b) in, isla muddada uu garsooraha gooyey gudeheeda, eedeysanuhu uu sameeyo fulinta waajibaadyada madaniga ah ee celista iyo magdhowga khasaaraha uu u geestay dhibbanaha (158 ss).

3. Markay soo baxaan shuruudaha ku xusan faqradda hore, waxay keeneysaa in ay baabi'iso ciqaabta (254 x.h.c.).

**Qod. 151**
**Sii dayn shuruudaysan**

Qof lagu xukumay xabsi daa'im (95 Pc) oo qaatay ugu yaraan shan iyo labaatan sanadood, ama qofka lagu xukumay xabsi (91 Pc) ee qaata nus ciqaabtii ama ugu yaraan saddex daloolow afar dalool ciqaabta haddii uu da' yar yahay (61 Pc), way u furan tahay in lagu sii daayo shuruudo, haddii uu bixiyay caddaymo xidhiidhsan oo akhlaaq wanaag ah.

**Qod. 152**
**Dib u dhaqan gelin**

Dib u dhaqan gelin waxay demin doontaa ciqaabta dheeraadka ah iyo ciqaab kasta oo kale oo ka dambaysa ku gar niqiddu, haddii uu sharcigu caddaynayo.

**Qod. 153**
**Shuruudaha dib u dhaqan gelinta**

1. Dib u dhaqan gelinta waxaa la bixin doonaa marka shan sano ay dhamaato laga bilaabo maalinta la fuliyay ciqaabtii muhiimka ahayd (91 Pc) ama sabab kasta ha ahaatee la demiyay, iyo qofka lagu garnaqay oo bixiyay caddayn xaqiiqo taxan oo akhlaaq wanaag ah.

2. Muddada da'da yar waxay noqonaysaa toban sano sida ku xusan faqradda 2aad ee Qod. 161.

3. Muddada sidoo kale waxay noqonaysaa toban sano dacwaddaha caadayste yaasha iyo dambiilayaasha xirfada ka dhigtay (64,65,67 Pc).

**Qod. 154**
**Burinta amarka dhaqan celinta**

Amarka dib u dejintu wuu buri doonaa marka qofka la dhaqan celinayaa uu galo, muddo shan sano ah, denbi aan ahayn denbi saa'idin (24 AB, BC) oo ku saabsan ciqaab xabsi (96 Pc) muddo aan ka yarayn saddex sano, ama ciqaab kale oo culus oo mid badan la saaray.

**Qod. 155**
**Dib u dhaqan gelin xaaladaha ku garniqidda debedda**

Caddaymaha la xidhiidha dib u dhaqan gelintu waxa loo cuskan doonaa xaaladaha ku garniqidda dibedda, kuwaas oo loo aqoonsaday iyadda oo la raacayo Qod. 10aad.

**Cutubka 3aad**
Caddaymo guud

**Qod. 156**
**Saamaynta sababaha sal guuridda denbi ama ciqaab**

Haaddii si kale aan sharcigu u sheegin,sal-guurida denbi ama ciqaab waxay saamayn yeelanaysaa oo kaliya wixii ku saabsan dad ay sababta sal guuriddu la xidhiidho.

**Qod. 157**
**In ka badan hal sabab sal guurid**

1. Sal guurida denbi ama ciqaab waxay saamayn yeelanaysaa wakhtiga marka sababteedu dhacdo.

2. Marka sababtu ay demiso denbi ee sababta dambiga demisay iyo ciqaabtu ay isku mar dhacaan, sababta demisay dambiga ayaa taagnaanaysa, inkastoo ay kala dambeeyaan dhacdadoodu.

3. Marka in ka badan hal sabab sal guurid denbi ama ciqaabi ay wakhtiyo kala duwan dhacaan waxay demin doontaa dambiga ama ciqaabta, kuwa ka dambeeyaana waxay sababi doonaan saamaynta kuwaasoo weli la demin oo la xidhiidha sababaynta hore.

4. Marka in ka badan mid sabab ah ay u dhacaan si isku mar ah, ta ugu badan ee ah ta u danta ah sababta waxay demin doontaa dambiga ama ciqaabta, markaas faqradda hore ayaa loo cuskan doonaa wixii ku saabsan saamaynta aan weli la demin ee la xidhiidha sababta ugu badan ee wax danaynaysa.

**CINWAANKA 6AAD**
Ciqaabaha madaniga ah

**Qod. 158**
**Magdhowga waxyeello**

1. Dambi kasta waxaa daba socon doona waajibaad la magdhabo oo la xidhiidha sharciga madaniga.

2. Dambi kasta oo cidhib dambeedkiisu dhibaato u keeno hanti ama khasaare kale, waxaa daba socon doona waajibaad in la sameeyo magdhow ka yimaada dambiilaha iyo dadka kale ee marka loo eego sharciga madaniga ah, masuulka ka ah falkiisa.

**Qod. 159**
**Wadarta iyo dhowr fal oo ku saabsan waajib**

Dadka ay ku caddaato mid ama denbi kaliya oo ay wada galeen wadarta iyo dhowrkaba waxaa ku waajib ah inay bixiyaan magdhow si waafaqsan sharciga madaniga ah (158 Pc).

**Qod. 160**
**Saamaynta asal guurida dambiga iyo ciqaabta ee waajibaadka madaniga ah**

Asal guuridda dambiga ama ciqaabta (143, 157 Pc) kama dambayn doonto asal guuridda waajibka madaniga ah ee ka dhasha falka (157 Pc)

**CINWAANKA 7AAD**
Tallaabooyin nabadgelyo

**Cutubka 1aad**
Talaabooyin nabadgelyo oo ku saabsan dad

**Qaybta 1aad**
Caddaymaha guud

**Qod. 161**
**Ku cadaadinta tallaabooyinka nabadgelyo:**
**qodobbada sharcigu uu caddeeyay**

Qofna laguma cadaadin karo tallaabooyin nabadgelyo oo aan si cad sharcigu u dhigin, iyo xaaladaha kale ee dibedda ka ah ee isla sharcigu uu tilmaamay (78, 259 x.h.c.).

**Qod. 162**
**La cuskasho tallaabooyinka nabadgelyo**

1. Talaabooyinka nabadgelyo waxaa rigle la dhigi doonaa sharci ahaan in la dhaqan gelyo wakhtiga marka amar laga bixiyo (42 Const).

2. Marka qaanuunka la dhaqan geliyay wakhtiga fulinta tallaabooyinka nabadgelyo uu kala duwan yahay, qaanuunka la dhaqan geliyay wakhtiga fulinta ayaa loo cuskan doonaa, marka ka dambe ka fudayd badan yahay kii hore (2 Pc)

**Qod. 163**
**Dadka uu saamayn doono tallaabooyinka nabadgelyo in loo cuskaddo**

1. Tallaabooyinka nabadgelyo waxay furan tahay in loo cuskado oo kaliya dadka khatarta ku ah bulshada (164 Pc) kuwaasoo sameeya fal sharcigu u qabo in uu yahay denbi (1 Pc).
2. Xeerkaka ciqaabtu wuxuu dhigi doonaa arrimaha tallaabooyinka nabagelyo ay furan tahay in loo cuskado dadka kahtarta ku ah bulshada marka loo eego falka aan sharcigu caddaynyn in uudenbiyahay.

3. Tallaabooyinka nabadgelyo waxaa loo cuskan doonaa oo kale ajanebiga kuwaas oo ku sugan ga'yiga qaranka.

**Qod. 164**
**Khatarta bulshada**

1. Ula jeeddada Xeerkaka Ciqaabta, qof waxaa la odhan karaa khatarbuu u leeyahay bulshada, amrka aan la odhan Karin ciqaab buu mudan yahay dambi, ee uu galo mid ka mid ah falalka ku xusan Qod. aynu soo dhaafnay oo ay tahay suurta gal inuu falal kale samayn doono, kuwaas oo sharcigu u arko dambi.

2. Qof waxaa lagu suuradayn karaa in uu khatar ku yahay bulshada marka uu xaakin u arko sidaas isagoo ku salaynaya xaaladaha ku xusan Qod. 110.

3. Xaaladaha si cad ugu qeexan qof in loo qaadan karo sharci haddii uu dhigayo in uu khatar ku yahay bulshada (70,173,175,176,180 Pc).

**Qod. 165**
**Amarka garsooraha**

1. Tallaabooyin nabadgelyo uu xaakin amri karaa xukunka qiraya ama sii daynaya qofka ay khusayso.

2. Tallaabooyinka nabadgelyo waxa ay furan tahay haddii ay amar kala dambeyn ah tahay:

   a) Xaalada ku garniqid wakhtiga fulinta ciqaabta ama wakhtiga qofka uu caddaaday si kas ah uga fakado fulinta ciqaabta.
   b) Marka waxba lagu waayo ee loo haysto in qofkaasi ku yahay kahtar bulshada (164 Pc) ee muddo u dhiganta ugu yaraan wakhtiga ay ku haboon tahay tallaabooyinka nabadgelyo aanay dhamaan.
   c) Wakhti kale oo kasta xaaladaha gaar ahaan sharcigu qeexayo (70 Pc).

**Qod. 166**
**Cuskashada ku meel gaadhka ah ee tallaabooyinka nabadgelyo**

1. Wakhtiga baadhista ama dacwad horkeenidda xaakinka waxaa u furan qofka ka yar sided iyo toban sano da' ahaan (60 Pc), ama qofka maskaxdiisu aanay dhamayn (5051 Pc), ama sakhraan caadaystay (55 Pc) ama qof ku walfay isticmaalidda dawooyinka wax sikhraamiya (96 Pc), ama qofka xaaladiisu heer xun oo miyir doorsoon ku timid alkahool ama dawooyinka

wax sikhraamiya (57 Pc), uu si meel ku gaadh ah u galo meel lagu toosinayo (17 Pc), ama xabsiga waalidda (176 Pc), ama cusbitaal ama guri kalkaaliye caafimaad (173 Pc).

2. Xaakin wuxuu burin karaa amar marka ay ra'yigiiga la noqoto qofka ay khusayso in aanu wixii hadda ka dambeeya khatar ku ahayn bulshada.

3. Muddada ku meel gaadhka ah ee fulinta tallaabooyinka nabadgelyo waxaa laga jari doonaa muddada tallaabooyinka nabadgelyo.

**Qod. 167**
**Burinta tallaabooyinka nabadgelyo**

1. Tallaabooyinka nabadgelyo waxay furan tahay in aan la burin haddii qofka lagu qaaday aanu joojin inuu khatar u yahay bulshada (164 Pc).

2. Burinta way furan tahay in aan la amrin haddaanu wakhtigu la mid ahayn ugu yaraan muddada sharcigu u qeexay tallaabadaas nabadgelyo ay dhamaatay.

**Qod. 168**
**Dib u eegista xaaladaha dadka lagu astaameeyay khatar bulsho**

1. Marka ugu yaraan mudada uu sharcigu u qeexay tallaabo nabadgelyo kasta ay dhamaato, xaakinku wuxuu dib u eegi doonaa xaaladihii qofka hoos imanayay tallaabada, si uu u hubiyo in uu iyo in aanu ilaa wakhtigaas khatar ku ahayn bulshada (164 Pc).

2. Marka ay u muuqato in uu weli ku yahay khatar bulshada, xaakinku wuxuu xadidi doonaa wakhti dheeraad ah oo dib u eegis ah si kasaba ha ahaatee, markay caqli gal tahay, in la rumaysto in khatartii baaba'day, xaakinka waxaa u furan dib u eegista xaalada wakhti kale oo kasta.

**Qod. 169**
**Saamaynta sal guuridda dambiga ama ciqaabta**

1. Sal guuridda ciqaabta (143, 147 Pc), wuxuu meesha ka saari doonaa cuskashada tallaabooyinka nabadgelyo waxaanay soo af jari doontaa fulinteeda.

2. Sal guurida ciqaabta (148,155 Pc) waxay meesha ka saari doontaa cuskashada talaabooyinka nabadgelyo, marka laga reebo kuwaa sharcigu u ogolyahay, wakhti kasta (70 Pc), laakiin meesha kama saari doonto tallaabooyinka nabadgelyo ee xaakinku hore u amaray tallaabooyin saa'id ah oo xukun xabsi ah muddo aan ka badnayn toban sanno.

3. Marka ay tahay sabab naxariiseed ama saamaxaad (64,75, Const) xadhig dil ah ama xabsi daa'in ah in aan la fulin qofka la xukumay waa la siidayn doonaa iyadoo isha lagu hayn doono muddo aan ka badnayn saddex sano.

**Qod. 170**
**Fulinta tallaabooyinka nabadgelyo**

1. Tallaabooyinka nabadgelyo ee la amro ee ku dheeraadka ah xabsiga (91 Pc) waxa la fulin doonaa marka xadhigu dhamaaado ama haddii kale uu demo.

2. Tallaabooyinka nabadgelyo ee la amray ee dheeraadka ku ah ciqaabta aan xadhiga ku ahayn (91 Pc) waxa la fulin doonaa xukunka dabadeed.

3. Tallaabooyinka nabadgelyo ee ku meel gaadhka ah een lahayn dabiicadda haynta (176 Pc) waxa la qaadi doonaa marka la fuliyo dabadeed kuwa lah dabiicadda haynta.

**Qod. 171**
**Dhawris la'aanta tallaabooyinka nabadgelyo**

1. Marka qof hoos ymid tallaabooyin nabadgelyo uu si u kas ah uga fakado fulinta, muddada ugu yar tallaabooyinka ayaa bilaabmi doonta in ay socoto laga bilaabo maalinta taas oo haddana la bilaabi doono.

2. Xaaladaha hore ma khusaysо qofka ku kaca fal isagoo isu dhiibay jirro maskaxeed, cusbitaal ama guri kalkaaliye.

**Qaybta 2aad**
Caddaymaha Gaar ahaaneed

**Qod. 172**
**Noocyada tallaabooyinka nabadgalyo ee ku saabsan dad**

1. Tallaabooyinka nabadgalyo ee ku saabsan dad waxa loo qaybin doonaa kuwa ah haynta iyo kuwa aan lahayn dabiicad hayn,

2. Tallaabooyinka leh dabiicadda haynta waxa ay noqon doonaan:

    a) Geyn cusbitaal, ama guri kalkaaliye caafimaad (173)
    b) Geyn xarunta waalida lagu daweeyo 176
    c) Geyn xarun dembilayaasha aan qaan gaarka ahayn lagu edbiyo (177)

3. Tallaabooyinka aan lahayn dabiicadda haynta waxa ay noqon doonaan:

    a) Il ku haynta booliiska 178
    b) Dal ka saaridda ajnabi 181

4. Marka sharci qoro tallaabooyin nabadgalyo iyada oo aanu sheegin nooceeda, garsooruhu wuxuu amri doonaa in la hoos geeyo il ku hayn booliis (178 Pc).

**Qod. 173**
**Gaynta cusbitaal ama guri kalkaaliye caafimaad**

1. Qofka denbi ku caddaado ee aan ahayn middenbilahaansho, (249 Pc) ee lagu xukumo ciqaab la dimay iyada oo loo cuskaday maskaxda oo wax uga dhiman yihiin awgeed (51 Pc) ama sakhraamid xun ee alkahool ama daawada naarkootic (57 Pc) ama sabab dhego iyo qalbi la'aan (58 Pc) waxa la gayn doonaa cusbitaal ama guri kalkaaliye muddo aan ka yarayn hal sano, marka inta ugu ee ciqaabeed sharcigu qeexay ay tahay xabsi aan ka yarayn shan sano (96 Pc).

2. Marka ciqaabtu loo qoondeeyay dambiga ay tahay dil (94 xabsi daaim ama xabsi aan ka ayrayn toban sano, tallaabooyinka nabadgalyo ee la amri doonaa waxay noqon muddo aan ka yarayn saddex sano.

3. Marka, ciqaabta loo qoondeeyay denbi kasta uu yahay xabsi (91 Pc), iyo marka ay u muuqato qofka lagu qarnaqay in uu khatar ku yahay bulshada (64 Pc) waxa la geyn doonaa cusbitaal ama guri kalkaaliye muddo aan ka ayrayn lix bilood, si kastaba ha ahaatee, garsooraha waxa u furan amar bixin in la hoos geeyo in ku hayn booliis (178 Pc) haddaan taas la fulin, haddaan ciqaabta loo dhimin sakhrad xun ama alkahool ama dawooyinka naarkootig ah awgeed (57 Pc).

4. Marka la geeyo cusbitaal ama guri kalkaaliye oo la amray, ciqaab kale oo nabadgelyo oo kale oo dabiicada haynta leh looma cuskan doono.

**Qod. 173**
**Gaynta cusbitaal ama guri kalkaaliye caafimaad**

1. Qofka denbi ku caddaado ee aan ahayn middenbilahaansho, (249 Pc) ee lagu xukumo ciqaab la dimay iyada oo loo cuskaday maskaxda oo wax uga dhiman yihiin awgeed (51 Pc) ama sakhraamid xun ee alkahool ama daawada naarkootic (57 Pc) ama sabab dhego iyo qalbi la'aan (58 Pc) waxa la gayn doonaa cusbitaal ama guri kalkaaliye muddo aan ka yarayn hal sano, marka inta ugu ee ciqaabeed sharcigu qeexay ay tahay xabsi aan ka yarayn shan sano (96 Pc).

2. Marka ciqaabtu loo qoondeeyay dambiga ay tahay dil (94 xabsi daaim ama xabsi aan ka ayrayn toban sano, tallaabooyinka nabadgalyo ee la amri doonaa waxay noqon muddo aan ka yarayn saddex sano.

3. Marka, ciqaabta loo qoondeeyay denbi kasta uu yahay xabsi (91 Pc), iyo marka ay u muuqato qofka lagu qarnaqay in uu khatar ku yahay bulshada (64 Pc) waxa la geyn doonaa cusbitaal ama guri kalkaaliye muddo aan ka ayrayn lix bilood, si kastaba ha ahaatee, garsooraha waxa u furan amar bixin in la hoos geeyo in ku hayn booliis (178 Pc) haddaan taas la fulin, haddaan ciqaabta loo dhimin sakhrad xun ama alkahool ama dawooyinka naarkootig ah awgeed (57 Pc).

4. Marka la geeyo cusbitaal ama guri kalkaaliye oo la amray, ciqaab kale oo nabadgelyo oo kale oo dabiicada haynta leh looma cuskan doono.

**Qod. 174**
**Fulinta amarka gaynta qof cusbitaal ama guri kalkaaliye**

1. Amarka gaynaya qof cusbitaal ama guri kalkaaliye waxaa la fulin doonaa kadib xukunka oo xaddaynaya xorriyadda shakhsiga ah (91 Pc) marka la dhamaysto ama haddii kale la demiyo.

2. Garsooruhu, si kastaba ha ahaatee, isagoo eegaya xaalad kasta oo gaar ah oo ah maskax dhamaansho la'aanta qofka lagu garnaqay, waxaa u furan inuu amro horteed ama dabadeed xadhiga xaddidaya xorriyada shakhsiga ah (91 Pc).

**Qod. 175**
**Sakhraamiinta caadaystay**

1. Marka aan loo baahnayn tallaabo kale oo nabadgalyo oo leh dabiicadda haynta (172 Pc) in la amro, qofka lagu xukumay xabsi dambiyaal (96 Pc), uu galay si xaalad sakhradeed, hadday sakharaddu tahay mid caadayste (55 Pc), ama mid dambiyo galis ay keentay soo jiidashadda dawooyin naarkootig ah isticmaalisteed taas oo ay ku walfeen (56 Pc), wxaa la geyn doonaa cusbitaal ama guri kalkaaliye.

2. Si kastaba ha ahaatee xaaladaha dambiyadda xabsiga lagu xukumay muddo aan ka yarayn saddex sano la saaray dambiilaha waxaa furan in la hoos geeyo il ku hayn buulays (178 Pc), halkii laga gayn lahaa cusbitaal ama guri kalkaaliye.

**Qod. 176**
**Ku daawaynta xarunta waalida**

1. Marka la sii daayo maskax dhinaansho awgeed (50 Pc) ama sakhrad culus ee alkahool ama dawooyinka naarkootiga (50 Pc) ama uu yahay dhega la’aan iyo caqli la’aan (58 Pc), dambiilaha waxa la gayn doonaa xarunta waalida muddo aan ka ayrayn laba sano, marka ay sharci darrooyin ama dunuub loo galay dambiilenimo awgeed ay tahay (24 Pc), ama dunuub kale oo dambigu u qeexay ciqaabo yaryar (91 Pc) ama xabsi (96 Pc) muddo aan ka badnayn laba sano, xukunka sii daynta waxaa la war gelinaa buulayska.

2. Muddada ugu yar ee lagu haynayo xarunta waalida waa toban sano, marka sharcigu qeexo ciqaabta dilka (94 Pc) ama xabsi daa’inka (95 Pc), shan sano haddii sharcigu qeexo ciqaabta xabsiga (96 Pc) muddo aan ka yarayn toban sano.

3. Marka qof la geeyay xarunta waalida laga reebo in uu galo xukun xaddaynaya xorriyaddii shakhsiga ah (91 Pc) fulinta go’aankan dib ayaa loo dhigi doonaa ilaa dhamaadka ku qaadashada xarunta waalida.

4. Caddaymaha qodobkan waxaa kale oo loo cuskan doonaa dadka lagu sii daayay tixgelinta da’dooda (59 Pc) marka ay galaan dambiyo, xaalado kale oo kasta oo ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan ayaa loo cuskan karaa.

**Qod. 177**
**Gaynta meel dhaqan celin**

1. Marka qof yar oo da’diisu ka yar tahay afar iyo toban (59 Pc) uudenbigalo, oo taasi tahay dabeecad khatar ah (164 Pc), garsooruhu, isaga oo si gaar ah u eegaya culayska falka (110 Pc) iyo xaaladaha dhaqameed ee qoyska soo koriyay d’ yaraha waxaa u furan, inuu amro in la geeyo meel dhaqan celineed muddo aan ka ayrayn laba sano.

2. Marka dambiga lagu ciqaabo dil (94 Pc) ama xabsi daa’in (95 Pc) ama xabsi aan ka yarayn saddex sanno (96 Pc), iyo dambiga la galay haddaanu ahayn mid dambiilenimo ah (24 Pc), gaynta da’yaraha meel dhaqan celineed waxaa lagu amri doonaa muddo aan ka yarayn saddex sanno.

**Qod. 178**
**Xurriyad la socota il ku haynta booliska**

1. Boolisku waxay fulin doonaan kormeeridda dadka la hoos geeyay il ku haynta booliska.

2. Xaakinku wuxuu dhigi doonaa awaamiirta suurta galinaysa dadka la hoos geeyay il ku haynta booliska inay ka joojiso galiso dambiyo dheeraad ah, awaamiirtaasu waxaa furan in marba la asal beddelo ama uu xaddeeyo garsooruhu.

3. Garsooridda waxaa loo fulin doonaa si hab keenaya adeegsi shaqo, oo qofka dib ugu soo celinaya la midnaansho bulshada.

4. Marka qofka la hoos geeyo il ku hayn boolis ma dhamaanayso in ka yar sannadood.

**Qod. 179**
**Xaaladaha loo amri karo il ku hayn boolis**

Marka lagu darro xaaladaha ay furan tahay in la amr il ku hayn boolis caddayn sharci oo gaar ah, iyana waxaa furan la amri karo:

a) Xaaladda xadhigu yahay xabsi (96 Pc) muddo ka badan hal sano.

b) Xaaladda xeerkakani awood siinayo tallaabo nabadgalyo, fal sharcigu aanu dhigin inaydenbitahay (19,76 Pc).

**Qod. 180**
**Xaaladdaha il ku haynta booliska la amri doono**

Il ku haynta booliska waxaa la amri doonaa:

a) Marka ciqaabtu tahay xabsi (96 Pc) muddo aan ka yarayn toban sano la saaray, xaaladahaas Il ku haynta boolisku ma dhamaanayso muddo ka yar saddex sano.

b) Marka qofka lagu garnaqay loo ogolaado sii dayn shuruudaysan (151 Pc)

c) Iyo xaalad kale oo kasta oo sharcigu qeexay.

**Qod. 181**
**Ka saarista ajanabi gayiga qaranka**

Ka eriga ajanabi ga'yiga qaranka (4 Pc) waxaa amri doona garsoore marka ajanabiga lagu xukuno xabsi (96 Pc) muddo aan ka yarayn toban sano iyo dacwo kale oo kasta oo sharcigu qeexay.

**Cutubka 1aad**
Tallaabooyinka nabadgelyo ee ku saabsan lahaanshaha

**Qod. 182**
**La wareegis**

La wareegid waxay noqon doontaa tallaabo nabadgalyo oo ku saabsan lahaanshaha, taas oo ay furan tahay in lagu daro kuwa kale ee xeerkakani qeexayo ama caddayn sharci oo gaar ahaaneed.

**Qod. 183**
**Xaaladaha loo cuskanayo la wareegis**

1. Marka lagu garnaqo, xaakinka waxaa u furan inuu amro la wareegista alaabta loo isticmaalay ama loola jeeday in loo isticmaalo adeegsiga dambiga (15 Pc), ama kuwaas oo soo fool leh ama macaash laga helay kuwaas.

2. la wareegista waxaa la amri doonaa:

   a) Alaabta ashyaadda ee keenaysa abaal gudka dambiga (15 Pc)
   b) Alaabta ashyaadda ah ee soo saarideeda, isticmaalida, lahaanshaha haysashada ama fogaynteedu keenayso denbi (15 Pc) in kasta oo aan gar niqid lagu caddaynin.

3. Caddaymaha faqradda 1aad iyo A looma cuskan doono haddii alaabta ashayaada ahi uu leeyahay qof kale oo aan ka mid ahayn kuwa dambiga galay.

4. Caddaymaha faqradda labaad A looma cuskan doono marka alaabta ashyaada ah uu leeyahay qof aan ka mid ahayn kuwa dambiga galay, kuwa soo saaray siticmaalidooda, lahaanshaha, xafidaada ama fogaynteeda ay keeni karto saamayn marka lala tashado masuuliyiinta ay khusayso.

**BUUGGA 2AAD**
Gaar ahaan dembiyada

**CINWAANKA 1AAD**
Dambiyadda laga galo shakhsiyada qaranka Soomaalidda

**Cutubka 1aad**
Dambiyada laga galo, Qaranka Soomaaliyeed oo ah qof caalami ah

**Qod. 184**
**Isku dayga ku lidka ah hufnaanta, kala go'is la'aanta, madax banaanida ama midnimadda qaranka Soomaaliyeed khiyaamo wayn.**

Qof kasta oo fala fal si toos ah arrin ku saabsan ga'yiga qaranka (4 Const) ama qayb ka mid ah qaranimada qaran ajanabi ah ama yareeya madax banaanida ama baabi'inta midnimadda qaranka (1 Const), waxaa lagu ciqaabi doonaa dil (16 Const)

**Qod. 185**
**Muwaadinka qaata hub ku lid ah qaranka Soomaaliyeed**

1. Muwaadin (4 Pc) qaata hub ku lid ah qaranka, ama ka shaqeeya ciidanka qaranka gudihiisa, ama ka shaqeeya dagaal ku lid ah qaranka Soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi daa'in (95 Pc), marka uu hayo darajo sare ama kaalin wayn ku leeyahay, waxaa lgu ciqaabi doonaa dil (94 Pc).

2. Qof kasta oo wakhtiga colaadeed (237 Pc) gayiga qaran cadow ah gala fal ay ku khasabtay shuruucda qarankaasi, ma hoos iman doono ciqaab.

3. Ula jeedada xeerkaka qaanuunka caddaynta (qaran dagaal lagula jiro waxaa ku jira xubnaha siyaasiga ah ee in kastoo qaranka Soomaaliyeed u aqoonsanayn qaramo loola macaamilo sidii wax u eeg (237 Pc).

**Qod. 186**
**Sir doonka lala shaqeeyo ajanebiga ula jeedo dagaal ku lid ah qaranka Soomaaliyeed**

1. Qof kasta u war doona shisheeye si qarankaas shisheeye ula dagaal galo ama ugalo fal colaadeed oo ku lid ah qaranka Soomaaliyeed ama falal kale oo leh ulajeedadaas oo kale, waxaa lagu ciqaabi doonaa xadhig aan ka yarayn toban sano (96 Pc).

2. Marka natiijaddu dagaal gasho, ciqaabtu waa dil, waxaana la saari doonaa marka colaadu bilaabanto xabsi daa'in (95 Pc).

**Qod. 187**
**Falalka cadownimo ee ku lidka ah qaran shisheeye ee u bandhigga qaranka Soomaaliyeed khatar dagaal**

1. Qof kasta oo ogolaansho la'aanta dawladda, sameeya tababaro ama gala falal kale oo cadowtinimo oo ku lid ah qaran shisheeye si qaranka Soomaaliyeed khatar dagaal, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi shan sano ilaa 12 sanno (96 Pc), hadday dagaal dhashana waxaa lagu xukuni doonaa xabsi daa'in (95 Pc).

2. Haddii falkaa colaadeed uu noqdo mid keenaya uun xumaanta xidhiidh dawlad ajanebi ah, ama qaranka Soomaaliyeed iyo muwaadiniintiisa u bar dhigayo meel kasta oo ay degan yihiin khatar aargoosi, ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi laba ilaa sided sannadood (96 Pc). Marka ay dhasho kala goosiga xidhiidhka diplomaasi, ama aargoosi dhaco, ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi (96 Pc) saddex ilaa toban sanno.

3. Dambigaas sare, waxaa lagu ciqaabi doonaa codsashada wasiirka cadaalada iyo dhowrsanaanta.

**Qod. 188**
**Sirdoonka lala yeesho ajanebiga ula jeedo si qaranka Soomaaliyeed uu u noqdo dhexdhexaad ama dagaal u galo**

Cidkasta oo ajanabiga ula xiriirta shaqo sirdoon ah oo ku wajahan in ay qaranka Soomaaliyeed dagaal galiyaan amase dhexdhexaad ka dhigaan [Dasruurka Qod. 68, 75], waxa

lagu ciqaabayaa xarig ah shan sanodood ilaa shan iyo toban sandood [Qod. 96 Xeerkaka Ciqaabta].

**Qod. 189**
**Muwaadinka musuqmaasuq la gala shisheeye**

1. Muwaadinka (4 Pc) xataa si dadban ha u qaato ama uga hela shisheeye halka qaab lacageed ama faaido kale oo naftiisa ah, ama dad kale faaidadood, oo aqbala ballan-qaad noocaas ah ula jeedaduna tahay samaynta falal ku lid leh danta wadanka qaranka, waa la ciqaabi doonaa marka falku aan ahayn mid keenaya denb iweyn oo halis ah, oo ay la socoto xabsi (96 Pc) saddex sano ilaa toban sanno iyo ganaax 997 Pc) ka bilaabma shan kun ilaa toban kun oo shilin Soomaali ah.

2. Shisheeyaha bixiya ama ballan-qaada lacagta ama faaidada waxaa isaguna uu ku sugnaanayaa ciqaabtaas la mid ah.

   a. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc)
   b. Marka falka la galo wahti dagaal (237 Pc)
   c. Marka lacagta ama faa'iidada la bixiyay ama la ballan-qaaday ula jeedo dacaayadeed isticmaalidda wargeysyadda.

**Qod. 190**
**Gacansiinta cadowga wakhtiga dagaalka**

Qof kasta oo wakhtiga dagaal (237 Pc) haya sir doon shisheeye si uu u raali geliyo hawl galidda milateriga ah ee cadowga (185 Pc) nebcaanshaha qaranka Soomaaliyeed, ama hadii kale khtar gelinta hawlgallada milateriga ee qaranka Soomaaliyeed, ama gala falal kale oo soo jiidaysa ula jeedooyin la mid ah, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (97 Pc) oo aan ka yarayn toban sano: Iyo, markuu ujeedada helo, waxaa lagu ciqaabi doonaa dil (94 Pc)

**Qod. 191**
**Siinta cadowga taakulayn**

1. Qof kasta oo wakhtiga dagaal (237 Pc), siiya, xataa si dadban qaran kasta oo cadow ah (185 Pc) taakulayn ama alaabooyin kale oo loo istimcali karo waxyeelidda, qaranka Soomaaliyeed waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi aan ka yrayn shan sanno.

2. Caddaynta aynu soo dhaafnay looma cuskanayo shisheeye falka dibedda ku galay.

**Qod. 192**
**Ka qayb qaadashada deynta adigoo u xaglinaya cadowga**

1. Qof kasta oo wakhtiga dagaalka (237) ka qayb qaata dayn ama lacag bixin isagoo u xaglinaya dhinaca dhulka cadowga (183 pc) ama fududayn u sameeya hawl galka halkaas ka socda, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) aan ka yarayn 5 sanno.

2. Xaaladdanu ma saamayn doonto qofka ajanabiga ah ee dal shisheeye ku galay falka.

**Qod. 193**
**La ganacsiga cadow**

Muwaadin (4 Pc) ama shisheeye ku nool gayiga qaranka (4 Pc) oo wakhtig adagaalka (237 Pc) iyo marka laga reebo xaaladaha ku xusan Qod. 191, la ganacsadda xataa si dadban dadka qaranka cadowga (185 Pc), mar kasta oo ay wada nool yihiin ama, la gala dad kale oo ku nool gayiga cadowga qarnka (185 Pc), waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc), laba iyo toban sanno iyo ganaax (97 Pc) u dhigma shan laba laab qiimihii badeecadda iyo xaalad kale oo kasta, aan ka ayrayn 10,000 oo Somali shilin.

**Qod. 194**
**Guul darrada fulin qandaraasyo taakulayn wakhtiga dagaalka**

Qof kasta oo wakhtiga dagaalka (237 Pc) aan fulin dhamaan ahaan ama qayb ahaan, ballan qaadaydii qandaraaska inuu keeno badeeco ama shaqo uula galay qaranka ama qof qaranka u shaqeeya oo kale ama shirkad gudanaysa shaqo dadweyne ama adeegyo dadweyne oo lagama maarmaan u ah bahida ciidamada qalabka sida ama dadweynaha, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) saddex ilaa toban sano iyo ganaax (17 Pc) u dhigma saddex laab qiimaha alaabta ama shaqadda ay ahayd in la keeno, iyo xaalad kasta oo kale aan ka yarayn 10,000 So Sh-

**Qod. 195**
**Khiyaamaynta keenis alaab**

Qof kasta oo wakhtiga dagaal (237 Pc) gala khiyaamo isaga oo fulinaya qandaraas keened alaabooyin ama fulinaya waajibaadka qandaraasyo kale, ee ku xusan Qod. aynu soo dhaafnay waxa lagu ciqaabi doonaa xadhig (96 Pc), aan ka yarayn 10 sano iyo khasiraad (97 Pc) u dhiganta shan laab qiimaha alaabta ama shaqaa ee ay ahayd in la keeno si kastaba ugama yaraan karto 20,000 shillin.

**Qod. 196**
**Burburinta ama lug jiidka shaqooyinka ciidanka**

1. Qof kasta oo burburiya ama ku sameeya kharbudaad shaqo hakin ah, dhamaan ahaan ama qayb ahaan, xataa si ku meel gaadha, maraakiib dayuurado, tareenka, wadooyinka, qalab is gaadhsiineed, xifad tababar shaqooyin miateri, ama shaqooyin la xidhiidha ciidamada qalabka sida ee qaran, waxa lagu ciqaabayaa xabsi (96 Pc) aaan ka yarayn 8 sano.

2. Ciqaabta dilka ayaa lagu qaadi doonaa (94 Pc)

   a) marka falku yahay danta qaran ee dagaalka lagula jiro (189 Pc), ee ku lid ah qaranka Soomaaliyeed
   b) Marka aalku si xun wax u yeelo diyaar garwoga iyo kartida qaranka ee dagaalka iyo hawlgalada milateriga.

**Qod. 197**
**Gargaaridda denbiyeelashada**

Marka fulinta dambiga ku xusan Qod. aynu soo dhaafnay laga dhigo suurto gal ama la gargaaro sidenbiyeelasho ah (124 Pc) taas oo uu ka dhigo qofka badeecada leh ama haya ama abaabulkeeda leh. Qofkaasi xabsi baa lagu ciqaabi doonaa 1 sano ilaa 5 sano.

**Qod. 198**
**Baabi'inta, ku been abuurka ama qarinta waraaqo ama Dokumeentooyin ku saabsan qaranka Soomaaliyeed**

1. Qof kasta oo dhamaan ahaan ama qayb ahaan cadaadiya, burburiya, been abuura, xoog ku qaata, leexiya xataa si ku meel gaadh ah, waraaqo iyo dhukumantiyo ku saabsan nabadgalyadda qaranka ama arrimo kale oo daakhiliya oo siyaasadeed ama dano caalamiya oo qaranku leeyahay waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) aan ka yarayn 8 sano.

2. Ciqaabta dilka, waxa lagu qaadi doonaa marka falku si khatara u saameeyay diyaar garowga iyo awooda qaranka ee dagaalka ama hawl galada ciidamada.

**Qod. 199**
**Fidinta warka ku saabsan nabadgalyada qaranka**

1. Cid kastoo bixisa warka danta u ah nabadgalyada qaranka ama siyaasada gudaha ama dan caalamiya oo qarameed oo ahayd inay sir ahaato waxa algu ciqaabi doonaa 3 sano ilaa 5 sano (196 Pc)

2. Ciqaabta dilka (94 Pc) waxaa la saari doonaa marka uu falku si xun u saameeyo diyaargarowga iyo kartida qaranka ee dagaalka iyo hawlgallada milateriga.

3. Ulajeedooyinka caddaymaha qodobkan, waxay ahayd in uu sir noqdo siyaasadda qaranka ah waxaa ku jiri doona war kasta ee waraaqaha dawladda ku qoran ee aan la daabicin sababo siyaasadeed kuwa daakhiliga ama dabiicad caalamiya leh.

**Qod. 200**
**Basaasnimada siyaasadeed ama ciidameed**

1. Qof kasta oo daboolka ka qaada, ujeedo basaasnimo siyaasadeed ama milateri, war, ah danta nabadgelyada qaranka ama ta siyaasadeed mid gudo iyo dan caalamiya oo qaranka oo ay ahayd in ay sir ahaato (199 Pc) waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi aan ka yarayn shan iyo toban sano (96 Pc).

2. Xabsi daa'in (95 Pc) waxaa la saari doonaa marka falka la galay uu yahay danta qaranka ee dagaalka kula jira qaranka Soomaaliyeed.

3. Ciqaabta dilka (94 Pc) waxaa lagu qaadi doonaa marka falku uu si xun u saameeyo diyaar-garowga ama kartida qaranka ee dagaalka ama hawlgalada milateriga.

**Qod. 201**
**Basaasnimo khusaysa war loo bandhigay oo aan la oggolayn**

1. Qofk asta oo lagu helo sababo la xidhiidha basaasnimo siyaasadeed ama mid ciidan, u soo bandhiga war, taas oo uu diidan yahay sarkaalka ay khusayso; waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) aan ka yarayn 10 sanno.

2. Xabsi daa'in (95 pc) waxaa lagu qaadayaa meesha falka lagu galay iyaddoo loo danaynayo dhulka dagaalka kula jira (85[3] pc) dhulka Soomaaliyeed .

3. Ciqaabta dilka (94 pc) waxaa lagu qaadayaa meesha si khatar ah ay u samaysay diyaar garowga ama firfircooniddu dhulka uu haysto dagaalku, ama hawlgalka ciidan.

**Qod. 202**
**Taakulaynta denbi-siyaadinta**

1. Marka fulinta mid kasta oo ku xusan dambiyadda qodobada 198, 199, 200 iyo 201 laga dhigo suuragal si denbi saa'idin ah (24 Pc) oo uu ka dhigo qofka waraaqaha ama documantiska gacanta ku haya, ama qofka warka haya, qofka waxaa lagu ciqaabi doonaa xbsi hal sano ilaa shan sano.

2. Xabsiga (96 Pc) saddex ilaa shan iyo toban sano ayaa la saari doonaa marka diyaar garwoga ama kartida qaranka ee dagaalka ama hawlgallada milateriga si xun ay u saamayso.

3. Ciqaab la mid ah ayaa loo cuskan doonaa marka fulinta flalka aynu soo sheegnay suuragal laga dhigo, ama gacan la siiyo si dambiilenimo (24 Pc) uu ka dhigo qofka haya ama kormeerideeda leh goobaheeda ha ahaato dhulka, biyaha ama circa, taas oo ay mamnuuc tahay in la gaadho danta milateriga qaranka awgeed.

**Qod. 203**
**Tuuganimada lagu soo galo xeryaha**
**milateriga iyo haysashaa qalab mamnuuc ah oo basaasnimo**

1. Qof kasta:

   a) Tuuga ama khiyaamo soo dhex galo goobaha ha ahaato,dhul, biyo, cir, la gaadhay oo mamnuuc ah danta milateriga qaranka awgeed.
   b) Meelaha aynu soo sheegnay ama kuwa u dhow, oo si kaddis ah oo sharci darro ah loogu haysto qalab suurta gelinaya in fal dembi la sameeyo oo ku xusan qodobada 199,2 iyo 201.
   c) Lagu qabto isagoo si sharci darro ah u haysto dukumenti ama wax kale oo loogu talaggalay in lagu gudbiyo wärarka ku xusan qod. 199.

2. Haddi mid ka mid ah arrimaha kor ku xusan lagu kaco xilli dagaaleed, ciqaabtu waa saddex ilaa toban sano oo xarig ah.

**Qod. 204**
**Bandhigidda sirta Dawladda**

1. Qof kasta oo soo bandhiga war leh dabeecadda sirta ee ku cad Qod. 199, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) aan ka yarayn 5 sanno.

2. Haddii falka la galay wakhtigii dagaalka (237 pc), ama si xun u samaysay diyaargaroga iyo firfirconidda dhulka dagaalka ku jira, ama hawl galkeeda ciidan. Waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) oo aan ka yarayn 10 sanno.

3. Haddii uu dambiiluhu falka u galay arrimo basaasnimo siyaasadeed ama ciidan, xabsi daa'in (95 pc) waxaa lagu qaadayaa xaaladda ku cad baarigrafka koowaad ee qodobkan; iyo ciqaab dil ah (94 pc) baarigarafka labaad.

4. Ciqaabaha ku muujisan carqaladahan socdaa, waxaa sidoo kale lagu qaadi doonaa qofka helay warka (119 pc).

5. Haddii meesha falka lagu galay si is furasho ah (24 pc) ciqaabtu waxay noqon doontaa xadhig (96 pc) lix bilood ilaa 2 laba sanno halka ay khusayso baarigarafka koowaad ee qodobkan, ama saddex ilaa shan iyo toban sanno meesha falka lagu galay haddii ay tahay xaaladdaha ku cad baarigrafka labaad.

## Qod. 205
## War dabool ka qaadidda oo la mamnuucay fidintiisa

1. Qof kasta oo daboolka ka qaada war la mamnuucay fidintiisa oo ah madaxda haysa, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) muddo aan ka yarayn 3 sano.

2. Haddii falka la galo wakhtiga dagaal 9237 Pc) ama si khatar ah u saameeya diyaargarowga ama awooda qaranka ee dagaal ama hawlgallada milateri, ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi (96 Pc) muddo aan ka ayrayn 10 sano.

3. Marka dambiiluhu fal galo leh ujeedooyin siyaasadeed ama kuwo basaasnimo milateri, xabsi (96 Pc), muddo aan ka yarayn 15 sano ayaa lagu qaadi doonaa xaaladaha ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan iyo ciqaabta dilka (94 Pc) xaaladaha ku xusan faqrada 2aad.

4. Ciqaabaha ku xusan caddaymaha hore, waxaa loo adeegsan doonaa xitaa qofka hela warka.

5. Marka falka la galo denbi siyaa'din (24 Pc), ciqaabtu waa lix bilood ilaa labo sano, sida ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan; laga billaabo saddex ilaa toban iyo shan sano ayaa lagu xukumayaa kuwa kukaca mid ka mid ah xaaladaha ku xusan faqradda labaad (230ss., 238, 239).

## Qod. 206
## Isticmaalidda sirta Qaranka

1. Sarkaalka (240 Pc), ama qof lagu aaminay adeeg qaran (240 Pc) oo u isticmaala naftiisa ama qof kale faa'iidadeed wax ikhtiraacidda cilmiga ah, ama daboolka qaadista qalab shardeed cusub, kaas oo uu aqoon u leeyahay xafiis ahaan ama xil ahaan, taas oo ay ahayd sir (199 Pc) danta nabadgalyada qaranka, waxaa algu ciqaabi doonaa xabsi aan ka ayrayn 5 sano iyo ganaax (97 Pc) aan ka yarayn 10,000 oo shillin Somali ah.

2. Marka falka loo galo danta qaranka dagaalka lagula jiro (185 Pc), ee ay si halis ah u saamayso diyaargarowga iyo kartida qaranka ee dagaalka, ama hawlgallada milateri, dambiilaha waxaa lagu ciqaabi doonaa dil (94 Pc).

## Qod. 207
## U daacad la'aanta maamulidda arrimaha Qaranka

Qof kasta oo ay ku soo eedayso qaranka Soomaalidu in uu faraha la galay arrimaha qaranka ee dibedda khiyaameeya aaminidiisa waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) muddo aan ka yarayn 5 sano, marka uu falku yahay mid ka hor imanaya danta ummadda.

**Qod. 208**
**Jebinta siyaasadda**

1. Qof kasta oo wakhtiga dagaal fidiya ama xidhiidhiya been, buunbuuniya ama fidiya marin habaabin ama war, kaas oo abuuri kara argagax shacbi ama niyad jab, ama haddii kale yaraynaya adkaysiga ummadda ee cadowga, ama wax kasta oo kale sameeya, waa xabsi (96 Pc), aan ka ayrayn waxyeelidda uu u gaystay danta dalka, waxaana lagu ciqaabi doonaa 5 sano.

2. ciqaabtu waxay noqon doontaa (96 Pc) aan ka ayrayn 15 sano:

   a) Marka uu falku yahay mid dacaayad ah ama is gaadhsiin lagu hagaajinayay askarta.
   b) Marka falka la galay ay noqoto natiijo war doon oo cadowga lala yeeshay.

**Qod. 209**
**Dhiirigelinta askarta ee amar diiddada sharciga**

1. Qofkastaoo abaabula askarta inay sharciga diidaan ama ay jebiyaan dhaarta ama waajibaadka dhisbiliin ee ciidanka ama waajibaad kale oo la xidhiidha xaaladooda ciidan, ama askarta horteeda dhiirigeliya fal sharciga ku lid ah, dhaarta, dhisbiliinka ama waajibaadka kale ee ciidan, waxaa lagu ciqaabi doonaa marka falku aanu ahayndenbiaad u khatar ah xabsi (96 Pc) hal ilaa 3 sano.

2. Ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi 2 ilaa 5 sano marka falka lagu galo meel fagaare ah.

3. Ciqaabta waa la kordhin doonaa hadii falku dhaco wakhti dagaal (237 Pc)

4. Ulajeedada Xeerkaka Ciqaabta, waxaa loo arki doonaa indenbilagu galo fagaare marka falka la galay:

   a) Isticmaalid saxaafadeed, ama siyaabo kale oo dacayaad ah.
   b) Goob fagaare ah ama goob u furan dadweynaha ama in ka badan hal qof.
   c) Shir oo ah meesha lagu qabtay, ama tirada dadka joogay, ama ujeedadeeda ama arrinta taas oo lahayd dabiicad shir oo aan ahayn mid khaas ah.

**Qod. 210**
**Curyaaminta dhaqaale**

1. Qof kasta oo wakhtiga dagaalka (237 Pc) adeegsada si toos ah in uu hoos u dhigo heerka sarifka, ama dhiirigeliya suuqa sariflayaasha iyo nabadgalyada mid dadweyne iyo mid gaar ahaaneedba si uu u liiciyo caabiga ummadda ee cadowga, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi aan ka yarayn 5 sano (96 Pc) iyo ganaax (97 Pc) aan ka yarayn 10,000 oo Sh. Somali ah.

2. Marka dambigu yahay natiijo wardoon cadow, ciqaabtu (96 Pc) kama yaraan doonto 10 sano iyo 15 sano marka dambiga la galay uu yahay natiijo war doon cadow.

**Qod. 211**
**Dunuubta ku lidka ah dawladaha is bahaystay**

Ciqaabaha ku xusan Qod. 190 iyo qodobadda ka dambeeya iyadda ayaa loo cuskan doonaa dambiga la galay in lagu waxyeello dawlad shisheeye oo is bahaysi la leh qaranka Soomaalidda ee ujeedooyin dagaal.

**Qod. 212**
**Hawl lid ku ah Qaranka oo ku kaco muwaddin dibadda ku sugan**

Qofka ku nool ga'yiga qaranka dibediisa (4 Pc), fidiya ama faafiya been, buunuunin, marin habaabin ama wararku saabsan xaaladaha gudaha ee qaranka si uu u yareeyo sharafta iyo wanaaga qaranka ee dibeda, ama falkastaoo kale oo sababaya waxyeello danaha ummada, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) aan ka yarayn 5 sano.

**Qod. 213**
**Ururuda minjo xaabinta**

1. Qof kasta oo ku nool ga'yiga qaranka ee kor u qaada, ururiya, abaabula, hogaamiya ururo ujeedooyinkoodu yahay uu xoog ku unko digtaatooriyad ahaan mid ka mid ah dabaqadaha inay kuwa kale qabsato, ama inay xoog waxyeello uga gaysato dhaqaalaha iyo nidaamka bulsho ee qaranka, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi 5 sano ilaa 12 sano (96 Pc).

2. Qofkastaoo ga'yiga qaranka ku nool, kor u qaada, ururiya ama hogaamiya ururo leh ujeedo cadaadin xoog oo ku lid ah hay'adaha siyaasadda iyo sharciga, waxaa lagu qaadi doonaa ciqaabo la mid ah.

3. Qof kasta oo ka qayb qaata ururadda ku xusan faqradda aynu soo dhaafanay, waxaa lagu qaadi doonaa xabsi hal sano ilaa 3 sano.

4. Ciqaabta waa la kordhin doonaa marka ay dad ururiyaan magic been ah ama qaab been ah kuwa aynu kor ku soo xusnay ee ururadda oo baabi'intooda la amray.

**Qod. 214**
**Ururada ka soo horjeeda Qaranka**

1. Qof kasta marka laga reebo kuwa dhulka qaranka, unka, wax tara, ururiya ama tilmaama ururo ujeedo ka dambaysa leh, ama raaca dhaqdhaqaaqyo ku lid ah midnimada waddanka (Const), waxa lagu qaadi doonaa xabsi 996 Pc) hal sano ilaa saddex sano.

2. Qof kasta oo ka qayb galay ururo ku xusan faqradda aynu soo dhaafnay waxa loo cuskan doonaa xabsi lix bilood ilaa laba sano.

3. Ciqaabta waa la kordhin doonaa 9118 Pc) marka dad ay ururiya, xataa magac been ah ama qaab beena, mid ka mid ah ururada kor lagu xusay oo la amray baabi'intooda.

**Qod. 215**
**Dacaayada ka soo horjeeda ee lidku ah waddanka**

1. Cid kasta oo gayiga qaranka gudihiisa ku kaco dacaayad taageeraysa in qayb bulsho kuwo kale xoog si digtaatoorinimo ah uga sarayso, ama cadaadin xooga nooc kasta oo dabaqad bulsho ama la jirta mija xaabin xooga oo dhaqaalaha ama nidaam bulsho ee qaranka ama hogaamiya

dacaayad la jirta baabi'inta ururkastaoo siyaasadeed ama sharci ah waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 1 sano ilaa 5 sano.

2. Hadday dacaayadda loo hogaaminaayo si loo baabi'iyo ama loo jajabiyo midnimada qaranka. (Const) ciqaabtu waa xabsi (96 Pc) 6 bilood ilaa laba sano.

3. Qofkastaoo ka qayb qaata falalka aynu ku xusanay faqradda hore isna wuxuu hoos imanayaa ciqaab la mid ah.

**Qodabka 216**

Aqbalaada sharaf ama faa'iidooyin ee dal cadaw

Muwaadinka ka aqbala dawlad dagaal lagula jiro (237 Pc), shahaadooyin cilmi ama sharafeed ama darajo ama astaamo kale howl gal iyo faa'iidoyin kale oo shahaadooyin kaa ku xiran waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa laba sano.

**Cutubka 2aad**

Danbiyada lagu galo qaranka soomaaliyeed sida qof gudaha ku nool

**Qod. 217**
**Iskuday lid ku ah nidaamka dastuurka**

Qof kasta oo Soomaaliya fal ujeedadiisu tahay inuu baddalo distoorka ama qaabka dawladda si ka duwan sida uu distoorku awooda u siinayo (104,105, Const) waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi daa'in (96 Pc).

**Qod. 218**
**Isku dayga lidka ku ah waaxyaha distuuriga ee Dawladda**

1. Qof kasta oo isku daya inuu dilo madaxwaynaha Jamhuuriyadda (70 Const) gudoomiyaha Baarlamaanka ummadda (49 Const), Ra'iisal wasaaaha 87 (Const) ama gudoomiyaha maxkamadda sare (94 Const) loo dhiso ee maxkamadda dastuurka ama maxkamadda sare ee garsoorka (99,102 Const), waxaa lagu ciqaabi doonaa, marka aanu falku noqonayodenbika khtarsan, xabsi daa'in (95 Pc) qofkastaoo isku dayainuu rajo beelsiiyo af dhowrsanaanta iyo xorriyadda shakhsiga ah dad ku xusan faqraddaha hore, waxaa lagu ciqabi doonaa marka falku aanu aad u khatar ahayn, xabsi (96 Pc), 5 ilaa 15 sano.

**2.** Qof kasta oo gala fal si toos ah u horjoogsada dhamaan ahaan ama qayb ahaan, Madaxweynaha Jamhuuriyadda (70 Const), Baarlamaanka wadaniga ah (49 Const), dawladda (77 Const) ama maxkamadda sare (94 Pc) oo laga dhigay maxkamadda dastuuriga ah (99 Const) ama maxkamadda sare Garsoorka (102 Const) inay fuliyaan shaqooyinkooda loo igmaday dastuur ahaan ama sharci ahaan, waxaa lagu ciqaabi doonaa marka aanu falku aad u sii ba'nayn xabsi (96 Pc) aan 5 sano ka yarayn.

**Qod. 219**
**Khalkhal gelinta ummadda iyo Dowladda**

Qof kasta oo fagaare ahaan khalkhal geliya Qaranka Dowladda Soomaaliyeed ama calanka wadanka ama astaanka qaranka, xubnaha dastuuriga ah ee Dawladda (49,70,78,94,96,102 Const) ama ciidamada qalabka sida ee qaranka (75 Const) waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 6 bilood ilaa 3 sanno.

Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) marka falku yahay ka ku xusan faqradda hore uu galo muwaadin (4 Pc) jooga dal ajanebi ah gudihiisa (4 Pc).

**Qod. 220**
**Meel kaga dhaca sharafta Madxweynaha Dowladda**.

Qof kasta, marka laga reebo kuwa ku xusan qodobadda hore, fagaare meel kaga dhaca sharafta iyo hay'adda madaxweynaha jamhuuriyadda ama saara canaanteeda ama ma'suuliyaddeeda falalka dawladda (76 Const), waxaa lacu ciqaabi doonaa 6 bilood ilaa 3 sanno.

**Qod. 221**
**Is hortaagidda ciidan ee ku lidka ah awoodaha Dowladda**

1. Qof kasta o gacan siiya ka hor imaadka ciidanka ee ku lidka ah awoodaha Dowladda,waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi daa'in (95 Pc), iyo marka is hortaagiddu ay tahay mid culus, oo dil leh (94 Pc)

2. Qof kasta oo ka qayb gala is hortaagidaas, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi 3 ilaa 15 sanno (96 Pc)

3. Is hortaagidaasi waxaa loo qaadanayaa inay tahay mid ciidan xataa haddii hubka la dhigo goob ama xafiis (541 Pc)

**Qod. 222**
**Baabi'in, bililiqo iyo gumaad**

Qofkasta oo leh ulajeedo isku day ku lid ah nabadgelyadda qranka oo gaysta fal keenaya inay dhacaan xaalad qas dhicis ama xasuuq gayiga qaranka gudihiisa (4 Pc) ama qayb midkood waxaa lagu ciqaabi doonaa dil (94 Pc)

**Qod. 223**
**Dagaal sokeeye**

Qof kasta oo hogaamiya inuu ka rido dagaal sokeeye gayiga qaranka (4 Pc) waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi daa'in (95 Pc) marka dagaalka sokeeye dhaco, dambiilaha waxaa lagu ciqaabi doonaa (94 Pc) dil (230 ss., 238, 239).

**Qod. 224**
**Maroorsiga awooda siyaasadda iyo hogaaminta milateriga**

1. Qofkasta oo maroorsada awooda siyaasadda ama ku adkaysta isticmaalideeda sharci darrada ah, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 6 bilood ilaa 15 sanno.

2. Qof kasta oo si sharci darro ula wareega hogaamin sare ee milateri, waxa uu hoos iman doonaa ciqaab la mida marka falka la galo wakhti dagaal (237 Pc), dambiilaha waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi daa'in (95 Pc), iyo iyaddoo lagu ciqaabi doono dil (94 Pc) marka falka ay ka soo baxdo hawlgal milateri oo khatar ah.

**Qod. 225**
**Askar qoridda ama hubaynta aan la oggolyn**
**oo loo sameeyo waddan shisheeye**

1. Qof kasta, gayiga qaranka gudihiisa (4 Pc) oo aan haysan ogolaanshaha xukuumadda, qora ama hubeeya muwaadiniin ula jeedada oo u adeegaysga qaran shisheeye ama u dananaysa, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 3 ilaa 6 sanno.

2. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (11 Pc), marka dadka la qorayo askari ka mid tahay.

**Cutubka 3aad**
Dambiyada ku lidka ah xuquuqda siyaasadeed ee muwaadiniinta Soomaaliyeed

**Qod. 226**
**Isku dayga ku lidka ah xuquuqda siyaasadeed ee muwaadin**

Qofkastaoo xoog ama cabsi gelin ama khiyaamo is hortaaga dhamaan ahaan ama qayb ahaan fulinta xag siyaasadeed (8-12 Const), ama qof kale ku dhiiriya inuu fuliyo hab ka soo horjeeda rabitaankiisa, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 1 ilaa 5 sanno.

**Cutubka 4aad**
Dambiyada ku lidka ah dawlado shisheeye, madaxdooda iyo wakiilladooda

**Qod. 227**
**Isku dayga ku lidka ah madaxda ama wakiiladda wadamadda shisheeye**

1. Qof kasta oo ga'yiga qaranka gudihiisa (4 Pc), isku daya (15 Pc) inuu dilo madax dal shisheeye, waxaa lagu ciqaabi doonaa, marka aan falku keenayn denbi aad u khatar ah, xabsi (96 Pc) muddo aan ka yarayn 20 sano marka dambiiluhu isku dayo inuu rajo tiro nabadgalyada ama xorriyadda shakhsiga ah ee madaxweyne dal shisheeye, ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi 3 ilaa 10 sanno.

2. Caddaymaha faqradda hore, waxaa loo cuskan doonaa marka falku yahay mid laga galay wakiiladda wadamada shisheeyaha ee ay ogolaatay dawladda jamhuuriyadda Soomaalidu (75 Const) inay yihiin madax dipmomaasiyiin ah oo fulinaya shaqadooda.

**Qod. 228**
**Ku keenida khatar calan ama astaan dal shisheeye**

Qof kasta oo gayiga qaranka gudihiisa meel fagaare ah ama meel u furan dadweynaha, khatar ku geliya calanka ama astaanka ( Const) dawlad dal shisheeye, si waafaqsan sharciga maxaliga ee qaranka Soomaaliyeed oo loo isticmaalo calan ama astaan, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 2 sanno.

**Qod. 229**
**Xaalada wax isdhaafsiga**

Caddaymaha labada qodob ee aynu soo dhaafay waxaa loo cuskan doonaa marka xeerka Ciqaabta shisheeyuhu uu sidoo kale isna u xaqiijinayo kuwa madaxweynaha qaranka Soomaaliyeed (70 Const) iyo calanka Soomaaliyeed (1 Const) ilaalin la mid ah.

**Cutubka 5aad**

Caddaymaha guud ee cutubyada hore

**Qod. 230**
**Qof lgu gobaabiyo gelidda mid ka mid ah**
**dambiyada ku xusan cutubka 1aad iyo kan 2aad**

1. Qof kasta oo ku cadaadiya qof inuu galo mid ka mid ah dambiyadda aan denbi saa'idinta lahayn (24 Pc), ku xusan cutubyadda kow iyo laba ee qaybtan ku saabsan ciqaabta dilka ee sharcigu qeexayo (94 Pc) xabdi daainka (95 Pc) ama xabsi (96 Pc), waxaa lagu ciqaabi doonaa, haddii ku khasbidda aan si raaliya loo guddooman ama haddii si raaliya loo gudoomo, laakiin aan dambiga la gelin xabsi (96 Pc) ilaa 8 sanno.

2. Ciqaabta loo cuskaday si kastaba ha ahaatee xaaladaha oo dhan inay ka yar tahay nus ciqaabta u qeexan dambiga diraddiraynta ay xusayso.

**Qod. 231**
**U hor kicidda dadweyne dunuub**

1. Qof kasta oo si fagaare ah u hor kaca fulinta dambiyadda ku xusan Qod. aynu soo dhaafnay (230 Pc), waxaa lagu ciqaabi doonaa falkaas geliddiisa xabsi 3 sanno ilaa 12 sano.

2. Ciqaab la mid ah ayaa loo cuskan doonaa cid kasta oo fulisa mid ka mid ah dambiyadaas ku xusan Qod. aynu soo dhaafnay (230 Pc).

**Qod. 232**
**Mu'aamarad siyaasadeed oo lagu heshiiyay**

Marka 2 dad ah ama in ka badan ay ku heshiiyaan (76 Pc) in la galo mid ka mid ah dembiyadda ku xusan Qod. 230, ee qof kasta uu ka mid yahay kooxda heshiishkaas, waxaa lagu ciqaabi doonaa haddii aan dambiga la gelin xabsi (96 Pc) ilaa 6 sanno, ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) xaaladda kuwa sii kordhiya.

**Qod. 233**
**Mu'aamaradda siyaasadeed ee urur**

1. Marka 3 qof ama in ka badani u midoobaan ujeedo ah in la galo midkastaoo ka mid ah falalka dambiyadda la galo ee kuxusan Qod. 230, kuwa sii kordhiya, sii hagaajiya, sii nidaamiya ama hogaamiya ururkaa, waxaa lagu ciqaabi doonaa falkaas oo kaleiya xabsi (96 Pc) 5 ilaa 12 sanno.

2. Ka qayb qaadashada falka ururka oo keliya, ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi (96 Pc) 2 ilaa 8 sanno.

3. Ciqaabta waxaa la krodhin doonaa (11 Pc) haddii uruku u jeedoo in uu galo 2 ama in ka badan dunuubta ku xusan kor (230 Pc).

**Qod. 234**
**Samaynta iyo ka qayb qaasahada kooxa hubaysan**

1. Marka ulajeedada fulinta mid ka mid ah dunuubta ku xusan Qod. 230 mid ka mid ah kooxda hubaysan ee la sameeyo, kuwa sii kordhiya, ururiya, nidaamiya ama hogaamiya waxaa lagu ciqaabi doonaa falka oo keliya xabsi (96 Pc) 5 ilaa 15 sanno.

2. Ka qayb qaadashada kooxda hubaysan fal kaliya, ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi (96 Pc) 3 ilaa 9 sanno.

**Qod. 235**
**Mu'aamarad: ka reebid ciqaab**

Xaaladaha ku xusan Qod. 232 iyo 233, ciqaablama saari doono kuwa, fulinta dambiga ka hor ee ku saabsan heshiiska, iyo ka hor qabashada ama bilowga dhegaysiga dambiga dacwadiisa: la buriyay ama nooc kasta cid kasta ha keentee sababtay baabi'inta ururkaas aanay ahayn kuwo si hagaajiyay ama hogaamiyayaal ka noqday heshiiskaas la go'aamiyay ama ururkaas la unkay.

**Qod. 236**
**Koox hubaysan: ka reebis ciqaab**

Xaaladaha ku xusan Qod. 234, ciqaab lama saari doono kuwadenbigalista ka hor (16,230 Pc) loo sameeyay kooxda hubaysan iyo ka hor amarka madaxda ama booliska ama si degdeg ah raacaya awaamiirtan baabi'yay ama si kasta ha ahaatee keenay baabi'inta kooxda hubaysan aan kor u qaadin ama hogaamiyayaasha kooxda hubaysan sidoo kale uga noqday, ama is dhiibay iyada oo aanay xoog la iman, iyaga oo wareejinaya ama faraha ka qaadaya hubkoodii. sidoo kale, ciqaab lama saari doono qofka xaalad kasta is hortaaga fulinta damiga (16,230 Pc) kaas oo ah kii kooxda hubaysnayd ay samaysay.

**Qod. 237**
**Wakhtiga dagaalka**

Ulajeedooyinka Xeerkaka Ciqaabta, weedha (wakhtiga dagaal) waxaa ku jiri doona muddada khatarta dhow ee dagaal, marka dagaal ka dambeeyo.

**Qod. 238**
**Xaalad fududaynta falka ee muhiimadda yar leh**

Ciqaabta denbiyada ku saabsan qaybtan hore waa la yarayn doonaa (119 Pc) marka si caqli gal dabiicadeed, nooc, adeegsi, dabeecad ama duruufaha falka, ama caqli gal yaraanta dhaawac ama khatarta falku u muuqdo inuu yahay mid muhiimad yar leh.

**Qod. 239**
**Eriyidda shisheeyaha**

Shisheeye lagu xukumay xabsi denbi ka mid ah kuwa ku xusan qaybtan waa laga eryi doonaa dalka.

## CINWAANKA 2AAD
Dembiyo ku dhan ah Maamulka Guud

### Cutubka 1aad
Dembiyo saraakiil dadweyne oo lid ku ah maamulka guud

### Qod. 240
### Qeexid

1. Macnayn ula jeedada xeerkaka ciqaabta: "Sarkaal dadweyne" macnaheedu, waa qof kasta oo si joogta ama si ku meel gaad ah abaal marin ahaan ama tabaruc ahaan ama si waajib ah, u guta shaqo maxkamadeed sharci dejin (49 const) mid maamul (77 const) ama mid maxkamdeed (92 const), isaga oo ka wakiila ama u danaynaya qaranka ama xafiis kale oo dadweyne.

2. Qofka lagu aamino adeeg dadweyne, waxay tahay qof kasta oo aan sarkaal ahayn dadweyne, sida ku xusan faqradda hore qaybta dambe, ee aynu soo xusnay joogto ahaan ama ku meel gaadh ahaan abaal celin, ama abaal qaasasho, si kas ah ama si waajib ah qaranka ugu aamino ama gudi kale oo dadweyne ku aaminaan kuwaasoo haya adeeg dadweyne.

3. Qofka qabanaaya adeeg dadweyne u baahan yahay, waxay tahay shaqo uu qabto qof saaran oo gudanaaya adeeg cadaaladeed ama mid aqoon caafimaad, ama gudasho kale oo xirfadeed oo aan sharcigu ogolayn. Haysan la'aanta ogolaansho oo saxan ama ka qabta adeeg la cadeeyay inuu yahay baahi dadweyne.

### Qod. 241
### Tuugo ama Xatooyo

1. Sarkaal dadweyne (240 Pc) ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne (240 oo si caqligal ah oo xafiiskiisa ka timid ama adeega lacagta gacantiisa ku jirta ama hantida guurtada ah ee ay leeyihiin maamulka dadweyne (dl 20012 1961 No 2) uu ku takri falo ama u rogo si uu iskii u isticmaalo ama cid kale u istcimaasho waxa lagu ciqabi doonaa (96 Pc) mudo 3 sno ilaa 10 sano iyo ganaax (96 Pc) aan ka yarayn 1,000 shilin.

2. Qof kasta oo ay ku cadaato qodobada faqrada aynu soo dhaafnay waxa xafiiska looga xayiri doonaa mid walba dambiga ku saabsan (101 Pc) hase yeeshee si cqli gal ah hadii ay xaaladu wayn tahay ciqaabtu waxay noqon doontaa mud aan ka yarayn 3 sano xayiraadu waxay noqon kartaa ku meel gaadh 9101 Pc).

### Qod. 242
### Musuq maasuq lala galay dad caadiya

Sarkaal dadweyne (240 Pc) ama qof lagu aaminay xil dadweyne oo musuq maasuqa ama nooc aksta u roga dantiisa ama cid saddexaad, lacag ama hanti guurta oo aanu maamulka dadweynuhu lahayn oo gacantiisa ku jirta taas oo ay gelisay xafiiskeiisu ama shaqadiisu, waxaa lagu ciqaabi doonaa (96 Pc) 3 ilaa 8 sano iyo ganaax (96 Pc) aan ka yarayn 1,000 som. Sh. caddaymaha faqradda 2aad ee Qod. 241, waxaa loo cuskan doonaa dambiyadda ku xusan qodobkan.

**Qod. 243**
**Xatooyo laga faa'iidaysto khaladka qof kale**

Sarkaal dadweyne (240 Pc) ama qof kale oo lagu aaminay xil dadweyne, oo isaga oo fuliyana xilkiisa ama adeega oo uu ka faaiidaysanayo qof kale qaladkiisa, si qaldan u hela ama u dhigta naftiisa ama cid kale oo saddexaad, lacag ama faaiido kale waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi 996 Pc) lix bilood ilaa saddex sano iyo ganaax (97 Pc) shan boqol ilaa 1000 shilin.

**Qod. 244**
**Laaluush uu bixiyay Sarkaal dadweyne**

Sarkaal dadweyne (240 Pc) oo isaga oo meel kaga dhacaya jagadiisa sarkaalnimo ama xilkiisa, si qaldan ugu khastaba ama usoo jiita qof kale inuu siiyo ama u ballan qaado isaga ama cid kale oo saddexaad, lacag ama faaiido kale, waxa lagu ciaaqbi doonaa xabsi (96 Pc) 4 sano ilaa 12 sano iyo ganaax (97 Pc) oo aan ka yarayn 3000 oo shilin. cadayma farqaddeed ee Qod. 241 waxa lagu ciqaabi doonaa dabiga ku xusan qodobkan.

**Qod. 245**
**Musuq maasuqa ee fal sarkaal**

1. Sarkaal dadweyne (240 Pc) isagoo gudanaya fal ku saabsan xafiiskiisa qaata, ama cid sadexaad u qaada qadar lacaga ama faaiido kale, abaal gud ahaan oo aan xaq u lahayn ama ogolaada ballan qaad qadar lacaga ama faaiido kale waxa laguciqaabi doonaa 996 Pc) ilaa 3 sano iyo ganaax (97 Pc) 500 ilaa 10,000 somali shilin.

2. Marka uu sarkaal qaato abaal marin fal ku saabsan xafiiskiisa oo uu hore u qabtay, ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi 996 Pc) ilaa 1 sano (97 Pc) ilaa 3,000.

**Qod. 246**
**Musuq maasuqa la fuliyo ee ah fal ku lid ah waajibaadka xafiiska**

1. Sarkaal dadweyne (240 Pc) ee ka taga ama dib u dhiga hawl ku saabsan xafiiskiisa ama qabta fal ku lid ah waajibaadka xafiiskiisa, qaata, ama cid kale u qaada qadar kasta oo lacag ah ama faaiido ah ama aqbala balan qaadka taas waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) laba ilaa 5 sano iyo ganaax 3,000 ilaa 20,000 kun.
2. Ciqaabta waa la kordhin doonaa marka falku ku dhamaado. siinta dhaqaale dadweyne, mushahaarooyin, hawl gab shurako, qandaraasyo, kuwaas oo u dan ah maamulka.

**Qod. 247**
**Musuq maasuq qof lagu aaminay xil dadweyne**

1. Caddaymaha qodobada 245 iyo 246 waxa lagu qaadi doonaa marka falka uu galo qof lagu aaminay xil dadweyne (240 pc).

2. Markan ciqaabta hoos ayaa loo dhigi doonaa ilaa muddo aan ka badnayn 3 daloolow hal dalool.

**Qod. 248**
**Ciqaabta dadka bixiya ama balan qaada faa'iido**

Ciqaabta ku xussan qodobada 245 iyo 246 iyo 247 waxa lagu ciqaabi doonaa qofka bixiya ama balan qaada lacag ama faa'iido sarkaal dadweyne (24 pc) ama qof lagu aaaminay xil dadweyne (24 pc).

**Qod. 249**
**Ku qasbida musuq maasuq**

1. Qofka u fidiya ama u balan qaada ciqaab ama faa'iido kale abaal gud ahaan aanu lahayn sarkaal dadweyne, (240pc ama qof lagu aaminay xil dadweyne. (240 Pc) si uu ugu soo jiito ama qabto fal ku saabsan xafiiskiisa waxa qabanaaya marka ballan qaadka ama u fidinta ciqaabta ku xusaan Qod. 1aad faqrada Qod. 1aad ee Qod. 245 ee hoos ku dhigay saddex daloolow hal dalool.

2. Marka fidintu ama ballan-qaadku uu sameeyo in sarkaal dadweyne lagu soo jiido (240 Pc) ama qof lagu aaminay xil dadweyne (240 Pc) uu ka tago ama dib u dhigo fal ku saabsan xafiiskiisa ama uu fuliyo falku lid ah waajibaadkiisa dambiiluhu wuxuu midanayaa marka u gudbinta ama ballanta aan la aqbalin ciqaabta ku xusan faqrada 1aad ee Qod. 246 ee la dhimay saddex daloolow hal dalool.

**Qod. 250**
**Ceebaynta meel kaga dhaca xafiis aan si cad sharcigu u qeexin**

Sarkaal dadweyne (240 pc) meel kaga dhaca awooda shaqadiisa ku xeerkaan falal. Isagoo ula jeeda inuu dhibaateeyo qof kale ama si uu u helo faaiido qof kale falkaas oo dambi ah (15 pc) oo uu cadeeayay sharci gaar ahi (19 pc) waxa lagu ciqaabi xabsi ilaa laba sano iyo ganaax (96 pc) 500 ilaa 10,000 kun.

**Qod. 251**
**Danta shakhsiga ah iyo waraaqo xafiis**

Sarkaal dadweyne oo si toos ah ama si dhexdhexdnimo ah ama falal khiyaamo ah ku qaata ribax ama dan shakhsi fal kastoo maamul dadweyne la xidhiidha uu ka shaqeeyo waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) lix ilaa shan sano iyo ganaax (97 Pc).

**Qod. 252**
**Isticmaal ikhtiraacaad xafiisku leeyahay**

Sarkaalka (240 Pc) ama qofka lagu aaminay xil dadweyne (240 Pc) ee isticmaala naftiisa ama faaiido qof kale ikhtiraacaad cilmiga ah iyo siraha daboolka laga qaaday ama qalab warshadeed ee cusub. Kaas oo bilow uu u yahay sabab xafiiskiisa awgeed ama xilka, oo ay ahayd inay sir ahaato waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 2 ilaa 5.

**Qod. 253**
**Kashifid sir xafiiseed**

Sarkaalka dadweyne (240 pc0 ama qof kale oo lagu aaminay xil dadweyne (240 pc) kaas oo isagoo ku xad gudbaya waajibkiisa shaqooyinkii ah ama adeeg ama dariiq kale meel kaga

dhaca jagadiisa, daboolka ka qaada warka rasmiga ah ee ahayd sir (199,204,205 pc), ama nooc kale gacan siiya dabool ka qaadis taas, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi 6 bilood ilaa 3 sanno (96 pc) haddii dabool ka qaadista gacanta la siiyay ahayd dambi saa'idin (24 pc) ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi (97 pc) ilaa hal sanno**.**

## Qod. 254
## Curyaaminta iyo ka hor imaadka hay'adaha dadweynaha shuruucda, awaamiirta madaxda

Sarkaal dadweyne (240pc ama qof lagu aaminay xul dadweyne (240 Pc) kaas oo isagoo gudanaya waajibkiisa ku kaca khalkhal gelihn meelaha dadweyne ama ku tunta shuruucda iyo awaamiirta madaxda ama waajibka la xidhiihd xafiiska dadweynaha ama adeega oo ka qayb qaata falalka ku lidka ah shuruucda ama awaamiirta mas'uuliyiinta ama waajibka aynu soo sheegnay, waxaa lagu ciqaabi doonaa, marka falku aanu ahayndenbicaddayn kale oo sharci oo gaar ah, oo ay la socoto xabsi (96 Pc) ilaa hal sano iyo ganaax (97 Pc) ilaa 2,000 Som shillings.

## Qod. 255
## Dhaafista ama diidista qabasho hawlo rasmi ah

Sarkaal dadweyne (240 Pc) ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne (240 Pc) oo si khalad ah u diida, uga taga, ama dib u dhiga qabashada hawl khusaysa xafiiskiisa ama adeega, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa hal sano ama ganaax (97 Pc) ilaa 10,000 oo sh. Som. marka sarkaalka dadweynuhu (240 Pc) uu yahay xaakin 15 dl 12-6 1961 N loo qaato in aan la gudan, la diiday ama dib loo dhigay marka xaaladaha sharcigu u baahan yahay sabab fal ra'yid ah oo ku lid ah isaga ay jiraan (38 Const).

## Qod. 256
## Ka dareerid wadareed oo xafiisyo dadweyne, shaqooyin, adeegyo ama hawlo

1. Marka 3 ama in ka badan oo saraakiil dadweyne ah (240 Pc) ama dad lagu aaminay adeeg dadweyne (240 Pc), ama dad khaas ah oo aan ka mid ahayn ururkaas ama aanay khusaynin ay qabtaan adeeg dadweyne ama baahi adeeg dadweyne (240 Pc) ay si wada jir ah uga tegaan xafiiska shaqadda adeega ama hawsha, ama ay qabtaan waajibkoodii si keenaysa kharbudaad socodka iyo caadinimadda xafiiska, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 2 sano.

2. Hogaamiyayaasha, taageerayaasha ama qabanqaabiyaasha waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (26 Pc) 2 ilaa 5 sano.

3. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) marka falku yahay:
   mid ay keentay ulajeedooyin siyaasadeed 83 Pc) ay sababtay banaan baxyo ballaadhan, kacdoono ama rabshaddo.

## Qod. 257
## Hakinta adeeg dadweyne ama baahin adeeg dadweyne

1. Marka qofku uu gudanayo xil xafiis ama baahi adeeg xafiis dadweyne (240 Pc) ay hakiyaan adeega ama ay joojiyaan shaqada hay'adda, xafiis ama shariikad qaab rabishaya caadinimadda adeega, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 6 bilood ilaa sannad iyo ganaax aan ka yarayn 5,000 sh. Som.

2. Hogaamiyayaasha, taageerayaasha ama qaban qaabiyaasha waxaa lagu xukumi doonaa xabsi (96 Pc) 3 ilaa 7 sano iyo ganaax (97 Pc) aan ka yarayn 10,000 so. Sh caddaymaha faqradda u dambaysa ee Qod. hore waxaa loo cuskan doonaa dambiyadda ku xusan qodobkan (256 Pc).

**Qod. 258**
**Ka baaqsashada fulinta waajibaadka xafiiska munaasabadda ka dareeridda xafiis dadweyne ama hakinta adeeg dadweyne**

Sarkaalka dadweyne (240 Pc) ama qofka mas'uulka ka ah adeeg dadweyne (240 Pc) ama adeega baahidda dadwene (240 Pc) ee wakhtiga fulintamid ka mid ah derbiyadda ku xusan 2da qodob ee aynu soo dhaafnay, oo aanu ka qayb qaaan diida ama gala in uu isticmaal xoog dib u bilaabista adeegii uu mas'uulka ka ahaa ama fala wixii ku haboon socodkii caadiga ahaa ee xilka waxaa lagu ciqaabi doonaa ganaax (97 Pc) 5,000 oo sh. Som.

**Qod. 259**
**Kaga tegista xafiis dadweyne, adeeg ama shaqo**

1. Sarkaal dadwene (240 Pc) ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne (240 Pc) ama qof shakhsi ah oo aan ka mid ahayn ama aanay khusaynin qabta adeeg dadweyne ama adeeg baahi dadweyne (240 Pc) ama shaqaale ay khusayso qabashadda adeega dadwene ama adeega baahi dadwyene, oo iskaga taga xafiiskiisa, adeega ama shaqadda ulajeedaa oo ah inuu murjiyo socodka iyo caadinimada, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 6 bilood ama ganaax (97 Pc) ilaa 5000 so. Sh ah.

2. Ciqaab la mid ah ayaa loo cuskan doonaa qof kasta oo ulajeedo la mid ah leh, iyadda oo aanu ka tegin adeegii xafiiska ama shaqadii ee fuliya waajibkiisa si keenaysa khalkhal socodka iyo caadinimadiisa.

Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) marka falku ku dambeeyo waxyeelo dadweyne ama mid gaar ah.

**Qod. 260**
**Xaaladaha aan ciqaabta lahayn**

Qof kasa oo gala fal ku xusan qodobadda 256,257,258, and 259 ee gudashada xaqa joojinta shaqadda (27 Const) sifooyinka ku qeexan sharciga 120 xeerkaka shaqaalaha, lama ciqaabayo

**Qod. 261**
**Ka qaadista ama waxyeellaynta hanti meel ku xiran**

Qof aksta oo leh ula jeedo kaliya inuu ka faa'iidaysto hantiile hantidiisii la xayiray, loona dhiibay laguna aaminay xafidaadeeda ee meeshii ka qaada oo qariya, ama burburiya, khasaare u gaysta ama sababa way sii xumaato waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi lix bilooda ilaa iyo ganaax (96 Pc) 500 ilaa 5,000. marka ay meesha ka qaadistu, ama qarinta ama burburintu; ama khasaarintu, ama sababaynteedu inay sii xumaato xabsi (96 Pc) 3 bilood ilaa 2 sano iyo ganaax (97 Pc) 300 ilaa 3,000 marka falka uu galo hantiiluhu ee aan hantidaa lagu tamanin inuu xafido ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi ilaa sannad iyo ganaax (97 Pc)

**Qod. 262**
**Ku xad gudubka ciqaab saa'idinta waajibaadka xagga xeerkan xafidaadda hanti ergis ah**

Qof kasta oo ay ganatiisa ku jirto hanti kasta oo hoos timaada ergiso leh, denbi saa'idin (24 Pc) ee sababeeya burburinta khasaare taas ee taakuleeya meesha ka qaadisteeda ama qarinteeda waxa lagu qaadi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa lix bilood iyo ganaax (97 Pc) ah ilaa 3,000.

**Cutubka 2aad**
Dunuubta laga galo maamulka dadwenaha

**Qod. 263**
**Xoog cabsi galin lagu sameeyo sarkaal dadweyne**

1. Qof kasta oo isticmaala xoog ama cabsi gelin sarkaal dadweyne (240 Pc) ama qof kale oo lagu aaminay xil dadweyne (140 Pc) si loogu qasbo inuu sameeyo fal ku lid ah waajibaadkiisa, ama inuu ka joojiyo qabashada fal khuseeya xafiiskiisa ama adeegiisa, waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) lix bilood ilaa 5 sano.

2. Marka falku la galo yahay si loogu qasbo mid ka mid ah dadka hore aynu u sheegnay inay qabtaan fal ku saabsan xafiiskiisa ama xilkiisa ama in lagu dhiiri geliyo dariiqo kale ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi 6 bilood ilaa 3 sano.

**Qod. 264**
**Ka hor imaadka sarkaal dadwene**

Qof kastoo isticmaala xoog cabsi galin ah si uu uga hor yimaado sarkaal dadweyne ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne (240 Pc) isagoo fulinaaya hawl la xidhiidha xafiiskiisa, ama adeeg kaas oo loogu yeedhay inuu kaalmeeyo waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) lix bilood ilaa 5 sano.

**Qod. 265**
**Xoog ama hanjabaad loo gaysto koox barlamaaneed, maamuleed ama mid garsooreed**

Qof kastoo ku isticmaala xoog hanjabaad ah masuul dadwene ama maamul (77 Const) ama mid maxkamadeed (92 Const) ama wakiil kuwaas ah oo ah gudi wada jir ah si uga celiyo dhamaantood ama qayb ahaan xataa si ku meel gaadh ah ama inuu khalkhal geliyo hawl qabashada waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi 996 Pc) 1 sano ilaa 7 sano marka laga reebo hadii falku keenodenbika khatarsan.

**Qod. 266**
**Duruufaha sii xun**

Ciqaabta ku xusan saddexda qodob ee aynu soo dhaafnay, waa la kordhin doonaa marka lagu ama cabsi galinta loo isticmaalo hub (541 Pc) ama qof isasoo baddalay. Ama in ka badan hal qof oo wada jir u falay, ama isqaadsiin isku mid ah ama dariiqa astaamaysan, ama isticmaalid ka faa'iidaysiga xaqa baqashada laga soo qaatay noqono qarsoon hadday. jiraan ama adeegu iyo haddii kalabamarka xooga ama cabsi galin ay isticmaalaan in ka badan oo wada jira wata isticmaalid hub (154 Pc) xataa mid ka mid ah ama uu istimcalaan in ka badan 10 qof oo aan wada socon isticmaalidda hubka (451 Pc) ciqaabta xaaladaha ku xusan faqrada koowaad ee Qod. 263

iyo qodobada, 265 waxa lagu ciqaabi noqonayaan xabsi (96 Pc) 3 –15 sano iyo faqrada 2aad ee Qod. 263, xabsi (96 Pc) 2 sano-8 sano.

**Qod. 267**
**Ka hakin hawlo xafiis ama adeeg dadweyne**
**ama baahi adeeg dadweyne**

Qof aksta oo aanay tan ku cadayn sharciga sababeeya hakin ama qas galin caadinimada xafiis dadweyne ama adeeg (240 Pc) ama baahi adeeg dadweyne waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa hal sano hogaamiyayaasha, taageeryaasha iyo qaban qaabiyayaasha waxa lagu ciqaabi doonaa (96 Pc) 1 sano ilaa 5 sano.

**Qod. 268**
**Cay sakraal dadweyne**

1. Qof kasta oo ku gafa sharafta iyo karaamadda sarkaal dadweyne (240 pc) jiritaankiisa iyaddoo sababtu tahay, ama gudashadda waajibaadkiisa, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) lix bilood ilaa laba sanno.

2. Ciqaabtaas la mid ah ayaa lagu fulinayaa qofka gala falkan ee xidhiidh telefoon ama mid isgaadhsiineed, ama qoraal ama sawir lagu hagaajiyay sarkaal dadweyne (96 pc), sabab waajibaadkiisa awgeed.

3. Waxaa lagu ciqaabi doonaa (96 pc) hal sanno ilaa saddex sanno marka uu dambigu ku kooban yahay gudasho ficil gef tilmaaman ee guddi.

4. Ciqaabta waa la kordhin karaa, haddii falka lagu galo xoog ama khiyaamo, ama meesha dambiga lagu galay ay joogaan hal qof ama ka badan.

**Qod. 269**
**Aflagaado loo gaysto laan siyaasi ah, maamul ah ama mid garsoorid**

1. Qof kasta oo meel kaga dhaca sharafta iyo xurmada laan ama sharci dajineed (49 Const) maamul (77 Const) ama ama mid garsoorid. Ama mid wakiilnimo kuwaasa, ama mid madax dadweyne oo si wadareed laan u ah, dadkaa hortooda ama wakiiladooda ama urur ay leeyihiin waxa lagu ciqaabi doonaa (96 pc) lix bilood ilaa 3 sano.

2. Ciqaab la mid ah ayaa loo cuskan doonaa qofka gala fal kaas uu u adeegsado is gaadhsiin taas ama qoraal ama sawiro lagu hagaajiyay kooxdaa, ama wakiilkooda ama urur iyaga ka tirsan iyadoo loola jeedo waajibaadkooda caydu ciqaabtu waxay noqonayasaa xabsi sannad ilaa (4) sano marka dembigu ka kooban yahay wax lagu sheego gudigaas oo cay fal cad ah.

3. Cadaymaha faqrada u dambaysa ee Qod. aynu soo dhaafnay waxa loo cuskan doonaadenbiyadaku xusan qodobkan (268 Pc).

**Qod. 270**
**Aflagaado xaakin marka dhegaysiga**

1. Qof kasta oo dhaawaca sharafta iyo karaamadda xaakinka (92 const) marka dhagaysiga (97 const) waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) hal sanno ilaa afar sanno.

2. Ciqaabtu waxay noqon doonaa xabsi (96 pc) laba sanno meesha uu dembiga gefka guddi yahay ficil tilmaaman.

3. Ciqaabta waa la kordhin karaa (118 pc) haddii falka lagu galay si xooga ama khiyaamo ah.

**Qod. 271**
**Meelkadhac loo gaysto madaxda iyadoo la waxyeelaynaayo waraaqaha derbiga lagu dhejiyay**

Cid kasta oo aan ka mid ahayn kuwa been abuurka ama bedelaada hadana ka faa’iidaysta bedelaada ama tigidha la dooriyay ama la been abuuray (352 Pc) waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 3 sano iyo ganaax weheliya ilaa 5,000 shilin. marka tigidhadu ay ganantiisa galaan isaga oo daacad ka ah, ciqaabta ku xusan Qod. 350 hoos baa loo dhigi doonaa, sadex daloolow hal dalool.

**Qod. 272**
**Iska dhigidda inuu kalsooni ku leeyahay sarkaal dadweyne**

1. Qof kastoo iska dhiga inuu ku leeyahay kalsooni sarkaal dadweyne (240 Pc) ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne (240 Pc) ka hela, ka gudooma ama u balan qaada naftiisa ama cid kale lacag ama faa'iido kale, taasoo ku xiran qiimaha xafiisyadiisa wanaagsan ee sarkaalka dadweyne (240 Pc) ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) sanad ilaa 5 sano iyo ganaax weheliya 3000—20,000 sh. Som.

2. Ciqaabtu xabsi ayay noqon doontaa (96 pc) laba ilaa 6 sano iyo ganaax (97 Pc) 5000-30,000 sh. Som marka dambiiulhu qaato ama sababeeyo in la bixiyo ama la balan qaado naftiisa ama cid kale lacag ama faa'iido kale iyadoo loola jeedo inuu iibsado sarkaal dadweyne (24 Pc) ama qof lagu aaminay xil dadweyne ama abaal marin qasab ah.

**Qod. 273**
**Boobid shaqooyinka dadweynaha**

1. Qof aksta oo booba sahqo dadweyne (240 Pc) waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 2 sano.

2. Sarkaal dadweyne (240 Pc) oo hela amarka war gelinta joojinaysa ama hakinaysa shaqooyinkiisa ama wixii uu heli lahaa ee iska wata hawshaas, wuxuu mudan doonaa xabsi la mid ah.

**Qod. 274**
**Ku xad gudubka fulinta shaqo xirfad ah**

Qof kasta oo si ku xad gudub ah isaga isticmaala shaqo farsamo oo loo baahan yahay aqoon gaar ah ee shahadadeed ee qaran waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 6 bilood ama ganaax (97 Pc) 1,000 ilaa 5,000 So. Sh.

**Qod. 275**
**Ku tumashada astaamaha qarameed**

Qofkastaoo kutunta astaamaha qaranka ee loo rakibay si waafaqsan dariiqo kasta oo ay ku jirto caddayn kasta ee qaanuun ama amar madaxeed taas oo loola jeedo hubinta Xafidaada dhowrsanaanta ama muujinta qodob waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 6 bilood ilaa 3 sano iyo ganaax (97 Pc) 1,000 ilaa 10,000 Sh. Som. marka dambiiluhu yahay qofka xafiddaya ciqaabta waxay noqonaysaa xabsi (96 Pc) 3 ilaa 5 sano iyo ganaax (97 Pc) 3,000 ilaa 30,000 som. Shillings.

**Qod. 276**
**Taakulaynta denbi- siyaadin**

Marka ku tumashada astaamaha suuragal laga dhigo ama si uun loo taakuleeyo denbi saa'idin ah (24 Pc) oo ah qofka xafidaadeeda leh Qod. dambe ayaa lagu ciqaabi doonaa oo ganaa wata (97 Pc) 500 ilaa 10,000 sh. Som.

**Qod. 277**
**Ku xad gudubka xafidaada qalabka dadweynaha**

Qof kasta oo ka qaada meesheeda, burburiya, khasaariya oo sababaysa in ay xumayso alaabta leh ujeeddo denbi (15,183 Pc), waraaqo documentooyin ama hanti kale oo guurta lagu hayay xafiis dadweyne ama uu yahay sarkaal dadweyne (2400 Pc) ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne (240 Pc) ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne (240 Pc), waxaa lagu ciqaabi doonaa, amrka falku aanu ahayn mid keenayadenbiaad u khatar ah, xabsi (96 Pc) hal sano ilaa 5 sano.

**Qod. 278**
**Iibinta alaab daabacan oo la amray in lala wareego**

Qof kasta oo iibiya, qaybiya ama meelo ku dhejiya fagaarayaal dadweyne ah ama u furan dadweynaha, qoraalo, sawiro madaxdu amartay la wareegiddooda, waxaa lagu ciqaabi doonaa ganaax (97 Pc) ilaa 5000 oo sh. Som.

**Qod. 279**
**Faro galinta xaraashyada**

1. Qof kasta oo si xooga ama cabsi galin ah ama si hadyadeed u ballan qaada luminteeda ama si kale oo khiyaamo ah horjoogsadda ama khalkhaliya tartanka bakhiyaanasiibka goobaha xaraashyadda dadweynaha ama iibka gaar ahaaneed (8 dl, 29,12,1961 No2) isagoo ka wakiil ah maamuladda dadweynaha ama kala dira tartamayaasha, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) iyo ganaax (97 Pc) 1,000 ilaa 10,000 sh. Som. marka dambiiluhu yahay qof loo magacaabay oo qaanuun hoos imanaya ama uu yahay mas'uuliyiinta loo xil saaray xaraashayadda ama iibinta aynu horay u soo sheegnay, muddada xabsiga (96 Pc) waxay noqon doontaa 3 ilaa 5 sano iyo ganaax (97 Pc) 5,000 ilaa 20,000 sh. Som.

2. Ciqaabta ku xusan qodobkan waxaa loo cuskan doonaa marka iibinta gaar ahaaneed ay wakiil ka yihiin ashkhaas gaar ah oo uu kormeerayo sarkaal dadweyne (240 Pc) ama qof si sharci ah awood loo siiyay, laakiin ciqaabta hoos baa loo dhigi doonaa nus.

**Qod. 280**
**Fulin la'aanta qandaraasyada alaabta dadweyne.**

1. Qof kasta oo meel kaga dhaca shuruucda hoos imanaya keenis qandaraas lala galay qaranka ama gudi dadweyne oo kala ama ay khusayso oo fulinaya adeegyadda dadweyne ama baahida adeegyadda dadweyne (240 Pc) ee ku guul daraysta in uu keeno dhamaan ahaan ama qayb ahaan, qalabka ama shaqooyinka ay u baahan tahay hay'ad dadweyne ama adeeg dadweyne waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 3 sano iyo ganaax (97 Pc) aan ka yarayn 1,000 so. Sh

2. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) marka alaab keenistu ay xidhiidh la leedahay kuwan: cunto ama dawo, ama alaabooyin ama shaqooyin loola dan leeyahaydhulka, biyo, hawada, taarar ama telephoono isgaadhsiineed.

3. Qalab ama shaqooyin loola dan leeyahay hubayn ama qalab uu leeyahay ciidamada qalabka sida ee qaranka (15,75 Const), Qalab ama shaqooyin loola dan leeyahay inay ka hor tagaan khatar loo siman yahay ama masiibo dadweyne.

4. Marka falka loo galo sidenbisiyaadin ah (24 Pc) ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi (96 Pc) ilaa hal sano ama ganaax (97 Pc) 500 ilaa 20,000 sh. Som. Caddaymaha horey loo soo sheegay waxaa loo cuskan doonaa kuwa qandaraasyada yar yar ka sii qaata qandaraaslaha weyn, dilaaliin iyo wakiilada alaab keenayaasha markay dadkaasi buriyaan waajibkoodii qandaraaseed ee ay sababto in lagu guul daraysto alaab keenida.

**Qod. 281**
**Khiyaamada alaab keenidda dadweynaha**

Qof kasta oo sameeya khiyaamo isaga oo fulinaya alaab keenidda qandaraasyo ama fulinta mid kasta oo ka mid waajibaadka qandaraas ee aynu ku xusnay Qod. aynu soo dhaafnay waxaa lagu aqaabi doonaa xabsi (96pc) hal ilaa 5 sanno iyo qanaax (97pc) la socda oo aan ka yareyn 10,000 So.Sh.

**CINWAANKA 3AAD**
Danbiyada laga galo garsoorka maamulka

**Cutubka 1aad**
Dambiyada lidka ku ah socodka cadaaladda

**Qod. 282**
**Ka tegista ama dib u dhigga dhinaca sarkaal dadweyne ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne inuu ka warbixiyto**

1. Sarkaalka dadweyne (240 Pc) ama qof lagu aaminay adeeg dadweyne (240 Pc) ee ka tega inuu bixiyo ama dib u dhiga bixinta warka uu siinayo saraakiil maxkamadeed (92 Const) ama saraakiil kale oo ay waajib ku tahay inuu waregliyo saraakiisha denbi (15 Pc) uu warkiisa helay isagoo hawshiisa ku jiro, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi hal sano ah ama la socda ganaax laga billaabo Sh. So. 300 ilaa 5000.

2. Ganaaxa kor ku xusan lama adeegsado haddii dembigu uu yahay mid istaahila ciqaab oo uu codsado dhibbanaha (81 ss, 21 x.h.c.).

3. Haddii ka tegidda ama daahinta dacwad ku saabsan mid lid ku ah Dawladda, ciqaabtu waa 6 bilood ilaa 3 sano (303).

**Qod. 283**
**Ka tegista ama dib u dhigga dacwad dambi**
**oo ka timid qof mawaadin ah**

Muwaadinka sheegiwaaya war ku saaabsan dambi Muwaadinka isagoo og dambiga ku lid ah shakhsiyada qaranka dambiga lagu galay ee qaanuunku xusaayo ciqaabdenbi (94 Pc) ama xabsi daain (195 Pc) oo aan si degdega aan ugu sheegin masuuliyiinta ku xusan (282) waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi 1 sano (96 Pc) iyo ganaax 300 ilaa 5000.

**Qod. 284**
**Ka baaqashada, in la wargeliyo xubin ka tirsan caafimaadka**

Qofka isagoo fulinaya shaqo caafimaad kaalmeemay ama gacan siiya xaalado keenaya dambi oo ay ahayd qaranku kuu hor geeyo maxkamad, taas ka taga ama dib u dhiga u soo sheegista arrintaa saraakiisha ku xusan Qod. 282, waxaa lagu ciqaabi doonaa ganaax (97 Pc) ilaa S. Sh 5000. Xaaladda kor ku xusan ma khusayn doonto marka warka la soo bandhigo in qofkii la kaalmaynayay hore dambiile u ahaa.

**Qod. 285**
**Diidista adeeg maxkamadeed**

Qof kastoo ay u magacowdo awood maxkamadeed dakhatar, turjumaan, ama xafid alaabeed, oo si ku meel gaadh ah loo haynayo. Wax khiyaamo ah oo iska hor taagaysa waajibaadkiisii ama meel uu ka muuqan lahaa ama adeeg ahaan u fulin lahaa waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi, (96 Pc) ilaa lix bilood ama ganaax (97 Pc) 300 ilaa 500. ciqaab la mid ah ayaa loo cuskan doonaa qofka isagu loogu yeedhay inuu hor yimaado Maxkamad (96 Const) si uu u fuliyo mid ka mid ah waajibaadkiisii aynu soo sheegnay diidan inuu bixiyo wixii khuseeya, isaga ama uu maro dhaarta loo baahan yahay ama uu xil qaado ama uu fuliyo waajibaadka aynu soo sheegnay. cadaymaha aynu soo sheegnay waxa loo cuskan doonaa qofka loogu yeedhay inuu biixyo marag fur maxkamadeed horteeda (92 Const) iyo qof kasta oo kale oo loogu yeedhay inuu fuliyo waajibaad maxkamadeed. marka dambiiluhu yahay khabiir ama turjumaan, xadhig waxa daba socon doona ka joojinta xirfada ama farsamo (103 Pc).

**Qod. 286**
**Raad qaadista dambiga**

Qof kasta oo dacwad leh xataa mid magic beena oo lagu hagaajiyay Maxkamad ama lagu hagaajiyay madax kale ay waajib ku tahay inuu madaxda hore wargaliyo si been ah u sheega indenbila galay ama raad qaada wixii raad taac ah ee qaadista dambigan loo ururin lahaa si hubsiimo ah, waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 1 sano ilaa 3 sano.

**Qod. 287**
**Eedayn been ah**

Qof kasta oo dacwo ahaan (81 Pc) xataa haday tahay mid magic been ah oo lagu hagaajiyay madax garsoor (22 Const) ama, madax kale oo ay waajibkooda tahay inay war geliyaan

madaxda hore dacwayntaas oo ay soo raacinayaan dambigii (15 Pc) qofka uu ogyahay inaandenbilahayn ama qofkaad ku xumayntiisa raad denbi (15 Pc) waxa lagu ciqaabi xabsi (96 pc) laba ilaa lix sano. ciqaabta waa la kordhin doonaa (116 Pc) ilaa in ka badan toban sano ugu badnaan ama ciqaab ka sii xun (94, 95, 96 pc) ciqaabtu waa xabsi (96 pc) afar ilaa 12 sano marka eedaynta beenta ay dhasho in xabsi lagu xukumo qofkii eedaysnaa (96 pc) in ka badan 5 sano; 6 ilaa 12 sano marka eedayntu dhasho xabsi daain (95 Pc) iyo xabsi daain marka eedaynta dhasho dil xabsi daa'im baa lagu siinayaa (94 Pc).

**Qod. 288**
**Qofka naftiisa been ku eedeeya**

Qof kasta oo isaga oo hadal laga qoray xataa ha ahaato mid isgaadhsiin loo isticmaalayo ama mid magic been ah loo isticmaalayo oo loo diyaariyo mid ka mid ah madaxda ku xusan faqradda aynu soo dhaafnay ama mid ka mid ah qirasho madax maxkamadeed, ku eedeeya naftiisa in uu dembi galay, aanu ogyahay in aanu gelin ama dembi qof kale galay, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) hal sanno ilaa saddex sanno.

**Qod. 289**
**Raad lumista ama been abuurka fal sharci darro**

Ciqaabta ku xusan qodobada aynu soo dhaafnay waa la dhimi doonaa (119 Pc) marka raad lumida ama been eedayntu ay la xidhiidho fal sharcigu u arko inuu yahay sharci darro (15 23 Pc).

**Qod. 290**
**Been ku dhaarashada cid kale ay is hayaan**

Qof kasta oo ka mid ah cid si madani ah loo dacweeyay, ee ku dhaarta been waxay lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 6 bilood ah ilaa marka ay doonto maxkamadu soo jeediso dambiiluhu laguma ciqaabi doono haddii war bixintii beenta ahayd ka baydho inta ka koraysa go'aanka maxkamada aanu dhicin. ku garniqida waxa daba socon doona ka mamnuucid xafiisyada dadweynaha (101 Pc)

**Qod. 291**
**Marag fur been ah**

1. Qof kasta oo isagu markhaati ah bixiya Maxkamada horteeda marag furid kasta waxa beenlaha ee dafira waxa runta ama qariya dhamaan ahaan ama qayb ahaan wixii uu ogaa ee ku saabsanaa xaqiiqada ee la xidhiidha wixii la waydiiyay waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 6 bilood ilaa 3 sano.

**Qod. 292**
**Been abuur ra'yi ama fasiraad**

1. Khabiir ama turjumaan oo ay doorteen awoodaha sharci oo bixiyay ra'yi ama tarjumad khaldan, ama qeexa xaqaa'iq aan waafaqsanayn runta, waxa uu mutaystay ciqaabta ku sheegan qodobka ka horeeya xukunka ku yimaada dambi wuxuu u baahanyahay inay la socoto maanicid ka timaada xafiisyada dawliga ah (101 pc).

2. Maanicid ku timaada mihnadda ama ganacsiga (203 pc).

**Qod. 293**
**Khiyaamadda garqaadista**

1. Qof kasta oo intuu socdo garqaadista kaydka ama mid maamul oo loola jeedo inuu marin habaabiyo xaakinka si khiyaamo ah u bedelo xaaladda goobta alaabta ama qofka, waxaa lagu ciqaabi doonaa marka uu falku yahay mid aan keenayndenbimid ka mid ah caddaymaha sharciga xabsi (96 Pc) 6 bilood ilaa 3 sano.

2. Caddaymahaas ayaa loo cuskan doonaa marka falka la galay uu yahay middenbiah ama uu ka horeeyay iyaga, xaaladdan waxaa la mutaysanayaa ciqaabi ka reebid marka falkan yahaydenbimid dacwad dhagaysi yahay laga soo dacwooday, taas oo ah mid aan la soo gudbin.

**Qod. 294**
**Xaalad xumayn**

Xaaladaha ku xusan saddexda qodob ee aynu soo dhaafnay, ciqaabta waxay noqon doontaa xabsi (96 Pc) hal sano ilaa 5 sano marka falku uu keeno xadhig xabsi ah oo ka badan 5 sano iyo xadhig (96 Pc) 6 ilaa 12 sano, marka falku ku dhamaado xadhig xabsi daa'in ah (95 Pc) marka falku ku dhamaado dil (94 Pc), ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi daa'in (95 Pc).

**Qod. 295**
**Ka baydhis**

1. Xaaldaha ku xusan 291 292 dambiilaha laguma ciqaabi doono hadii marka uu socdo qaadistadenbidhagaysi (97 Pc) taas oo uu fuliyay waajibaadka aynu sheegnay, uu ka leexdo wixii beenta ahaa uu daboolka ka qaado waxa runta ah, inta aan la gaadhin xidhista waydiimaha bilowga ah ee ah go'aanka in dacwad qaadista horay loo wado, aan dhagaysiga ka hor intaan la xidhin ama aan dib loo dhigin war bixinta beenta ah awgeed.

2. Marka war bixinaha beenta ah la sameeyo fal ra'yidda gudihiisa dambiilaha lama ciqaabi doono hadii uu ka leexdo wixii beenta ah oo uu daboolka ka qaado wixii run ah, inta ka horaysa gar niqida kama dambaysta ah (97 Const).

**Qod. 296**
**Yaraysi**

1. Qofka lacag bixya ama ballan qaada faaiido kale qof markhaati, khabiir ama turjumaan si uu ugu soo jiito inuu bixyo marag fur been ah, ra'yi ama tarjumad been ah, wuxuu mudan doonaa waxa uu ku ballan qaday marka aan la aqbalin ciqaabta ku xusan qodobadda 191,192 oo la dhimay nus ilaa laba daloolow saddex dalool ah.

2. Caddaymo la mid ah ayaa loo cuskan doonaa marka waa la soo fidiyay ama la ballan qaaday la aqbalo, laakiin war bixinta beenta ah aan la samayn.

3. Ku garniqida waxaa dabo socon doona ka mamnuucid xafiis dadweyne (101 Pc).

**Qod. 297**
**Kaalmaynta qof la tuhunsan yahay**

1. Qof kasta oo fulinta dambiga dabadeed (15 Pc) kaas oo waafaqsan sharciga qeexaya ciqaabteeda dil (94 Pc) xabsi daa'in, ama xabsi (96 Pc) isagoon laftiisu ahayn ka qayb qaate taas, kaalmeeye qof kasta si uu uga fakado baadhista madaxda, ama uga dhuunto baadhista ay sameynayaan doonista isaga la doonayo waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi 996 Pc) ilaa sharcigu qeexayo ciqaab aan ka mid ahaynkuwa sare ama xaalada sharci darooyin (15 23 Pc), ciqaabtu waxay noqonaysaa ganaax (97 Pc) ilaa 5000 sh. Som.

2. Caddaymaha qodobkan waxaa loo cuskan doonaa marka qofka la kaalmeeyay aanu ahayn dacwaysane (47 Pc) ama marka aanu isagu dambiga gelin.

**Qod. 298**
**Kaalmada la xidhiidha shay denbi ah**

1. Qof kasta oo aan ka mid ahayn ka qayb qaate dambi, oon kuna jirin dacwadda ku xusan 504 ee kaalmeeya qof si uu u adkeeyo arranta, macaash ama qiimo denbi (15 Pc) waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 5 sano, xaalada dambiga (15 Pc) iyo ganaax (97 Pc) 5,000 ilaa 10,000 Sh. So.

2. Marka ay dacwaddu tahay sharci darro (15 23 Pc). Caddaymaha farqada u dambaysa Qod. aynu soo dhaafnay ayaa loo cuskan doonaa.

**Qod. 299**
**Daacad darro la taliye ama la taliye farsamo**

1. La taliye sharci ama la taliye farsamo oo aan daacad u noqon waajibaadka xirfadiisa, keena dhaawac danta dhibanaha ku lid ah taas oo uu difaacayay, uu kaalmeenaayay ama wakiilka u ahaa maxkamadda horteeda (92 Const), waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi 996 Pc) hal sano ilaa 3 sanno iyo ganaax (97 Pc) aan ka yarayn 5,000 som. Sh. xabsiga waa la kordhin doonaa: marka dambiiluhu galo falka si dagaal ah oo uu la galo cidda ay is hayaan.

2. Marka falka loo galo ku xumaynta qof dacweysane ah. Muddo xabsi 3 sano ilaa 10 sano iyo ganaax (97 Pc) doonaa ka yarayn 10,000 som. Shilin ayaa la saari doonaa haddii falka loo galay ku xumanta qofka ku dacwaysanaha dambiga ah taas oo sharcigu u qeexayo ciqaab dil ah (94 Pc) ama xabsi daa'in (95 Pc) muddo (96 Pc) ka badan 5 sanno.

**Qod. 300**
**Falalka kale ee khiyaamada aaminaada wakiiladda sharciga**

1. Garyaqaanka ama la taliyaha farsamo ee dacwad qaadista gudaheeda maxkamada horteeda (92 const) u wareejiya aqoontiisii xirfadeed ee adeegsiga ama taladiisii dhinaca ka soo horjeeda cidda uu wakiilka u ahaa (38, 41 const) xataa haddii dhinaca 3aad uu jiro waxaa lagu ciqaabi doonaa, marka falku aanu ahayn mid keenaya dambi khatar ah (15 Pc), xabsi (96 Pc) lix bilood ilaa saddex sanno iyo ganaax (97 Pc) aan ka yarayn 1,000 So. Shs.

2. Ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi (96 Pc) ilaa hal sanno iyo ganaax (97 Pc) ilaa 5000 So. Sh, marka garyaqaanku ama la taliyuhu uu difaacay, taageeray ama uu wakiil u yahay cid uu ku

talaabsaddo isaga oo aan la tashan cidda dembi dacwad qaadis isku mid ah gudaheed, difaacid ama hawshii la taliyaha oo uu siiyay dhinacii ka soo horjeeday (38, 41 const).

**Qod. 301**
**Garyaqaanka iska dhigaya in uu wax duufsado**

Garyaqaanka iska dhigaya inuu duufsan karo garsooraha (92 Const) ama duufsan karo xafiiska xeerka ilaalinta guud, (92 Const), ama marag, khabiir ama turjumaan, qaata ama sababa lacag ama faa'iido nooc kale ah si loo siiyo isaga ama faa'iido nooc kale ah si loo siiyo isaga ama loogu ballan qaado ama loo siiyo dhinac saddexaad oo isaga la jira, iyaddoo loo dan leeyahay in la xaqiijiyo la jirista xaakinka ama xafiiska xer ilaaliyaha guud ama ka khabiirka ama turjumaanka, taas oo ah in abaal marin siiyo iaga waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 8 sanno iyo ganaax (97 Pc) aan ka yarayn 10,000 sh. Som.

**Qod. 302**
**Ka joojin xafiis dadweyne**

Ku gar niqid saamaysa dambiyadda ku xusan Qod. 299, faqradda 1aad ee Qod. 300 iyo Qod. 301, waxaa daba socon doona ka xayiraad xafiis dadweyne (101 Pc).

**Qod. 303**
**Xaaladaha aan ciqaab mudanayn**

1. Xaaladaha ku xusan qodobadda 282,282,284,285,286,291,292,293 iyo 297, qofka fal gala, taas oo ay ku khasabtay baahidda badbaadinta naftiisa ama xigta dhow oo kaga timid khatar aan la baajin karayn oo dhaawacda xorriyadda ama sharafta, lama ciqaabi doono.

2. Xaaladaha ku xusan qodobada 291,292, ciqaab ama saari doona marka falka uu galo qof, sharci ahaan aanloogu yeedhi Karin markhaati khabiir ama turjumaan, ama looga dhigay xaga uu leeyahay inuu ka joogo bixinta maraga rayiga ama turjumaanimadda.

**Qod. 304**
**Caddaynta xigta dhow**

1. Ula jeedada Xeerkaka Ciqaabta, (xigta dhow), waxay tahay: Tafiirta hoos u soo degta iyo tafiirta kor u kacda dadka kaa masuulka ah, walaalaha, raga, walaalaha hablaha, xigtada, guurka isku derajada ah iyo adeerada, eedooyinka, ilma adeerada, ilma abtiyada.
2. Laakiin, weedha xigta (xigta dhow) kuma jiri doonaan, xigtada guurka marka guurku xigtadu ka timid waxaan jirin laga dhigo ama la baabiyo sabab kasta.

**Cutubka 2aad**
Dambiyada ku lidka ah awoodda go'aanka xukun maxkamadeedka

**Qod. 305**
**Xabsi ka fakasho**

1. Qof kasta oo si sharci ah loo qabto oo xabsi loo geeyaydenbiawgeed (15 Pc) fakadda waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 6 bilood.

2. Ciqaabtu waay noqonaysaa xabsi (96 Pc) ilaa 18 bilood marka dambiiluhu galo fal xoog ama baqo gelin qof kale, ama uu jabiyo, iyo xabsi (96 Pc) 2 ilaa 5 sanno, marka xoogu ama hanjabaada lagu galo hub (541 Pc), ama in ka badan hal qof oo wada jir u samaysa.

3. Caddaymaha hore waxaa loo cuskan doonaa qofka lagu garnaqo, ee loo ogolaado in uu ka shaqeeyo xarunta ciqaabta dibadeed.

4. Marka qofka baxsaday uu isu dhiibo in la hayo, ku garniqidda ka hor, ciqaabta waa la dhimi doonaa.

**Qod. 306**
**Gargaaridda fakashada**

1. Cid kasta oo ku kacda ama taban taabisa fakasho (305 Pc) qof si sharci ah loo xidhay ama sharcigu u xabisay denbi (15 Pc) waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 6 bilood ilaa 5 sanno,

2. Marka falka loo galo si uu uga faa'iidaysto qof loo xidhay dil ama xabsi daain (95 Pc) ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi (96 Pc) 3 ilaa 10 sanno.

3. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 c marka dambiilaha si uu fal u sameeyo, adeegsashada mid ka mid ah waddooyinka ku xusan faqradda 2aad ee Qod. aynu soo dhaafnay 305.

4. Ciqaabta hoos baa loo dhigi doonaa marka dambiiluhu yahay xiggta dhow.

5. Ku gar niqidda xaalad kasta, waxaa daba socon doona xayiraad xafiis dadweyne (101 Pc).

**Qod. 307**
**La haye denbisaaidiya**

Cid kasta oo u leh, hayn xataa ku meel gaadh ahaan, qof la xidhay ama loo xabisay denbi (15 Pc) sababo keenadenbisaaidin (14 Pc), qofkaas baxsashodiisa waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 3 sanno iyo ganaax (97 Pc) 1000 ilaa 10000 Sh.So.

**Qod. 308**
**U hogaansanaan la'aan kasta fulinta amar garsoore**

1. Cid kasta, si ay uga baaqsato samaynta waajibaad rayid ah oo ka yimid gar niqid ama ku jira jidkii baadhista awood maxkamadeed ka hor (92 Const) ku sameeya hantidiisa ama hantida cid kale si khaldan ama falal khiyaamo, ama shaygii keli ah ku sameeya fal khiyaamo kale, waxaa lagu ciqaabi doonaa, marka uu amar diido fulinta xabsi maxkamadeed (96 Pc) ilaa 3 sanno ama ganaax (97 pcoo ah 1000 ilaa 10000 som. Sh.

2. Ciqaab la mid ah ayaa la saari doonaa qofka ka war wareega fulinta amar garsoor raiyid ah (92 const) oo ku saabsan qof nugul ah ama qof kale oo naafo ah (32 const) ama loo qeexay tallaabooyin taxadir ah ilaalinta hanti (24 const), lahaansho ama faa'iido kale.

3. Eedaysanaha waxaa la ciqaabayaa kaddib markii uu codsado dhibbanaha (81, 21 X.H.C.).

## Qod. 309
## Dhowris la'aanta ciqaabta saa'idka ah

1. Cid kasta oo hesha ku garniqid waddata ka xayiraad xafiis dadweyne (101 Pc), ama ka xayiraad ama ka joojin ama ka hakin xirfad ama farshaxan (103 Pc), jabiya waajibaadkii ku gudo jiray ciqaabtaa waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc), ilaa hal sano iyo ganaax 997 Pc) 500 ilaa 10,000 som. Sh.

2. Ciqaab la mid ah ayaa loo cuskan doonaa qofka ku xad gudba waajibaadka ka yimid ka joojin ku meel gaadh ah fulinta xafiisyo dadweyne 9101 Pc) ama xirfad ama farsamo (107).

## Qod. 310
## Garabsiinta dhowris la'aanta ciqaabta

Cid kasta oo dami ka qayb gahsy gacan siiya cid kasta si ay uga baaqsato fulinta ciqaab (90 Pc) waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 3 bilood ilaa 5 sanno, marka ku garniqiddu tahaydenbiawgeed (15 Pc) iyo ganaax la socda (97 Pc) 500 ilaa 1000 som. Sh marka ku garniqiddu tahay sharci darro awgeed (15,23 Pc). Caddaymaha faqradda 4aad ee Qod. 306 waxaa loo cuskan doonaa qodobkan isna. Haddii fakashaddu ay dhacdo denbi saa'idin dhexdeeda (24 Pc) qofka xafiiskiisa awgeed leh xafiddaaada xataa ku meel gaadh ahaan, qof hoos yimid tallaabooyin nabadgalyo, dambiilaha waxaa lagu ciqaabi doonaa ganaax (97 Pc) ilaa 10,000 som. Sh.

## Qod. 311
## Gargaaridda dhowris la'aanta tallaabooyinka haynta nabadgelyo

1. Qof kasta oo fuliya ama taakuleeya fakashada qof hoos yimid talaabooyin hayn nabagalyo (172 Pc), ama qariyo qofka fakaday (305 ama si uun u gargaara inuu ka badbaado baadhista cidda ku shaqada leh waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (97 Pc) ilaa 2 sanno caddaymaha faqradda 4aad ee Qod. 306 ayaa loo cuskan doonaa.

2. Haddii fakashaddu ay dhacdo dambi saa'idin dhexdeeda (24 Pc) qofka xafiiska awgeed, leh xafidaada xataa ku meel gaadh ahaan, qof hoos yimid tallaabooyin nabadgelyo, dembiilaha waxaa lagu ciqaabi doonaa ganaax (97 Pc) ilaa 10,000 sh. S0.

## Cutubka 3aad
Ilaalinta aaraa' shakhsiyadeed ee khaldan

## Qod. 312
## Fulinta aaraa' shakhsiyadeed ee khaldan

1. Cid kasta oo ula jeeda fulinta wax loogu yeedhay xaq xaalad ay suura gal ahaan lahayd in lala kaashado awood maxkamadeed (92 const) ku qaata sharciga labadiisa gacmood ee xoog ugu isticmaala dad kale ama hanti, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa hal sanno ama ganaax (97 Pc) ilaa 4,000 So. sh.

2. Cid kasta oo ula jeedda leh fulinta wax loogu yeedho xaq, xaalad ay suura gal ahaan lahayd in lala kaashado awood maxkamadeed (92 const), gacmihiisa sharciga ku qaata oo u isticmaala cabsi gelin dad, waxaa lagu ciqaabi si ku salaysan dacwadda dhibanaha (81 Pc) xabsi (96 Pc) ilaa 6 bilood iyo ganaax (97 Pc) ilaa 2000 So. sh.

## CINWAANKA 4AAD

Dambiyada ku lidka ah shucuurta diiniga ah
iyo dhawrista qofka geeriyooda

### Cutubka 1aad

Dunuubta laga galo diinta Dowladda
iyo noocyada kale ee caabudaadda

#### Qod. 313
#### U gefidda diinta Dawladda

1. Qof kasta oo si fagaare ah diinta Islaamka (1 const), ugu gefa, waxaa lagu ciqaabi doonaa (96 pc) ilaa laba sanno.

2. Qof kasta oo si fagaare ah u ceebeeya diinta islaamka (1 const) isagoo u badheedhay inuu dadka soo jiit iyadda, ama meelo ama aaladdo tilmaamaya in la caabudo, waxaa ku haboon isla ciqaabta.

#### Qod. 314
#### Khalkhal gelinta hawlaha diiniga ah

Cid kasta oo hakisa ama khalkhal galisa shaqooyinka diiniga ah ama Allah caabud (1 Const) meel loogu tala galay ula jeedadan ama meel fagaare ah ama meel u furan dadweynaha, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi ilaa 2 sano.

#### Qod. 315
#### Dambiyaa ku lidka ah qaabka cibaadada qaranku ogol yahay

Cid kasta oo fulisa falalka ku xusan 313,314 ee ku lidka ah diinta ay ogoshahay dawladda qaranka, waxa lagu ciqaabi doonaa si waafaqsan xeerkaarka qodobada aynu soo sheegnay.

### Cutubka 2aad

Dembiyada laga gelo xurmada dadka geeriyooday

#### Qod. 316
#### Ku xadgudub lagu sameeyo qabri -
#### Carqaladeyn janaasad ama hawl janaaso

Cid kasta oo burburisa ama u gaysata dhibaato qabri ama carqalayso janaaso ama wax la xiriira janaaso waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 2 sano.

#### Qod. 317
#### Waxyeellaynta maydka

Qof kasta oo isku daya inuu dhalanteed ku sameeya ama waji bedela ama ku sameeya arrimo waxashnimo ah mayd, ama jinaasad waxa lagu ciqaabi doonaa (96 Pc) sannad ilaa 3 sano.

### Qod. 318
### Burburin, qarin, meel ka qaadista ama qarinta maydadka

Cid katoo burburisa, meesheeda ka qaada ama qarisa jidh mayd ama qayb ka mid ah waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) ilaa 3 sano.

### Qod. 319
### Si sharci darro u adeegsiga jidh mayd

Sharci daro u isticmaalida jidhka maydka qofka dhalan dooriya ama isticmaala jidhka maydka ama qayb ka mida waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) ilaa lix bilood

## CINWAANKA 5AAD
Dunuubta lidka ku ah dagganaanshaha dadweynaha

### Qod. 320
### U hor kicidda sharci darrada

Qof kasta oo si fagaara ah, ugu jiita qof kale inuu galo mid ama in ka badan oo dunuuba (15 Pc) waa lagu ciqaabi doonaa oo kaliya falka u jiidista:

a. xabsi (96 pc) hal ilaa 5 sano, marka u horkicidu ay tahay in la galo denbi (15 Pc)
b. xabsi (96 pc) ilaa 1 sano ama iyo ganaax (97 Pc) ilaa 2000 sh. Som marka u hor kicidu ay tahay in la galo sharci darro (15 Pc)

### Qod. 321
### U hor kicida amar diiddada

Cid kasta oo si fagaare ugu hor kaca qof kale inuu u hogaansami waayo sharciga ku saabsan daganaanshaha dadweynaha ama kiciya is nebcaanshaha dabaqadaha bulshada, waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) lix bilood ilaa 5 sano.

### Qod. 322
### Isu uruuridda ula jeedo falid dunuub

1. Marka saddex ama in ka badan oo qof ay u ururaan ula jeedo fal in ka badan hal denbi (15 Pc) kuwa qaban qaabiyay ama isku keenaya ama u ururiyay ururka, waxa lagu ciqaabi doonaa falkaas kaligii xabsi (96 pc) 3 ilaa 7 sano.

2. Ciqaabta falida ka qayb galka ururka kaligeed xabsi (96 pc) sannad ilaa 5 sano.

3. Hogaamiyayaashu waxay hoos iman doonaan ciqaab la mida ta kuwa ee u qoondaysan kuwa qaban qaabiyay.

4. Marka dadka ururay ay habaysan yihiin (541 Pc) ay wareegaan dhulka miyiga ah ama suuqsada xabsi (96 pc) 5 ilaa 15 sano ayaa la saari doonaa.

5. Ciqaabtaa waa la kordhin doonaa (118 Pc) marka tirada dadka isku ururay tahay 10 ama in ka badan.

**Qod. 323**
**Tallaabooyinka nabadgalyo**

Xaaladaha u garniqida dambiga ee ku xusan Qod. hore ee talaabo nabadgalyo ayaa mar walba la amri doonaa.

**Qod. 324**
**Kharbudaad iyo boob**

1. Cid kasta oo fulisa, wax ka duwan kuwa ku xusan qod. 22, fal boob iyo dhaca ah waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 8 ilaa 15 sano.

2. Ciqaabta waa la kordhin doonaa marka falka lagu galo meel yaala hub, rasaas ama cunto taalla meelo lagu iibinaayo ama bakhaaro.

**Qod. 325**
**Talaabo nabadgalyo**

Baqo galinta dadweynanaha iyadoo la isticmaalayo alaabooyinka qarxa. cid kasta oo leh ujeedo inay cabsi galiyaan dadweynaha oo kicinaaya khalkhal iyo nidaamo sababaaya qarxinta bambooyin dab ka qarxa ama alaabooyin ka qarxa ee mashiina iyo qalabka kaca (541 Pc) waxa lagu ciqaabi doonaa marka falku yahay mid keenaaya denbi culus xabsi (96 pc) lix bilood ilaa 3 sanno.

**Qod. 326**
**Cabsi galinta dadweynaha**

Qof kasta oo cabsi galiya si uu u galo denbi ku lid ah nabadgalyada dadweynaha ama falal kharbudaad ah (324 Pc) si uu u sababeeyo cabsi dadweyne waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) ilaa hal sanno.

**Qod. 327**
**Digniin halis ah oo aan jirin madaxda loo jeediyo**

Cid kasta oo ku dhawaaqda aafooyin aan jirin shilal ama khataro bixiyo argagax baqo galinaaya madaxda ama cid kale ama dad haya xil dadweyne waxa lagu ciqaabi doonaa (96 pc) ilaa hal sano ama ganaax ilaa 6000 sh. Som.

**Qod. 328**
**Daabacaada ama faafinta warar been ah oo**
**khalkhal galinaaya dagganaanshaha dadweynaha**

Cid kasta oo daabacda ama faafisa warar baqdin galin ah oo la buunbuuniyay si ay khalkhal deganaanshaha dadweynaha waxa lagu ciqaabi doonaa haddii aanu falku ahayn mid khatar oo dan oo denbi keenaya (15 Pc) iyo xabsi (96 pc) ilaa 6 bilood ama ganaax ilaa 3000 sh. Som.

**CINWAANKA 6AAD**
Dambiyada ku lidka ah badbaadada dadweynaha

**Cutubka 1aad**
Dunuubta khatar gelinaysa badbaadada dadweynaha iyadoo xoog loo isticmaalo

**Qod. 329**
**Gumaad**

1. Qof kasta oo aan ka mid ahayn kuwa ku xusan 22 oo ula jeedadiisu tahay inuu dil gaysto, gala fal khatar galinaaya badbaada dadweynaha waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) ilaa 15 sano marka falku keeno dhaawac waxyeelo jidhka qof (440 Pc) ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi daain (259 Pc) marka xabsigu keeno dhimasho qof ciqaabtu waxay noqonaysaa dil.

2. Ereyga khatar galinta badbaadada dadweynaha waxay macnaheedu tahay u bandhigida bulshada khatarta dhimashada (443 Pc) ama dhaawac jidheed.

**Qod. 330**
**Masuubo**

Cid kasta oo sababaysa dab ama fasahaad markab dagis ama shay kaloo sababeeya burburiya dayaarad ama burburiya alaab kale oo dhan ama burburiya dhisme ama sameeya wax kale oo aafo ah oo khatar galinaysa dadweynaha waxa lagu ciqaabi doonaa marka falku aanu ahayn denbi khatar keenaya (19 Pc) xabsi (96 pc) 3 sanno ilaa 10 sanno.

**Qod. 331**
**Ka tagista sharci darrada ah in la qaado ama laga qaado meesheedi calaamadaha taxaddirka shilalka**

Cid katoo ka tagta inay dhigto meesheeda mashiino qalab, ama calaamado baaq ah oo ah inay ka digaan aafo shilal ama ka qaada meesheedii ama keena dhaawac waxyeelo kuwaas ah waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) sannad ilaa 5 sanno.

**Qod. 332**
**Isku dayga khatar galinta badbaadada dadweynaha**

Cid kasta oo marka laga reebo waxa ku xusan 3 faqradood gala fal khatar galinaaya badbaadada dadweynaha waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) sannad ilaa 5 sanno.

**Qod. 333**
**Iska hortaagga difaaca badbaadada dadweynaha**

Qof kasta, munaasabada, xaflada qariya ama ka dhiga wax kama jiraan qaladka loo isticmaalo badbaadadaas, sida samata bixin ama kaalmo ama wax kale oo is hor taagaaya hawl gallada waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) 2 sano ilaa 7 sanno.

**Cutubka 2aad**
Danbiyada khtarta guud oo loo adeegsaday khiyaamo

**Qod. 334**
**Cudur faafa**

Masiibooyinka cudurada qofka keena masiibo cudur ee keena jeermis, waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (95 Pc) marka ay dhimasho qof ku timaado falkaas ciqaabtu waa dil.

**Qod. 335**
**Wasakhaynta biyaha iyo cuntada**

Cid kasta oo wasakhaysa biyaha ama wax kaloo loo isticmaalo cunto inta aan la qaybin horteed ama aanay gaadhin cida isticmaalaysa waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc).

**Qod. 336**
**Asal doorinta iyo isku milan cunto**

1. Cid kasta oo asal doorisa ama ku dara alaab cunto ah mid nooc kale ah inta aan la qaybin ka hor ama aanay gaadhin cidii isticmaalaysay oo ka dhigta caafimaadka dadweynaha khatar galisa waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) 3 sanno ilaa 10 sanno.

2. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) marka shay dawo ah la wasakheeyo ama la gaboojiyo, qaboojinta iyo milista alaabta kale ee khatar ku ah caafimaad oo aan ka yarayn shan iyo toban sanno, meesha falku sababo dhimasho qof, waxa lagu ciqaabi doonaa (96 Pc) ciqaab dhimasho.

**Qod. 337**
**Asaldoorin ama beenabuur lagu sameeyo waxyaabo kale**
**oo dhibaato u keenaya badbaadada dadweynaha**

Cid kasta oo asal guurista ama milmisa alaab kale oo kahtar ku ah dadweynaha, cid kastoo cimri raajisa ama misha si khatar ku ah caafimaadka dadweynaha shay loola jeeday in la iibiyo oo aan ahayn kuwa ku xusan Qod. aan soo dhaafnay, waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) 1 sano ilaa 5 sano ama ganaax (97 Pc) aan ka yarayn 3000 sh. So.

**Qod. 338**
**Iibinta cunto la sinji dooriyay ama la beenabuuray**

Cid kasta oo aan ka mid ahayn kuwadenbiyadaku xusan ka mid ahayn laba qodob ee aynu soo dhaafnay, (334 335 336 337 Pc) oo laga helo inuu u hayo iib ama u bandhigo iib ama u qaybiya in loo isticmaalo biyo shay ama alaab la sumeeyay la cimri raajiyay ama la sinji doorshay. Si khatar ku ah caafimaadka dadweynaha wuxuu hoos iman doonaa ciqaab waafaqsan ta ku xusan qodobada aynu soo dhaafnay.

**Qod. 339**
**Iibinta cunto waxyeello leh**

1. Cid kasta oo iib u haysa u soo bandhigtay iib ama u qaybisay dad isticmaalaya, alaab loola jeedo cunto laakiin aan la cimri raajin laakiin khatar ku ah caafimaadka dadweynaha waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi lix bilood ilaa 3 sanno iyo ganaax aan ka yarayn 500 sh. Som.

2. Hoos ayaa loo dhigi doonaa cuntdaa la nooc dooryay hadii uu og yahay nooc dooryaheeda qofka iibsanaya.

**Qod. 340**
**Iibinta iyo qaybinta daawooyinka dhacay**

Iibinta iyo bixinta alaab dawooyin qofka ay gacanta ugu jirto inuu iibiyo ama u soo bandhigo iib ama qaybiya alaab dawooyin xumaaday ah waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) lix bilood ilaa 3 sanno iyo ganaax aan ka ayrayn 1000 sh. Som.

**Qod. 341**
**Qaybinta alaab dawooyin ah qaab**
**khatar ku leh caafimaadka dadweynaha**

Cid kasta oo ku hawlan xataa isagoon awood loo siin inuu ka ganacsado alaab qaybiya; tayada ama tirada aan la socon tan caafimaad loo qeexay ama ka duwan waxa qoran ama lagu heshiiyay waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi 6 bilood ilaa 2 sanno iyo ganaax 1000 sh. Som ilaa 10000.

**Qod. 342**
**Samaynta iyo ka ganacsiga maandooriyayaasha**

1. Cid kasta, marka laga reebo kuwa sharcigu ogol yahay ka ganacsada (narcotics) (56 Pc), ama haya si uu u iibiyo, ama u qaybiyo ama cid kale u haya waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) sanad ilaa 3 sano iyo ganaax aan ka yarayn 1000.

2. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) haddii mid ka mida alaabooyinkaas la iibiyo ama loo gudbiyo qof ka yar 18 jir ama qof maskaxdiisu ay dhiman tahay, ama qof ka waarida isticmaalka narkotikis (56 Pc).

**Qod. 343**
**Hooy siinta isticmaalidda maandooriyaha**

1. Qof katoo aan ka mid ahayn kuwa dambiga galay ee ku xusan oo aan ka mid ahayn Qod. aanu soo dhaafnay ku xusan isticmaala ama u ogolaada meeshiisa fagaare ama meel dadweyne, ama ay ugu guuriya dad isticmaalaya naarkootiga (96 pc) lix bilod ilaa laba sano iyo ganaax 500, 2000.

2. Qof kasta oo soo gala meeshaa isagoo ujeeda isticmaalid naarkootiga (56 Pc) wuxuu hoos iman doonaa xabsi ilaa lix bilood iyo ganaax (97 Pc) 1000, ilaa 5000 sh. Som.

**Cutubka 3aad**
Dambiyada khatar galinaaya badbaadada guud

**Qod. 344**
**Dambiya saaidinta ee waxyeellaynaayo badbaadada guud**

Qof kasta oo sidenbisaaidin (24 Pc) sababa eeya dab ama aafo kale (330 Pc) ee ku xusan cutubka koowaad ee qyabtan waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) sannad ilaa 5 sanno.

**Qod. 345**
**Dambiyada si saai'd u keena khatar**

1. Qof kasta oodenbisaaidintiisu fala ama fahi waaya (24 Pc) abuura ama sii wada khatar aafo (330 Pc) waxa lagu ciqabi doonaa xabsi (96 pc) ilaa todoba sanno.

2. Weedha xabsiga Kama yaraanayso 1 sano marka dambiiluhu uu jabiyo amar gaara oo ay bixiyeen masuuliyiin tilmaamaysa cidhib goynta khatarta.

**Qod. 346**
**Ka tagista ama ka hor imaadka taxadirka**
**ama difaaca lidka ku ah aafooyinka iyo dhibaatooyinka**

Cid kasta oo si dambiile uga tagta inay dhigaan meesheeda ama ka qaadaan meesheeda ama ka dhigaan waxaan shaqaynayn qalad kasta ama shay kasta ama siyaabo kasta samata bixinta ama gargaarka loola jeeday in la isticmaalo wakhtiga shilalka (330 Pc) ama ka hor taga taas waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) ilaa hal sanno ama ganaax (97 Pc) 1000 ilaa 10000 Sh. Som.

**Qod. 347**
**Dambiyadda leh denbi saa'idin ku lid ah caafimaadka dadweynaha:**

1. Cid kasta, ee dambiyo saaidi (24 Pc), gala fal ka mid ah kuwa ku xusan qodobada 334 iyo 335, waxa lagu ciqaabi:

   a) xabsi (96 Pc) saddex ilaa 12 sanno, kuwa xusan inay ciqaabtu tahay dil (94 Pc);
   b) xabsi daaim (95 Pc) ayaa u qeexan;
   c) Xabsi (96 Pc) lix bilood ilaa 3 sanno, kuwa ay ciqaabtu tahay xabsi muddo ah (96 Pc) ayaa u qeexan;

2. Qof kasta oo si kama ah uga gala dembiyadda ku xusan qodobada 336, 337, 338, 340 iyo 341 baqo lagu galo ($24^{c1}$ Pc) waxa lagu ciqaabi doonaa qodobadaas sida ay u kala horeeyaan iyadoo laga naaqusay lix daloolow dalool ama saddex daloolow dalool.

**CINWAANKA 7AAD**
Dambiyada la xidhiidha meel kaga dhaca caqiiddada dadweynaha

**Cutubka 1aad**
Been abuurka lacagta, badbaadada iyo shaabadaha

**Qod. 348**
**Lacagta been abuurka, isticmaalida iyo soo gelinta dalka**

1. Been abuurista lacagta wax ku iibsashada ama soo galinta lacag been abuur qaran ee fal ah kuwa soo socda waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) saddex ilaa 12 sanno oo ganaax wehesho (97 Pc) 5000 som. Sh. ilaa 30,000 som. Sh:

   a) Cid kasta ee been abuurta lacagta dalka ama tan shisheeye ee ah tan sharciga ah gudaha iyo dibadba;
   b) Cid kasta ee si kasta u bedesha lacagta runta ah si ay u yeelato muuqaalka mid ka qiimo sarraysa, ama hoos u dhigaysa qiimaheeda;

c) Cid kasta oo aan ka mid ahayn kuwa been abuurista ama bedelaada, laakiin hla yeesha iskaashi qofka falka galay ama si dhexdhexaadin ah, keena dalka gayiga qaranka (4 Const) (4 Pc) lacag been abuur ah ama la bedelay, ama haysta, khasira, ama suug gelinteeda ka shaqeeya.
d) Qof kasta oo suug galinteeda wax ku iibsada ama si uun u qaata lacagtaas bedelan qofku been abuuray ama mid dhexdhexaadiye ah.

2. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118) marka falku keeno qiimaha lacagta qaranka oo hoos u dhacda ama aaimnaadeedu gudaha ama dibadda si xun u saameeyo (97 Pc)

**Qod. 349**
**Soo gelinta lacag been abuur ah ku talo gal la'aan**

Cid kasta, oo aany ku jirin kuwa ku xusan Qod. hore, ee keena gayiga qaranka (4 Const) (4 Pc) ku iibsaa, ama haysta lacag been abuur ah ama mid la beddelay, ulana jeeda suuq galin wuxuu mudan doonaa ciqaabta ku xusan Qod. aynu soo dhaafnay, oo hoos loo dhigay saddex dalool hal dalool ilaa kala badh ama nus.

**Qod. 350**
**Isticmaalid lacag beenabuur oo lagu qaatay niyo samid**

Cid kasta isticmaasha, ama haddii kale suuqa galisa lacag been abuur ah ama mid beddelan isaga oo ogsoon inay tahay lacag been abuur ah xabsi ilaa 6 bilood, ama ganaax la socda (97 Pc) ilaa 10000 sh. So.

**Qod. 351**
**U dhignaanta badbaadada lacagta**

1. ula jeedada Xeerkaka Ciqaabta, badbaadadu waxau u dhigantaa lacagta (70 Pc) 349,350 Pc)

2. Ula jeedada Xeerkaka Ciqaabta "badbaadooyinka" waxay tahay marka lagu darro tan ah sharci, ee shahaadooyinka iyo xaashiyuhu ay yihiin kuwa ay dawlado soo saareen iyo kuwa kale ee ah sharciga oo ay soo saareen cid loo idmay soo saaristooda.

**Qod. 352**
**Been abuurista shaabadaha (stamps), keenista, iibsashada, haysashada ama faafinta shaabadahada been abuurka ah**

1. Caddaymaha qodobada 348,349 iyo 359 waxa loo cuskan doonaa been abuurka ama bedelaada tigidhada ee la keeno gayiga qaranka ama ku iibsasho marka falku aanu ahayn mid keenayadenbisii culus (15 Pc) xabsi laba ilaa lix sano oo ganaax wata (97 Pc) 3000 sh. Som ilaa 10000.

2. Xeerkakan waxaa looga jeedaa shaanbad, shaanbada waraaqaha, tan soo gelida, tigidhada waraaqaha, waraaq kasta oo sharci gaari siiyay qiimaha saanbada.

**Qod. 353**
**Been abuurka waraaqaha loo isticmaalo soo saarista waraaqo qiima leh ama shaabadaha (stamps)**

Qof kasta oo khiyaama waraaqaha rasmiga ah ku kaca ee loo samaystay nabadgelyadda ama shahaadada ama iibsiga ama siinta ama ka qaadida waraaqaha khiyaamadda, waxaa lagu ciqaabi (96 pc) laba iyo lix sanno iyo ganaax (97 pc) 3,000 ilaa 10,000 sl. Shilling.

**Qod. 354**
**Samaynta ama haysashada qalab lagu beenabuuro lacagta, shahaadaha shaqaynaya ama waraaqaha la bedeli karo**

Qof kasta oo sameeya, iibsadda, haysta ama bixiya qalabka wax lagu bedelo, isagoo ula jeedo qudha ka leh ee khiyaamo ah, ama bedelaad waxa markaas socda (348 pc) shaambaddo (352 pc) ama waraaqaha la bedelo, waxaa lagu ciqaabi doonaa, meesha aanu falku samaynayn xaalad adag ee dambi (15 pc), waxaa lagu ciqaabi doonaa (96 pc) hal sanno ilaa shan sanno iyo ganaax 997 pc) sl. Shilling 1000 ilaa 5,000.

**Qod. 355**
**Khiyaamo tigidhadda gaadiid dadweyne**

Qof kasta oo khiyaameeya ama bedeela tigidhada gaadiid dadweyne, ama ka mid ah dhinaca samaysay khiyaamo ama bedel iibsahsaho, haysasho, ama fidiya wareejinta khiyaamadan iyo bedelkan tigidhada, waxaa lagu ciqaabi doonaa (96 pc) ilaa hal sanno iyo ganaax (97 pc) so. Sh 100 ilaa 2,000.

**Qod. 356**
**Ka reebanaanta ciqaabta**

Cid kasta oo gasha mid ka mid ah falalka ku xusan qodobada aynu soo dhaafnay ku guulaysta inuu baajiyo been abuurka lacagta badalaada soo saarista ama suuq gelinta alaabta ku xusan qodobada aynu soo sheengay, inta aanay dadka ka masuulka ahi aanay warkaa helin ciqaab mudan mayo.

**Qod. 357**
**Isticmaalida shaabadaha beenabuur ah ama la beddelay**

1. Cid kasta oo aan ka mid ahayn kuwa been abuurka ama bedelaada hadana ka faa'iidaysta bedelaada ama tigidha la dooriyay ama la been abuuray (352 Pc) waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 3 sano iyo ganaax weheliya ilaa 5,000 shilin.

2. Marka tigidhadu ay ganantiisa galaan isaga oo daacad ka ah, ciqaabta ku xusan Qod. 350 hoos baa loo dhigi doonaa, sadex daloolow hal dalool.

**Qod. 358**
**Isticmaalida tigidhada la been abuuray ee baabuurta dadweynaha**

Cidkastaoo aan ka mid ahayn kuwa been abuurka ama doorinta, ka faa'iidaysta tigidhada been abuurka ee gaadiidka dadweynaha (96 Pc) waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi ama ganaax (97

Pc) 100 ilaa 2000 marka tigidhka si niyad sami ah loo qaato waa ganaax (97 Pc) 300 la saari doonaa.

**Qod. 359**
**Doorinta calaamadaba tigidhada (stamp) horay loo isticmaaIay iyo isticmaalka doorintaas**

Cid aksta oo baabi'isa ama si kasta u sababaysa inay muuqaal qoraal saambaduhu (352 Pc) ama tigidho nooc kasta oo gaadiidka dadweynaha calaamadahooda ku dul qoran, inay yihiin kuwo hore loo isticmaalay hadana ka faaiidaysta hadana dib u isticmaala ama u ogolaada cid kale waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa lix bilood ama ganaax weheliya boqol ilaa 2000 shilin.

1. Cid kasta oo ka mid ahayn kuwa wax dooriyay ee isticmaala shaambadaha la dooriyay ama tigidhada (352 Pc) waxay mudan doonaan ciqaab la mid ah marka alaabtaas loo qaato si niyad sami, khasiraad kaliya ayaa la saari doonaa.

2. Been abuurista astaanta shaambadeed ee qaran, qalabka ama sumada runta ah shahaadooyinka ama sumad soocan.

**Cutubka 2aad**
Been abuuridda shaabadda dawladda ama qalab kale ama sugnaan asalnnimo, caddeymaha ama aqoonsiga

**Qod. 360**
**Been abuurka astaanta shaabadeed ee qaranka iyo isticmaalideeda**

Cid kasta oo been abuurta astaan shaaambadeed ee qoran ee loola jeeday in lagu dhajiyo dhukumantiga dawlaa ama in katoo aanu ka qayb qaadan been abuurkeeda uga faa'iidaysta isticmaalkeeda dad kale waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi 996 Pc) 3 sano ilaa 6 sano ama ganaax weheliya 1,000 ilaa 20,000.

**Qod. 361**
**Been abuurida astaamaha dadweynaha ama qalabka loola jeedo xaqiijinta ama shahaadooyinka iyo isticmaalidooda**

1. Cid katoo been abuurta astaanta xubin ka mida kuwa dadweynaha ama xafiis qaran ama aan ka qayb galin, oo aan ka qayb qaadan been abuurka hadana ka faa'iidaysta astaamahaa la been abuuray waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 1 sano ilaa 5 sano iyo ganaax weheliya 1 sano ilaa 10 sano.

2. Ciqaab la mid ah ayaa loo cuskan doonaa qof kasta oo been abuura qalab kale oo loola jeeday xaqiijin dadweyne ama shahaado ama aan kaba qayb galin been abuurida ee ka faa'iidaysta isticmaalida been abuurida alaabtaa.

**Qod. 362**
**Been abuurida ay ku daabacantahay bayaaminta dadweynaha ama shahaado bixinta**

Cidkastaoo si ka duwan qalabka aynu qodobada hore aynu ku soo sheegnay been abuura waxa ku daabacan, rumaynta iyo shahaado bixinta, ee aan ka qayb galin been abuukooda, ka faa'iidaysta isticmaalka alaabta xambaarsan daabacaad been abuuruhu waxaa kaluu mudan doonaa ciqaabta si gaara ugu qeexan labada qodob ee aynu soo dhaafnay (360,361 Pc) oo hoos loo dhigay sadex daloolow hal dalool.

**Qod. 363**
**Si xun u isticmaalidda qalab suuban**

Cid katoo kasta astaamo suuban ama qalab suuban oo loola jeedo run ka sheegida ama shahaado bixinta dadweynaha ka faa'iidaysta isticmaalkeeda, sidoo kale uga horjeeda ama si faaiido naftiisa ama si faaiido qof kale waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi 996 Pc) ilaa 3 sano iyo ganaax ilaa 3,000.

**Qod. 364**
**Isticmaalida ama haysashaa Cabirayaal ama miisaamo shaabad been ah leh**

1. Cid kastoo si aan dan u ahayn ka faaiidaysta cabiraayaasha ama miisaanada la been abuuray ama la dooriyay shaambadaha sharciga ah ama cabirayaasha ama miisaanada sharciga ah si uun loo dooriyay waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) lix bilood ama ganaax weheliya (7 Pc) ilaa 5,000.

2. Ciqaabtaas la mid ah ayaa loo cuskan doonaa oo ganaax ku jiro ama dukaan dadweynaha haysta cabirayaal ama miisaamo leh shaambado been abuuran oo waji sharci leh ama loo dooriyay ama cabirayaal ama miisaamo si uun loo dooriyay.

3. Ulajeedada Xeerkaka Ciqaabta cabirayaasha, iyo miisaanaa waxa ku jira qalabka nooc kasta ee loo isticmaalo cabirka ama miisaanka.

**Qod. 365**
**Been abuurka, doorinta ama isticmaalka calaamadaha suuradaynta ee qoraalka ah ama sawirka ah ama wax soo saar warshadeed ah**

1. Cid kasta oo been abuurta ama bedesha calaamadaha ganacsiga ama suuradaynta tan wadaniga ah ama mid ajanebi oo qoraal ah ama sawir ah ama wax soo saar warshadeed ah ama aan ka qayb qaadan been abuurista ama doorinta ee isticmaala ka faaiidaysigaas la been abuuray ama la dooriyay ee calaamadaha waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 3 sano iyo ganaax weheliya (97 Pc) ilaa 20,000.

2. Cid katoo been abuurta ama doorisa sumadaha, naqshaa, warshada, moodeelada wadaniga ah ama shisheeye ah ama aan ka qayb qaadan been abuurid ama doorinta u isticmaala si uga faaiidaysto been abuurka ama doorinta calaamadahaas ama doorin sumadahaa; naqshada ama moodeelada wuxuu mudan doonaa ciqaab la mid ah.

3. Cadaymaha hore waxa loo cuskan doonaa haddii qofku u idman ilaalinteeda uu raaco cadaymaha loo dhigay ee sharcigu wadaniga ah ama caalami ah ee ilaalinta qoraalada, sawirada, ama hanti warshadeedka.

**Cutubka 3aad**
Beenabuur waraaqo sharciyeed

**Qod. 366**
**Been abuurka dokumentiyada dadweynaha ee sarkaal dadwene qoro**

Sarkaal dadweyne (24 Pc) ee isagu fulinaya waajibaadkiisa dhamaan ahaan ama qayb ahaan, dhukumantiyo been ah ama dooriya dhokumanti sax ah waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) sannad ilaa 8 sano.

**Qod. 367**
**Been abuurka shahaadooyinka maamul ama amar bixinta, taasoo uu sarkaal dadweyne bixiyo**

Sarkaal dadweyne (24 Pc) isagoo gudanaya waajibaadkiisa, been abuura ama dooriya shahaadooyin maamul ama amarkeeda bixiya in la dooriyo ama la been abuuro sababeeya inay yeelato muuqaal xaaladihii looga baahnaa dhowersanaanteeda hir galiya waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi lix bilood ilaa 1 sano.

**Qod. 368**
**Been abuurka nuqullada runta ah ee dadweynaha ama gaar ahaaneed ee dukumanityo iyo kuwa shahaadooyinka ee ay ka kooban yihiin dukumantiyo uu qoro sarkaal dadweyne.**

1. Sarkaal dadweyne isagoo gudanaya waajibaadkiisa sumadaha nuqul dhukumenti dadweyne ah ama mid gaar ahaaneed ee u bixiya si nooc sharci ah ama u bixiya nuqul dhukumanti gaar ah si ka duwan ka asal kan waxa lagu ciqabi doonaa xabsi (96 Pc) sanad ilaa lix sano.

2. Haddii been abuurku galo sarkaal dadwene (240 Pc) shahaado ay ka mid tahay dhukumentiyo dadweyne ama gaar ahaanee dciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi (96 Pc) 1 sano ilaa 2 sano.

**Qod. 369**
**Beenabuur dukumenti oo uu bixiyo sarkaal dadweyne**

Sarkaal dadweyna marka uu qabanayo ama bixinayo dhukumenti isagoo gudanaya waajibaadkiisa si been ah uu shahaado bixiyo oo falkaasi isagu gala ama isaga hortiisa lagu galo ama uu cadeeyo in uu helay cadaymahaas, oo aan in cadayn ama ku taga ama dooriya cadaymaha uu helaya ama si uun xaqiiqo si been ah uga shahaado bixiya iyadoo loola jeeday inuu run sheegay waxa lagu ciqaabi doonaa sida ku qeexan Qod. 366.

**Qod. 370**
**Beenabuur uu bixiyo sarkaal dadweyne oo ku saabsan caddaymo ama ruqsa bixin maamuleed**

Shahaado bixin been ah ee shahaadooyinka maamul ama awaamiirtaada uu bixiyo sarkaal dadweyne (a public officer) 240 Pc) isaga oo gudanaya waajibaadkiisa si been ah uga shahaado bixiya, shahaado maamul ama amarkeeda bixiya, taas oo ay ahayd in run la sheego, waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) saddex bilood ilaa laba sano.

**Qod. 371**
**Shahaado bixin been ah oo uu bixiyo qof gudanaya xil baahi dadweyne**

1. Qof kasta oo gudanaya hawl caafimaad ama mid sharciyeed ama adeeg baahi dadweyne ee been ka shhaado bixiya dhokumanti xaqiiqadeeda, taas oo loola jeeday in run la coddeeyo. Waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa hal sano ama ganaax weheliya (97 Pc) 500 sh. Som ilaa 5,000.

2. Ciqaabta hore waxa isku dar ahaan loo cuskan doonaa marka falka loo galo si faaiido loo helo.

**Qod. 372**
**Shahaado bixin been ah ee qof gaar ahaaneed**

Marka mid ka mid ah falalka ku xusan qodobada 366,367 ama 368 uu galo shakhsi gaar ahi, ama sarkaal dadweyne (240 Pc) isaga oo fulinaya waajibaadkiisa, ciqaabta ku xusan qodobada aynu soo sheegnay, waxa hoos loo dhigi doonaa saddex dalool, hal dalool.

**Qod. 373**
**Shahaado bixn beeneed oo uu ku kaco shakhsi gaar ahaaneed**

1. Cid kasta oo si been ah ugu shahaado bixiya sarkaal dadweyne (240 Pc) si loo galiyo dhokumanti dadweyne, xaqiiqo, ay ahayad in dhokumantiyo caddeeyo run, waxa lgu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 2 sano.

2. mudada xabsigu (96 Pc) kama yaraan doonto saddex bilood xaaladaha been sheega shahaado bixnta dhokumantigu la xidhiidho xaalad qofeed.

**Qod. 374**
**Been ka sheegga diiwaannada iyo nootaayooyinka**

Cid kasta oo uu xeerku ku idmay in uu xafido diiwaan, u furan baadhis madaxda ay saamayso ama in uu siiyo madaxdaas hawlgeliddiisa warrshadeed, ganacsi ama aqooneed, qora ama oggolaada in la qoro been xogeed, waxa lagu ciqaabdi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 6 bilood ama ganaax weheliya (97 Pc) ilaa 3,000 sh. So.

**Qod. 375**
**Beenabuur qoraal gaar ahaaneed**

1. Cid aksta oo leh ujeedo in uu naftiisa u helo, ama cid ka faaiido ama sababeeyo dhibaato cid kale, dhamaan ahaan ama qayb ahaan, ee dooriya waxqabasho suuban ee gaar ahaaneed waxa lagu ciqaabi doonaa hadii uu ka faaiidaysto ama u ogolaado cid kale in ay ka faaiidaysato xabsi (96 Pc) lix bilood ilaa saddex sano.

2. Kordhinta been lagu soo daro tii hore wax qabad suuban amrka iyadii la soo gabagabeeyo, waxa loo qaadan inay tahay doorin.

**Qod. 376**
**Beenabuur warqad madhan oo sixiixan: dokumanti gaar ahaaneed**

1. Qof kasta oo u sugayn naftiisa ama qof kale faaiido ama shabaynaya waxyeelo cid kale, si u kas ah uga faaiidaysta warqad madhan oo la saxiixay, oo uu isagu hayo, oo ay ahayd in uu buuxiyo oo ku qoran ama sababeeya, in lagu qoro dhokumanti gaar ahaanee, taas oo keenta saamayn sharci ah taas qofka duwy tii loo idmay ama tii loo amray waa la ciqaabi doonaa, hadii uu ka faaiidaysto ama ogolaado cid kale inay ka faaiidaysato warqadda xabsi (96 Pc) lix bilood ilaa saddex sano.

2. warqad uu ka tegay kii saxeexi lahaa iyada oo meeshii la buuxin lahaa, waxa loo qaada mid la mid ah tii madhaynd oo kale

**Qod. 377**
**Been abuurka waraaqaha madhan la saxeexay; dokumanti dadweyne**

Sarkaal dadweyne (24 Pc) oo si qaldan uga faaiidaysta waraaq madhan oo la saxeexay oo uu hayo sababta oo ah xil xafiis taas oo uu xaq u leeyahay ama ay waajibkiisa tahay inuu buuxiyo hadduu ku qoro ama sababeeyo in wax lagu qoro taas oo ah dhokumanti dadweyne oo ka duwan qaab ahaan tii uu masuulka ka ahaa ama awooda loo siiyay inuu qoro, wuxuu hoos iman doonaa ciqaab taas ah ee ku xusan qodobada (369,370 Pc).

**Qod. 378**
**Adeegsiga dokumenti been abuur ah**

1. Cid kasta oo aan ka mid ahayn ku wax been abuuraya isagoo og ka faaiidaystay wuxuu hoos iman doonaa ciqaabaha ku xusan qodobada aynu soo dhaafnay oo la dhimay saddex daloolow hal dalool.

2. Xaaladaha falalka gaarka ah qofka dambiga gala wuxuu mudan doonaa ciqaab marka haddii uu falka uu sameeyay ula jeedo inuu ku danaysto ama qof kale ugu daneeyo ama cid waxyeelo ugu gaysanaayo.

**Qod. 379**
**Baabi’in, burburin ama qarin dokumentooyin sax ah**

1. Cid kasta oo dhamaan ahaan ama qayb ahaan, burburiya cagta saara ama qariya dhukumanti dadweyne ama mid gaar ahaaneed wuxuu mudan doonaa siday u kala khuseeyaan ciqaabaha ku xusan qodobada 366, 367, 372, 375 si waafaqsan cadaymahaas.

2. Caddaymaha faqrada labaad ee aynu soo dhaafnay ayaa la cuskan doonaa Qod. isna.

**Qod. 380**
**Dukumantiyo u dhigma dokumentooyin dadweyne ee ula jeeddada ciqaabta**

1. Marka mid been sheeg isaga ku xusan qodobada aynu soo dhaafnay ee ku saabsan isku doorinta ama qalabka kale ee lagu gorgortami karo ciqaab dacwadan ku xusan Qod. 357 ee ka been sheegida hawlaha gaar ahaaneed ciqaabaha midba teeda loo qeexay ee faqrada koowaad ee Qod. 366 iyo 372 waxay khusaysaa:

2. Xaaladaha been abuurista lacag ama doorinta ee ka mida dokumantiga hore ee hadana ka qayb qaadan wuxuu mudnaan doonaa ciqaabta ku xusan Qod. 378 isticmaalka documanti dadweyne oo been ah.

**Qod. 381**
**Nuqulada xaqiijinta ah ee asal ka ah ee maqan**

Ula jeedada cadaymaha aynu soo dhaafnay dhokumanti dadweyne iyo fal gaar ahaaneed waxay ka mdi yihiin dhokumanti asal ah iyo nuqulada xaqiijinta kuwaas, marka iyadoo la raacayo sharciga ay galaan halkii kuwa asalka ee maqan.

**Qod. 382**
**Been sheegida ay galaan cid xil dadweyne loo dhiibay**

Cadaymaha qodobada aynu soo dhaafnay ee ku saabsan falalka beenta ah ee ay galaan sarkaal dadweyne (240 Pc) ayaa sidaas oo kale loo cuskan doonaa dadka lagu aaminay adeeg dadweyne (240 Pc) iyo saraakiisha kale ee xubinta ka ah xil dadweyne wixii la xidhiidha dhukumantigan wixiii fal ee ay ka gaystaan iyagoo fulinaaya waajibaadkooda.

**Cutubka 4aad**
Qof kale iska dhigid

**Qod. 383**
**Qof kale iska dhigid**

Qofka kasta isagu ujeeda inuu ku daynaysto ama cid kale u daneeyo ama cid ku waxyeeleeya, khiyaameeya isagoo si sharci darro ah qof iska dhigaya, ama isku daya maqaal been ah, ama naftiisa siinayay ama qof kale siinaaya ama daru jabeen ah isa siinaaya ama qof kale siinaya awood qaanuunku siinayo saamayn maxkamadeed soo gaalaayo, waxaa lagu ciqaabi doonaa marka aanu falku ahayn mid dambi khatar ah keenaya xabsi (96 Pc) ilaa hal sanno.

**Qod. 384**
**Shahaado bixin been ah ama caddayn sarkaal dadweyne oo been ah**

1. Qof kasta oo si khalad ah u sheega ama ugu siga sarkaal dadweyne (240 Pc) arrin dhukumanti dadweyne iyo xaaladeeda, waxa ku qoran suuradeeda iyo xaaladeeda ama awood kale oo uu naftiisa siiyo ama qof kale waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 3 sanno.

2. Cid kasta oo gasha fal caddayn ah oo ula jeedo in din boogu sameeyo iyadoo ah dhukumenti dadweyne wuxuu mudan doonaa ciqaab la mid ah.

3. Muddada xabsigu kama yaraan doonto 1 sano:

    a) Xaalada cadaymaha ee astaamaynta dhokumentiyada.
    b) Marka cadayntu been tahay ku saabsan astaamintiisa xaaladiisa darajadiisa shakhsiga ee uu sameeyo qof isagu eedaysane ah oo uu sheegay saraakiil maxkamadeed, (92 Const) ama marka ee caddaynta dabadeed ku gar niqiddenbila galiyo diiwaanada maxkamada oo ah magic been ah.

**Qod. 385**
**Waraysi been ah oo ku saabsan astaanta iyo awoodda qof ahaaneed**

Cid kasta marka laga reebo kuwa ku xusan qodobada aynu soo dhaafnay la waydiiyo astaamihiisa darajadiisa ama awoodihiisa kale ama kuwo qof kale ee bixiya cadaymo aan sax ahayn ee uu siyo sarkaal dadweyne isagoo fulinaaya waajibaadkiisa waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 1 sano ama ganaax weheliya (97 Pc) ilaa 5000.

**Qod. 386**
**Xidhashada darajooyin ama sharafyo**

1. Cid kasta oo si qalad ah u labisata si fagaare ah labiska ama calaamado kale oo muuqda ee sarkaal dadweyne ama darajo (240 Pc) ama mid sharci dajineed, ama mid maamul, ama mid cid garsoornimo (49, 77, 92 Const) ama mid aqooneed taas oo u baahnayd fasax in laga helo madaxda dadweynaha waxa lagu ciqaabi doonaa ganaax.

2. Ciqaab la mid ah ayaa la saari doonaa qofka qaata sharaf aqooneed ama darajooyin, ama astaamo ama arrimo kale oo sharaf dadweyne ama awood kasta oo uu leeyahay xafiis kasta, jago kasta iyo aqoon kasta oo uu ku xusan faqrada aynu soo dhaafnay.

**CINWAANKA 8AAD**
Dambiyada laga galo dhaqaalaha qaranka, sancada iyo ganacsiga

**Cutubka 1aad**
Dambiyada lidka ku ah dhaqaalaha guud

**Qod. 387**
**Burburinta alaabta cayrinka ah ama dalagga beeraha ama warshadaha, yacnii qalabka wax soosaarida**

Cid kasta oo burburisa alaabta cayrin ama ta beeraha ama ta warshadaha ama qalabka wax soo saarka sababaysa wax yeelo khatar ah oo gaadha wax soo saarka wadaniga ama kala go' badeecada caadi loo isticmaalo waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 3 sano ilaa 12 sano (97 Pc) ganaax la socdo ilaa 20000.

**Qod. 388**
**Cudur galinta dhirta iyo xoolaha**

Qof kasta oo sababeeya fidinta cudurka wax beerista saraca ama xoolaha taasoo waxyeelo u gaysanaysa wax beerista ama xoolaha nool waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) 1 sano ilaa 5 sano.

**Qod. 389**
**Si khiyaamo leh kor u qaadidda ama hoos u dhigidda qiimaha suuqa guud**

1. Cid kastoo ula jeeda inay kharbudo suuqa deganaanshaha ama alaabooyinka ee daabacda ama haddii kale fidisa ama buun buunisa warar been ah, ama hawl galisa si kaloo khiyaamo ku jirto oo keenaysa inay sababaytso hoos u dhac ama kor u kac qiimaha badeecada ama badbaadadooda kuwaas oo ah kuwa liisaskoodu ay ku jiraan isku bedel ka lacagta qalaad ama

ah kuwa lagu gorgortamo waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa 3 sano oo aan ka yarayn ilaa 3000.

2. Marka kor u kaca alaabta qiimaha ama badbaadadeeda ciqaabta waa la kordhin doonaa.

3. Waa la labanlaabi doonaa ciqaabta marka:

   a) Falka uu galo qof muwaadin ah (4 Pc) ula jeedada ah la jirista dano shisheeye ;
   b) Marka falku ku dhamaado hoos u dhaca sarifka waaniga ama kor u kaca ama heerka alaabta si caadiya loo isticmaalo

4. Ciqaabta ku xusan cadaymaha aynu soo dhaafnay waxa loo cuskan doonaa marka falka lagu galo dibada, ee lagu xumaynayo lacagta wadaniga ama badbaadada Soomaaliyeed.

5. Ku garniqida waxa ku jiri doonta ka joojinta xafiisyada dadweynaha.

**Qod. 390**
**Ka bixidda iyo shaqo joojinta**

1. Qof katoo shaqaala ah marka laga reebo intuu sharcigu ogol yahay oo dhamaan ahaan ama qayb ahaan mu asasada, ama xafiiska waxa lagu ciqaabi doonaa ganaax aan ka yarayn (10000).

2. Shaqaalaha ka shaqeeya mu asasad ama xafiis marka laga reebo inta sharcigu ogol yahay (27 Const) 120 xeerkaka shaqaalaha ee si wada jir ah uga taga shaqadooda ama u shaqeeya si khalkhal galinaysa socodka iyo joogtaynta taas waa lagu ciqaabi doonaa ilaa (1000).

**Qododbka 391**
**Degista ama qabsashada goob beereed**
**ama wershedeed; shaqo curyaamin**

1. Cid kasta oo leh ujeedada keli ah, inay joojiso ama khalkhal geliso wadida caadiga ah ee shaqada, qabsashada, qabsato ama dega meel ka mid ah dhul beereed ama wershadeed cid kale leedahay, ama la wareegta mishiino, qalab ama adeeg ama hir geliso kuwaas oo loo jeeday wax soo saar beereed ama wershadeed oo cid kale leedahay, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa saddex sanno oo ganaax (97 Pc) la socdo aan ka yarayn 1,000 So. sh.

2. Cid kasta oo wax yeelaysa dhismayaal loo isticmaalo beeraha ama wershadaha ama alaab kale oo ku xusan cadaymaha hore, waxaa loo cuskan doonaa marka falku aanu ahayn mid dembi khatar weyn ah xabsi (96 Pc) lix bilood ilaa afar sanno iyo ganaax aan ka yarayn 5000 Sh. So.

**Qod. 392**
Dambiyada Saaidka ah

Ku garniqiddenbikasta oo ku xusan labada qodob ee hore waxa ku jiraya ka joojin xafiis kasta ee ururka shaqaalaha muddo shan sanno ah.

**Cutubka 2aad**

Dambiyada ku lidka ah warshadaha iyo ganacsiga

**Qod. 393**

**Faro galinta xorriyada sancada iyo ganacsiga**

Cid kasta oo u isticmaasha xoog daabooyinka ama khiyaamo si ay u hor joogsadaan ama u khalkhal galiyaan dhaqanka warshadeed ama ganacsi, waxa iyada oo la raacayo dacwada dhibanaha (81 Pc), lagu ciqaabi, marka falku aan ahayn mid khatar wayn oodenbikeenaya (15 Pc), xabsi (96 pc) ilaa laba sanno oo ganaax la socdo (97 Pc) 1000 ilaa 2000 sh. Som.

**Qod. 394**

**Khiyaamada ku lidka ah warshaaha qaranka**

Cid kasta oo iib u dhigta ama haddii kale wareejisa, suuqyada wadaniga ah iyo kuwa shisheeye, wax soo saarka warshadaha been abuur ama doorin magacyo muuqda, summaddo ama calaamado sababeeya wax yeelo warshadaha wadaniga ah, waxa lagu ciqaabi xabsi (96 pc) sannad ilaa shan sano oo ganaax la socdo (97 Pc) aan ka yarayn 5000 sh. Som.

**Qod. 395**

**Khiyaamada hawlaha gaancsiga**

1. Cid akta oo ku guddo jirta dhaqdhaqaa ganacsi, ama dukaan u furan dadwaynaha gaadhsiisa dibadaha shay lagu bedelay mid kale, ama shay ka duwan asal ahaan manfac ahaan tayo iyo tiro kii lagu heshiiyay ama la caddeeyay, marka falku aankeenayn khatar denbi (15 Pc) xabsi (96 pc) ilaa laba sanno ama ganaax la socdo (97 Pc) ilaa 20000 sh. Som.

2. Marka daabadu ay kuwa qiimaha badan, ciqaabtu waay noqonaysaa ilaa saddex sanno ama ganaax aan ka yarayn 1000 sh. Som (97 Pc).

**Qod. 396**

**Cunto xun oo loo iibiyo sidii mid fiican**

Cid kasta oo iib meel u dhigta ama ka ganacsata wax soo saar cunto oon fiicnayn si mid fiican, waxa lagu ciqaabi doonaa marka falku aanu ahayn middenbiwayn oo khatara keenaya xabsi (96 pc) ilaa lix bilood ama ganaax la socdo (97 Pc) ilaa 10000 sh. Som.

**Qod. 397**

**Ku iibinta wax soo saarka warshada calaamado been ah**

Qof kasta oo iib u soo dhiga ama qaab qoraal ahaan ama sawir ahaan u dhiga iib ama wax soo saarka warshadaha gaancsi, ama calaamado kale oo shisheeye kuwaasoo suurtogal ka dhigaysa, inay khiyaamayso iibsadaa isagoo u haysata kuwii runta ahaa ama meeshii runta ahayd ama tayadii shaqada ama mid wax soo saar waxa lagu ciqaabi doonaa marka falku aanu ahayn mid khatar (15 Pc) xabsi (96 pc) ilaa 1 sano (97 Pc) iyo ganaax ilaa iyo 10,000.

**CINWAANKA 9AAD**
Dembiyada lidka ku ah damiirka bulshada iyo dhaqanka suuban

**Cutubka 1aad**
Debiyada lidka ku ah kufsiga

**Qod. 398**
**U galmoodka khasabka ah**

1. Qof kasta oo xoog ahaan ugu galmooda qof jinsiga kale ah, waxa lagu ciqaabi xabsi (96 pc) 5 ilaa 15 sano.

2. Ciqaab la mid ah ayaa la saari doonaa haddana qof kasta oo jinsiga kale ah xoog ahaan ugu galmooda, kaas oo lahayn awood uu ogolaansho ku bixiyo ama qof uu dambiiluhu qof kale isugu sheegay ama isaga dhiga.

3. Ciqaab la mid ah ayuu mudan donaa sarkaal dadweyne isaga oo ceebaynaya awoodiisa markii u galmooda qof jinsiga kale ah oo la xidhay ama la hayo, oo uu hayo sarkaalkaasi sabab xafiiskiisa awgeed oo lagu aaminay isaga oo fulinaya amr madaxeed

4. Ula jeedada Xeerkaka Ciqaabta (398, 400 Pc) dhexgalida xubin ka mid ah qaybaha isu tagu ee raga oo waay tahay u galmood.

**Qod. 399**
**Falka lagu galo khasab**

Qof kasta oo qof ka duwan sinji ahaan si khasab ah ama xaaladaha ku xusan Qod. kan kan ka horeeya istiim ugu sameeya waxaa lagu ciqaabayaa xabsi (96 Pc) hal sanno ilaa shann sanno.

**Qod. 400**
**Galmada aan caadi ahayn**

Isku galmoodka khasabkaa ee jinsiguu; marka uu dhaco falalka ku xusan qodobada 398, 399 lagalo si lidku ah qof la jinsi ah ama wogkajinsi uu an si aan caada ahayn; ciqaabta waala kordhin doonaa

**Qod. 401**
**Afduubista kasinaysiga ama guurka**

1) Cidkasta oo xoog u istimaash cabsi gelin ama khiyaamo afduubis ama xayiraad qof sino ugu galmooda 398 waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96.Pc) laba ilaa shan sano.

2) Cid kasta xoog ku isticmaasha baqo galin ama khiyaamo afduub ama dafiraad ula jeedada gaf aan laqabin waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96p.c)1 sano ilaa 3 sano.

3) Qof kasta oo afduuba ama xayira naan una dulahatn ujeedo galmo qasab ah (98pc)ama kasiysi 399 ama guur wuxuu hoosiman doonaa ciqaabaha kuxusan ee midbateeda ee labada qodab ee aynu soo dhaafnay

**Cutubka 2aad**
Dunuubta ku lidka ah dhawrsanaanta iyo u galmadka sharfeed

**Qod. 402**
**Falalka fal xumada**

1. Qof kasta oo meel fagaare ah ku gala fal fool xumo (404 p,c) waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi lixbilood ilaa 3 sano.

2. Marka falka lagalay uu yahay mid ah danbu saa idin aan loo qastiyin (24 p,c) ciqaabta waxay noqonaysaa 300 ilaa 3000 sh,so.

**Qod. 403**
**Qoraallo iyo madaddaallo fool xun**

1. Cid kasta leh ula jeedo iib ama qaybin, ama bandhig dadwayne soo samaysa soona galisa gayiga qoranka iibisa ,haysa dibadda u dhoofisa ama suuqa galisa waraaqo foolxun sawir u muujinaya waxyaabo oo fal xun noockasta waxalagu ciqaabidoonaa 1000 sh,so

2. Qofka ka baayac mushtareeya xataa si qarsoodiya qodobada aynu soo sheegnay ee faqrada aynu soo dhaafnay ee qaybiya ama u soo bandhiga si fagaare ah, waxa uu mudan doonaa ciqaab la mid ah.

3. Ciqaabta aynu soo dhaafnay, waxaa iyana qabanaysa haddii qofku:

   a) Uu isticmaalo dariiqo xayaysiis ah oo loola jeedo inay xoojiso fidinta ama iibiska alaabooyinka ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan.
   b) Bixisa masrax dadweyne ama silimoo lagu muujiyo ama riyaawado fagaare, taas oo leh dabeecad fool xun.

4. Xaalada aynu ku xusnay xarafka (b) ee aynu faqrada aynu soo dhaafnay ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) uu baal maro mamnuucida madaxda.

**Qod. 404**
**Macluumaad xambaarsan falal aad u fool xun**

Marka laga eego Xeerkaka Ciqaabta 402, 403, falalka aadka u xun waxaa loola jeedaa marka la leeyahay way fool xun yihiin marka rayiga guud ay dhibaan, melena uga dhacayaan xishoodka.

**Qod. 405**
**Ka ganacsiga jidhka**

1. Qof kasta oo isticmaala ka ganacsi jidh, waxa lagu ciqaabi doonaa 2 bilood ilaa laba sanno iyo ganaax weheliya 100 ilaa 2000 Sh. Som.

2. Marka falku yahay qof guri leh ciqaabta waa la kordhin doonaa.

**Qod. 406**
**U jiidista falal fool xun**

Qof kasta oo meel fagaare ku jiida inuu falal fool xun ka sameeyo xataa si dad dadban waa la ciqaabi markaanu falku ahayn middenbikhatar ah keenaya waa xabsi ilaa 1 sano ama ganaax ilaa 2000 Sh. Som.

**Qod. 407**
**Ku qancinta, kaalmaynta ama ku dul noolaadka jidh ka ganacsiga**

1. Cid kasta oo ku qancisa, qof kale in uu galo jidh ka ganacsi ama ku kaalmeeya nooc kasta oo u googol xaadhaya jidh ka ganacsiga, ama dul noolaad, dhamaan ahaan ama qayb ahaan jidhka ganacsiga waxa u mudan doonaa ciqaabta ku xusan faqrada koowaad ee Qod. 405.

2. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) marka:

   a) Marka falka la galay uu lid ku yahay qof aan awood u lahayn inuu ogolaansho biixyo (47 Pc),
   b) Dambiiluhu yahay tafiirta, masuulka, walaal, walaasha ama waalidka qofka,
   c) Falka la galay uu lid ku yahay qof lagu aaminay dambiiluhu inuu daryeelo wax barro, tilmaamo, kormeero ama xafido.

**Qod. 408**
**Ku qasbidda jidh ka ganacsi**

1. Qof akta oo xoog ama cabsi gelin ku khasba qof kale inuu galo jidh ka ganacsi waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) laba ilaa lix sanno iyo ganaax la socda (97 Pc) 5000 sh. Som ilaa 15000 sh. Som

2. Marka mid ka mid ah xaaladaha ku xusan faqrada labaad ee Qod. hore jirto ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc)

**Qod. 409**
**Galmada isku jinsiga**

Cid kasta oo samaysa galmo qof kasta oo ay isku jinsi yihiin waa la ciqaabi doonaa marka falku aanu ahayn mid khatar ah waa xabsi (96 pc) saddex bilood ilaa saddex sanno. Marka uu yahay falka la galay mid ku raaxaysi ah oo aan ahayn galmo, ciqaabta waa la dhimi doonaa saddex daloolow hal dalool (119 Pc).

**Qod. 410**
**Tallaabooyinka nabadgalyo**

Tallaabooyin nabadgalyo ayaa la marin karaa xadhiga dambiga ku xusan qodobadda 407, 408, 409.

**Cutubka 3aad**
Dambiya kale ee ku lidka ah anshaxa guud

**Qod. 411**
**Iibina ama dad siinta sharaabka alkahoolka**

1. Cid kasta oo iibisa ama u keenta muwaadin Soomaali ah (4 Pc) ama qof Muslim ah (1 Const) oo ah muwaadin shisheeye sharaab alkahool ah oo kasta (417 Pc), waxa lagu ciqaabi xabsi (96 pc) ilaa saddex bilood ama ganaax weheliya (97 Pc) ilaa 1000 sh. Som.

2. Marka mid kasta oo sharab alkahool ah (417 Pc) la iibiyo ama loo keeno qof ka yar 14 sano ama qof qaba cudur maskaxeed ama ah mid xaalad maskaxeed oo dhiman leh oo ah nooc kasta oo maskax dhinaansho ah, ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc).

**Qod. 412**
**Isticmaalida sharaabka alkahoolka**

1. Marka laga reebo xaaladaha qodobada la soo dhaafay muwaadin Soomaali ah, ama ajnebiga Muslimka ah ama u isticmaala qaab kasta ha ahaatee mid ka mid ah sharaabka alkahoolka (417 Pc), waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa afar bilood iyo ganaax (97 Pc) ilaa 1,000 So. sh.

2. Marka falka lagu galo meel fagaare ah ama lagu galo meel u furan dadweynaha, ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc).

**Qod. 413**
**Sakhraannimo**

1. Qof kasta, oo meel fagaare ah ama meel u furan dadweynaha ku sugnaada xaalad bandhig sakhraanimo (53, 54 Pc), waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) ilaa saddex bilood ama iyo ganaax (97 Pc) ilaa 2000 sh. Som.

2. Ciqaabtu waxay noqon doontaa xabsi (96 pc) saddex ilaa lix bilood marka falka uu galo qof hore loogu cadeeyaydenbiku lid ah nolol bani aadan ama badbaado aan loo galin denbi saayidinimo (434,444,474,450 Pc)

3. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) marka sakhraanimadu ay tahay mid la caadaystay (55 Pc).

**Qod. 414**
**U keenidda am aka dhigid qof kale xaalad sakhraannimo**

1. Qof kasta, oo aan ahayn kuwa ku xusan Qod. 411, ee meel fagaare ah ama meel u furan dadweynaha, sababeeya sakhraanimo (413 Pc) dad kale u keenid sharaab alkahool ah 417 waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) ilaa hal sano.

2. Marka dambiiluhuy uu hayo goob dadweyne ku iibinta cuntada iyo sharaabka, ku garniqidda waxa daba socon doona joojinta liisanka (107 Pc) ama ruqsadda ay ku socoto goobtu.

**Qod. 415**
**Siin sharaabka alkoolka qof xaalad sarkhaasan ku jira**

1. Qof kasta oo aan ahayn kuwa ku xusan qodobada 411-441) u keena sharaab alkool ah (417 Pc) qof ku jira xaalad sakhradeed oo muuqata 413 waxa la ciqaabi doonaa xabsi ilaa 1 sano.

2. Marka dambiiluhu yahay kan haya goobta dadweyne ee lagu iibiyo cuntada iyo sharaabka ku garniqidu waxa daba socda in liisan ka muddo laga qaado (107) ama rukhsada uu ku wado meesha.

**Qod. 416**
**Samaynta ama ka ganacsiga alkahoolka sharci darrro ah**
**ama wax yaalaha kale ee loola jeedo in laga diyaariyo kuwaas qaar la mid ah**

1. Cid kata, oo dhowrahaya caddaymaha sharciga ama awaamiir masuuliyiinta, ee soo saarta, soo gelisa gayiga qaranka (4 Const. 4 Pc), haysa ula jeedo iib, ama iibisa, khamri ama sharaabkale oo alkahool ah waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) 500 ilaa 5000 sh. Som.

2. Ciqaab la mid ayaa la saari doonaa qof kale oo kasta oo aan dhowrahayn caddaymaha sharciga ama amarka masuuliyiinta, ee soo saara ama soo galiya gayiga qaranka (4 Const 4 Pc) alaabooyin loo jeedo diyaarin khamri (417 Pc).

**Qod. 417**
**Macnayn sharaab alkoleed**

Ula jeedooyinka Xeerkaka Ciqaabta (411-416 Pc) “Sharaab alkahoolik ah” waxa loola jeedaa sharaab alkahoolik ah oo qiyaastii ka saraysa isbiirto dhab ah saddex darrajo.

**CINWAANKA 10AAD**
Dambiyada ku lidka ah caafimaadka bani-aadamka

**Qod. 418**
**Ilmo uur ku dilista oggolaasho la’aan**

1. Cid kasta oo sababta in qof haween ah uurkeeda qaliin lagu sameeyo iyadoon lala tashan, waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) saddex ilaa todoba sanno.

2. Ciqaab la mid ah ayaa la saari doonaa qofka sababeeya soo xaadhista uur- kujirta haweenayda aan awood u lahayn in ay ogolaasho bixiso (47 Pc), marka taladu ogolaanshuhu lagu sameeyo qasab, cabsi baqa gelin hanjabaad ama si aan haboonayn loo jiito ama khiyaamo lagu sameeyo.

**Qod. 419**
**Oggolaansho soo saarid ilmo uur ku jira**

Cid kasta oo sababaysa qaliin haweenay ah oo ogolaatay waxa lagu ciqaabi xabsi (96 pc) hal ilaa shan sano ciqaab la mid ah ayaa loo cuskan doonaa haweenaydsa aqbasha qaliinkaas ama si kasta iyadu u sababaysa nafteeda.

**Qod. 420**
**Ku dhiirri-gelinta soo ridid ilmo uurka ku jira**

Ku garbinta soo xaaqista cid kasta oo marka laga reebo kuwa ku xusan Qod. hore ku kalifta haweenay uur leh in qaliin lagu sameeyo (420 Pc) iyadoo lagu maamulayo dariiqyo iyada ka yimid, waa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) lix bilood ilaa laba sanno.

**Qod. 421**
**Geerida ama dhaawaca haweenayda**

1. Marka falka ku xusan 418 keeno dhimasho (441 Pc) dhimashada haweenayda ah ciqaabta la saari doonaa waa xabsi (96 pc) toban ilaa shan yo toban sanno. Marka waxyeeladdu 444 dhacdo ciqaabta la saari doonaa waa xabsi (96 pc) saddex ilaa sideed sanno.

2. Marka falka ku xusan faqradda 1aad ee Qod. 419 keeno dhimashada haweenayda ciqaabta la saari doonaa waa xabsi (96 pc) afar ilaa sideed sanno, marka dhaawac yimaado, ciqaabta la saari doonaa waa xabsi (96 pc) alaba ilaa lix sanno.

**Qod. 422**
**Uur ku dilista sabab u ah sharaf**

Marka mid ka mid ah qodobada ku xusan 418,419,420, iyo 421 la galo iyadoo loo jeedo ula jeedada dhowrista qof sharaftii ama mida qaraabo dhowr ciqaabta u qoondaysan taas waxa la dhimi doonaa nus ama laba daloolow saddex dalool.

**Qod. 423**
**Abuuris xaalad madhalaysi**

1. Qof kasta oo ku fala dambi qof kale dhedig ama lab oo ka dambe raali ka yahay si toosna dembiga uga qayb qaatay, waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) lix bilood ilaa laba sanno iyo ganaax (97 Pc) 1,000 ilaa 5,000 Sh. So.

2. Qof kasta oo xaaldan ku qira naftiisa, waxaa lagu qaadi doonaa ciqaabi mid taas la mid ah.

**Qod. 424**
**Xaaladaha cuslaynta iyo ciqaabaha la socda**

Muwaadin (4 Pc) ama shisheeye ku nool gayiga qaranka (4 Pc) oo wakhtig adagaalka (237 Pc) iyo marka laga reebo xaaladaha ku xusan Qod. 191, la ganacsadda xataa si dadban dadka qaranka cadowga (185 Pc), mar kasta oo ay wada nool yihiin ama, la gala dad kale oo ku nool gayiga cadowga qarnka (185 Pc), waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc), laba iyo toban sanno iyo ganaax (97 Pc) u dhigma shan laba laab qiimihii badeecadda iyo xaalad kale oo kasta, aan ka ayrayn 10,000 oo Somali shilin.

## CINWAANKA 11AAD
Dambiyada ku lidka ah qoyska

### Cutubka 1aad
Dambiyada ku lidka ah akhlaaqda yo dhowrsanaanta qoyska

### Qod. 425
### Guurka sharci dharrada ah

Cid kasta oo heshiisa guur (31 Const) marka la eego xaaladiisa qofnimo (30 Const) aan guurkaas ogolaan, waxa lagu ciqaabi xabsi (96 pc) lix bilood ilaa saddex sanno.

### Qod. 426
### Sinada

1. Cid kasta oo ku xiran guur saamayn rayid leh (30,31 Const) u galmooda (398 Pc) kuwa aan ahayn kuwo sharciyaysan waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) laba sanno ciqaab la mid ah ayaa la saari doonaa ka la wadaagay xumaanta (71 Pc).

2. Ciqaabta waxa geli doona markay dacwadu ka timaado dhinaca dhibanaha (81 Pc).

### Qod. 427
### U galmoodka dadka xigtada aan la guursan karin

1. Qofka u galmooda qof kale oo mamnuuc ka ha inay is guursadaan xaalado, shakhsiyadeed (30 Const) waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) laba ilaa shan sanno.

2. Ciqaabta waa la kordhin doonaa (118 Pc) xaaladaha xigtada xidhiidhka dhow

### Cutubka 2aad
Dembiyada ku lidka ah xidhiidhka qoyska

### Qod. 428
### Masixida ama cag saarka diiwaangelinta dhalasho

1. Cid kasta oo sababaysa in ay galiyaan diiwaanada rayidka ah ee qaranka dhalasho aan dhicin waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 pc) hal sanno ilaa shan sano.

2. Cid kasta oo qarisa ilmo dhashay is hortaagta in la galiyo diiwaanka rayidka waxa lagu ciqaabi doonaa ganaax ilaa (100) sh. Som

### Qod. 429
### Beddelid diiwaangelin dhalasho

1. Cid kasta oo isku bedesha ilmo caruur ah oo dhashay ama bedesha diiwaan galinta iyada ku saabsan waxa lagu ciqaabi xabsi (96 pc) lix bilood ilaa hal sanno. Muddo xabsi (96 pc) lix bilood ilaa laba sanno.

2. Muddo xabsi (96 Pc) lix bilood ilaa laba sanno ayaa la saari doonaa qof kasta oo qoraya shahaado qof dhashay bedela gelinta diiwaan ra'yidka ee ku saabsan ilmo cusub oo dhashay nooc kasta oo shahaado bixin been ah ama cadaymo been ah.

**Cutubka 3aad**

Dambiyada lidka ku ah taakulaynta qoyska

**Qod. 430**
**Xadgudub lid ku ah taakulaynta qoyska**

1. Cid kasta oo barbar marta waajibaadka la xidhiidha qabashada awooda masuuliyada waalid, waalidnimada cadaaladeed ama guurka (31 Const), waxa lagu ciqaabi doonaa marka falku uu yahay mid aandenbiculus keenayn (65 Pc) xabsi (96 Pc) hal sano iyo ganaax (1000) ilaa (10000) sh. Som.

2. Ciqaab la mid ah ayaa loo cuskan doonaa qofka si xun u isticmaala ama musrifa saamiga uu leeyahay ilmo yar ama qof gacanta lagu hayo.

**Qod. 431**
**Meel kadhaca tallaabooyinka wax sixidda ama asluubta**

1. Qof kasta oo meel kaga dhaca tallaabooyinka sixida ama dhishbiliinka ee waxyeelaynaya qof hoos yimaada masuuliyadiisa ama lagu aaminay isaga ula jeedo wax barasho, amar siin daawayn maamulid ama xafidaad, ama wax qabasho aqooneed ama farsamo waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) ilaa lix bilood marka uu falku keeno khatar cudur jidh ama maskaxeed.

2. Marka falku keeno waxyeelo (440 Pc) ciqaabta ku xusan Qod. (440) hoos ayaa loo dhigi doonaa saddex daloolow hal dalool marka dhimasho timaado ciqaabtu waa xabsi (96 Pc) saddex ilaa sided sanno.

**Qod. 432**
**Si xun ula macaamilka carruurta iyo xubanaha qoyska**

1. Cid kasta oo aan ahayn kuwa ku xusan Qod. hore si xun u dhaqda xubnaha qoyska (31 Const) ama qof ka yar 14 sanno, ama qof uu masuul ka yahay ama qof lagu aaminay ula jeedo wax barasho, amar siin, daawayn, maamulid, ama xafidaad, ama qabasho xirfad ama farsamo, waa lagu ciqaabi doonaa xabsi (96 Pc) sannad ilaa shan sanno.

2. Marka falku keeno waxyeelo khatar ah (440 Pc) ciqaabtu waa xabsi (96 Pc), laba ilaa sided sanno, marka dhimasho timaado (441 Pc) ciqaabtu waa xabsi (96 Pc) toban iyo shan iyo toban sanno.

**Qod. 433**
**Xoog ku qaadashada dad aan lahayn awood**

1. Qof kasta oo xoog ku qaata qof 14 sanno ka yar, ama qof maskax ahaan aan dhamayn kana qaata waalid qabta masuuliyad waalidnimo, ama xanaaneeye ama mid lagu aaminay, ama xayira qofkaas si ku lid ah rabitaanka dad aynu soo sheegnay waa la ciqaabi doonaa raalista dacwada waalidka qabanaya masuuliyada waalidnimo, ilaaliyaha ama lagu aaminaha, xabsi (96 Pc) hal sano ilaa saddex sanno.

2. Cid kastoo afduubta ama xayirta qof yar oo 14 jir gaadhay si aanu ogolayn qofka yar, ula jeedada aanay ahayn kalgacayl ama.

   a) Doorinta ama qalabka kale ee lagu garogortami karo ciqaabta ka sokow ku xusan Qod. 378 ee ka been sheegida hawlaha gaar ahaaneed ciqaabaha midba teeda loo qeexay ee faqrada koowaad ee Qod. 360, 270.
   b) Xaaladaha been abuurista lacag ama doorinteeda ee ka mida dhokumentiga hore u soo sheegnay qofkii ka faaidaysta ee haddana ka qayb qaadan wuxuu mudan doonaa ciqaabta ku xusan Qod. 378 isticmaal dhukumanti dadweyne oo been ah.

## CINWAANKA 12AAD

Dembiyada lidka ku ah Qofka

### Cutubka 1aad

Dembiyada lidka ku ah nolosha iyo amaanka qofka

#### Qod. 434
#### Dilka

Qofkii geysta geeri waxaa lagu ciqaabayaa dil (Qod.163 Dast., 94 XC).

#### Qod. 435
#### Dilka caruurta sharaf darteed

1. Qofkii geysta geerida ubad in yar ka dib markuu dhasho, ama ubad uurka ku jira inta fooshu socoto, si uu u badbaadiyo sharafkiisa, ama sharafka qof ka farcamay ama uu isagu ka farcamo, waxaa lagu ciqaabayaa xarig (qod.96 XC) u dhexeeya toban ilaa shan iyo toban sano.

2. Isla ciqaabta waxaa lagu qaadayaa qofkii la galay dembigaa.

#### Qod. 436
#### Dilka qof raalli ka ah

1. Qofkii geysta dilka qof kale oo raalli ah, waxaa lagu ciqaabayaa xarig u dhexeeya lix ilaa Shan iyo toban sano.

2. Waxaa lagu ciqaabayaa dil (Qod.163 Dast. 94 XC), haddii falkaa la geystay uu lid ku yahay:

   a) Qof da'diisu ka yar tahay siddeed iyo toban sano.
   b) Qof dhimirka la'.
   c) Qof raallinimada uu qofka dembiga geysta uga helay adeegsi xoog, handadaad ama maskax ka gelin ama uu ku helay khiyaano.

#### Qod. 437
#### Isku day is daldalid

Qofkii isku daya inuu is dilo isagoo isku sameeyay fal keeni kara dhimashadiisa, waxaa lagu ciqabayaa xarig (qod. 96 XC) ilaa shan sano ama ganaax ilaa Sh.So. 10,000.

## Qod. 438
## ku dhiirrin ama ku kaalmeyn is daldalid

1. Qofkii ku dhiirriya ama ku kaalmeeya qof kale inuu is dilo, waxaa lagu ciqaabayaa, hadduu is dilka dhaqan galo, xarig (qod. 96 XC) u dhexeeya shan ilaa toban sano. Hadduusan is dilku suuragelin, waxaa lagu ciqabayaa xarig (qod. 96 XC) u dhexeeya hal ilaa shan sano, hadduu isku daygaasi ka yimaado dhaawac culus ama halis ah (4402, 4403 XC).

2. Ciqaabaha waa la kordhinayaa (118 XC) hadduu qof la dhiirri geliyay ama lagu kaalmeeyay uu ku sugan yahay xaaladaha ku xusan faqradaha (a) iyo (b) ee Qod. 436. Hase yeeshee hadduu qofkaasi ka yar yahay afar iyo toban sano, ama uusan awood u lahayn garasho ama rabitaan uu raallinimo ku bixiyo (qod.47 XC), waxaa lagu qaadayaa waxyaabaha uu qorayo Qod. dilka (Qod.434 XC).

## Qod. 439
## Waxyeello

1. Qokii waxyeelleeya qof kale, hadduusan falkasi ka imaan cudur jirka ama maskaxda ka gaara, waxaa lagu ciqaabayaa, hadduu codsado dhibbanaha (Qod.81 XC), xarig (Qod. 96 XC) ilaa lix bilood ah ama ganaax (qod. 97 XC) ilaa Sh. So. 3,000.

2. Faqradda hore lama dhaqan gelinayo hadduu sharcigu u ictibaarayo adeegsiga xoogga tiir curiya (Qod.20 XC) ama duruuf cusleysa (qod.39 XC) dembi kale (tus.: 484 XC); (442,4433 XC).

## Qod. 440
## Dhaawac

1. Qofkii dhaawac u geysta qof kale, uuna uga yimaado cudur jirka ama maskaxda, waxaa lagu ciqaabayaa xarig (Qod. 96 XC) u dhexeeya seddex bilood ilaa seddex sano.

2. Dhaawucu waa culus yahay, waxaana lagu qaadayaa xarig (qod. 96 XC) u dhexeeya seddex ilaa toddoba sano hadduu falka ka yimaado:

    a) Cudur halis geliya nafta dhibbanaha, ama awood laáan ka celisa inuu si caadi ah u guto hawlihiisa muddo ka badan afartan cisho;
    b) Daciifin joogto ah dareeme ama xubin;
    c) Dhibbanuhu yahay qof dumar ah oo uur leh, falkaasina uu ka yimaado dedejinta foosha.

3. Dhaawucu waa halis, waxaana lagu ciqaabayaa xarig (Qod. 96 XC) u dhexeeya lix ilaa laba iyo toban sano, hadduu falkaasi ka yimaado:

    a) Cudur la hubo ama laga yaabo in aan la daweyn karin;
    b) Hadduu gebo dareeme;
    c) Haddey xubin ka go'do ama uu gaaro dhaawac ka dhiga midaan wax tareyn, ama uu waayo isticmaalka xubin ama awoodda taranka ama uu si joogta ah u waayo ama uu ku cuslaado hadalka;
    d) Foolxumo ama dhaawac joogto ah oo wejiga ka gaara;
    e) Dhibbanaha oo dhicista.

**Qod. 441**
**Dil aan lagu tala galin**

Qof kastoo, falal si toos ah ugu gala mid ka mid ah dembiyada ku xusan qodobada 439 iyo 440 e keena dhimasho qof, waxa lagu ciqaabayaa xabsi (96 xc) u dhexeeya Toban Sano iyo Shan iyo toban Sano (24 t.x.c).

**Qod. 442**
**Dil ama dhaawac ka yimi dhinac waalid**

1. Marka mid ka mid ah dembiyada ku xusan qodobada 434, 436, 438, 440 iyo 441 ku galo qof waalid ahi qof yar oo hoos yimaada korintiisa ciqaabaha ku tilmaaman qodobbadaasi waxay isu beddelayaan sida soo socda:

   a) Ciqaabta dilka ah (94 xc) waxay isu beddeleysaa mid xabsi ah (96 xc) ee u dhaxaysa toban ilaa shan iyo toban sano.
   b) Ciqaabta xabsiga ah (96 xc) waa la khafiifinayaa saddex dalool hal dalool ilaa kala bar (one third to one half).

2. La ciqaabi mayo kan waalidka ah ee galay falka ku xusan Qod. 439 x.c.

**Qod. 443**
**Dil ama dhaawac loo galay sabab sharafee**

1. Qofka dila qof ay is-guursadeen, gabadhiisa ama walashiis, iyagoo faraha kula jira si sharci darro ah xiriir macsi samayn ah, xaalad uu ku sugan yahay caro ka timi falka loo geystay sharaftiis iyo tan qoyskiisa, waxa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c) u dhexeeya shan sano ilaa taban sano. Isla ciqaabtan, waxaa lagu qaadayaa, xaaladaha aan soo sheegnay awgood, qofka u gaysta dil qof, kasoo si sharci darro ah xiriir macsi ah la sameeyey xaaska; gabdhaha iyo walaasha kan wax diley.

2. Marka dembiiluhu galo fal dhaawac ah isagoo ku sugan isla xaaladda aan soo sheegnay iyo dadka aan soo sheegnay, ciqaabta uu dhigayo Qod. 440 x.c. waa la dhimayaa saddex dalool hal dalool; haddii dhaawacu ku yimid; sabab ka duwan qasdigii dembiilaha dilka kan loo gafey, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c.) u dhexeeya laba sano ilaa sideed sano.

3. La ciqaabi mayo, qofka isagoo ku sugan isla xaaladaha aan soo sheegnay, ku gaystay dadka aan soo sheegnay falka ku xusan Qod. 439 x.c.

**Qod. 444**
**Dirir**

1. Qof kasta oo ka qayb gala dagaal safeyn ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa hal sano ama ganaax ah (97 x.c) ilaa Sh.So 1000/=

2. Haddii dagaalka safeynka ah qof ku dhinto ama uu keeno dhaawac (439,440), ciqaabta ka qaybgalka dagaalka safeynka ah keliya, waa xabsi (96 x.c) u dhexeeya saddex bilood ilaa shan sano. Isla ciqaabtan ayaa la dabaqayaa, marka dhimashada iyo dhaawacu dhacaan isla dagaalka safeynka ah ka dib.

3. Ciqaabta ku xusan xubnaha kore waa la kordhinayaa (118 x.c) marka dagaalka safeynka ah sababta uu ka dhashay tahay mid siyaasadeed ama aargudasho ka dhexeysey labada saf.

**Qod. 445**
**Dil aan ulakac ahayn**

1. Qof kasta oo si aan ula kac ahayn (|24 x.c) u dila qof kale, waxa lagu ciqaabayaa (96 x.c) u dhexeeya lix bilood ilaa shan sano.

2. Haddii ay dhintaan dad badani amase dhimasho qof keliya dhaawac awgiis (434,440 x.c) qof ama ka badan, waxa la dabaqayaa xubinta 1aad ee Qod. 44; ciqaabtuna dhammaanteed ka badan meyso laba iyo toban sano.

**Qod. 446**
**Dhaawac aan ula kac ahayn**

1. Qof kasta o si aan ula kac ahayn (24 x.c) qof kale u dhaawaca (440 x.c) waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa saddex bilood ama ganaax (97 x.c) ah ilaa Sh.So 5000/=.

2. Marka dhaawacu yahay mid culus (440/2 x.c), ciqaabtu waxay noqoneysaa hal ilaa lix bilood ama ganaax u dhexeeya Sh.So. 2000/- ilaa sh.so. 10.000/-; marka uu aad u culus yahay dhaawacu (440/3 x.c) ciqaabta xabsigu waa saddex bilood ilaa laba sano ama ganaax ah sh.so 5000/= ilaa Sh.So 20.000/=.

3. Marka dadka dhaawacmay badan yihiin, waxaa la dabaqayaa xubinta laad ee Qod. 44; ciqaabtuna waa xabsi (96 x.c) aan ka sarrayn shan sano.

4. Marka aan dib u eegno xubinta laad ee qodobkan, eedaysanaha waxaa lagu ciqaabi karaa marka uu codsado qofka dhibanaha ahi (81 x.c; 21 x.h.c.)

**Qod. 447**
**Dhimasho ama dhaawac ka yimi dembi kale**

Marka laga saaro sida ku xusan Qod. 441, haddii fal-dambiyeed loo arko inuu yahay ula kac mid ka yimid, dhimashada ama dhaawaca qofka ee ka dhashayna aanu rabin eedaysanuhu, waxaa la dabaqayaa xaaladaha ay qeyxayan qodobada 445. 446, ciqaabtana waa la kor-dhinayaa (118 x.c).

**Qod. 448**
**Dayacid qof yar ama mid aan caqli ahaan dhammayn**

1. Qof kasta oo dayaco ama meel uga tago, qof ka yar afar iyo toban sano, amase sabab cudur maskaxeed ama jireed oo ka timi waayeelnimo ama sabab kale, ahna mid aan awood uu wax ku qabsado lahayn, una baahan ilaalin ama hela xannaannayn, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) lix bilood ilaa shan sano.

2. Isla qodobkan waxaa loo cuskanayaa qofka isagoo deggan dalka dibaddiisa dayaco qof muwaadin soomali ah (4 x.c) ee ka yar afar iyo toban sano ee lagu aaminey sabab shaqo awgeed.

3. Ciqaabtu waxay noqoneysaa xabsi ah (96 x.c) hal sano ilaa lix sano, marka falku uu ka yimaado dhaawac (440, x:c); marka dhimasho ka timaado ciqaabtu waa saddex ilaa sideed sano (441,x.c);

4. Ciqaabta waa la kordhinayaa (118 x.c) marka falka uu galo waalidka, inankiisa, ilaaliyaha (mas'uulka) ama labada is-qaba midkood amase korsade ama la-korsade.

**Qod. 449**
**Dayacid ilmo markaas dhashay sabab sharafeed darteed**

1. Qof kasta oo dayaca ama kataga ilmo yar isla markii uu dhashay ka dib si uu u ilaaliyo shartiisa ama tan asalkiisa ama faraciisa, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) saddex bilood ilaa hal sano.

2. Ciqaabtu waxay noqon kartaa xabsi (96 x.c) u dhexeeya lix bilood ilaa saddex sano, marka falka uu ka yimaado dhaawac (440. x.c) iyo shan ilaa laba iyo toban sano. Marka uu ka yimado dilka (441 xc) ilmaha markaas dhashay.

3. Dembigan looma cuskan karo duruufaha cuslaynla ee ku xusan Qod. 39.

**Qod. 450**
**Gargaar bixin la'aan**

1. Qof kasta oo hela ilmo 10 sano ka yar, qof kale ee aan awood lahayn xagga jirro maskaxeed ama jireed, waayeelnimo ama sabab kale, habaabay ama lumay, isla markaasna bixin waaya ogeysiis ah inuu la socodsiiyo madaxda sare ee maamulka, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa saddex bilood ama ganaax ah (97 x.c) ilaa sh.so. 3000/=

2. Isla ciqaabtan waxa lagu qaadayaa, qofkii hela qof meyd ah ama dhaawac ah amase khatar ku jira, isla markaasna bixin waaya ogeysiis ah inuu la socodsiiyo madaxda sare ee maamulka.
3. Marka sabab dhaqameedka dembiilaha uu ku yimaado dhaawac (440 x.c), ciqaabta waa la kordhinaayaa (118 x.c)

**Cutubka 2aad**
Dembiyada lidka ku ah sharafta

**Qod. 451**
**Aflagaaddo**

1. Qof kasta oo aflagaadeeya sharafta iyo karaamada qof kale oo jooga, hadallo ama ficillo ama qoraalo ama sawirro amase isgaarsiin taar ama teleefan si toos ah qofka ugu socda, waxaa lagu ciqaabayaa, codsiga dhibanaha (81 x.c), xabsi ah (96 x.c) ilaa hal sano ama ganaax ah (97 x.c) ilaa sh.so 1000/=

2. Ciqaabta waa la kordhinayaa ilaa laba-jibbaar:

   a) marka af-lagaadada lagu galo meel dad badni joogaan ama ay ogaadeen sida tooska ah ee wax u dheceen;
   b) marka af-lagaadada ay jirto sabab loo aaneyo oo ah fal cad;

c) marka af-lagaadadu ku jeeddo xataa jinsiyadda (nationality), bulsho dhaqankeed ama qoyska qofka la af-lagaadeeyey;
d) marka af-lagaadada lagu galay hadallo, falal, qoraallo, sawirro amase isgaarsiinta si waafaqsan caadada bulshadu noqoneyso kicin toos ah ee dhinaca dhibanaha ama leh dabeecad culus ee u gaar ah.

3. Dembigan waxaa dhaqaajin kara xafiiska (81 x.c), marka loo celiyo mid ka mid ah duruufaha ku xusan xarfaha j) iyo x) ee xubinta 2aad ee isla qodobkan

4. Marka ay af-lagaadadu y tahay wax laysdhaafsaday, garsooruhu wuxuu caddayn karaa in aan la ciqaabin mid ama labada is af-lagaadeeyey, xataa haddii codsiga dacwadda midkood soo jeediyey (197; 199 x.h.c.).

**Qod. 452**
**Sumcad dilid**

1. Qof kasta oo marka laga reebo xaaladaha loo celiyo Qod. hore, u sheega ama gaarsiiya dad badan, sumcad dhaawicid qof kale, waxaa lagu ciqaabayaa, codsiga dhibbanaha (81 x.c), xabsi ah (96 x.c) ilaa hal sano ama ganaax ah (97 x.c) ilaa sh.so 2000/=

2. Ciqaabta waa la kordhinayaa ilaa laba-jibbaar, marka loo noqdo xaaladaha ku xusan xarfaha t), j) iyo x) ee xubinta 2aad ee Qod. kore.

3. Ciqaabta waxay noqonaysaa xabsi ah (96 x.c) lix bilood ilaa saddex sano ama ganaax 7 x.c.) aan ka yarayn sh.so 4000/=, marka sumcad dhaawicidda loo adeegsado jaraa'idka ama waxyaabaha kale ee war-baahinta.

**Qod. 453**
**Caddaynta runta ah**

1. Marka loo eego aragtida ku xusan qodobada 451 iyo 452, haddii af-lagaadada ay jirto sabab loo aaneeyo fal cad, qofka galayna ku caddeeyo arji inta aan la bilaabin doodda dacwadda, kuna qira runta (103 x.h.c.).

2. Caddaynta runta ah ee dhinaca falka sameeyey mar kasta waa la aqbalayaa, marka:

   a. marka qofka wax af-lagaadeeyey yahay sarkaal guud (240 x.c) iyo falka oo loo aaneeyo la xiriiridda waajibaadka shaqadiisa;
   b. marka falka loo aaneeyo qofka loo gafey in uu yahay mid aan dacwadiisa dhammaanin ama ay bilaabato dooddu ama anshax-marin isaga lid ku ah.

3. Marka ay caddaato runta falka loo aaneeyey af-lagaadada, la ciqaabimaayo qofka falka galay.

**Qod. 454**
**Ka xanaajin**

La ciqaabimaayo qofkii gala mid ka mid ah falalka ku xusan qodobada 451 iyo 452 xaalad uu ku sugan yahay xanaaq ka yimi fal sharci darro ah oo qof kale ku sameeyey ee isla markaaba dhacay.

**Cutubka 3aad**
Dembiyada lidka ku ah xorriyadd gaar ahaaneed ee qofka

**Qaybta 1aad**
Dembiyada lidka ku ah qofka shakhsiyaddiisa aadane

**Qod. 455**
**Hoos-u dhigga addoonsi awgiisa**

Qof kasta oo hoos-u-dhiga qof kale addoonsi awgiis ama xaalad la mid ah xagga addoonsiga, waxa lagu ciqaabayaa shan sano ilaa labaatan sano.

**Qod. 456**
**Macaamil ganacsi addoomeed**

Qof kasta oo gala macamil ganacsi addomeed, ama qof ku sugan xaalad la mid ah addonsi. Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) shan sano ilaa labaatan sano.

**Qod. 457**
**Takoorid iyo ka ganacsi addoon**

Marka laga yimaado xaaladaha uu tilmaamay Qod. hore, qof kasta oo iibsada ama la wareega qof ku sugan xaalad addonimo ama xaalad la mid ah amase haysta ama gata ma ku qabsada xaaladdaas, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) saddex ilaa laba iyo toban sano.

**Qod. 458**
**Ku-khasbid addoonimo**

Qof kasta ee ku khasba qof kale inuu isu dhiibo awooddiisa, si uu u dhimo dhammaan xaaladdiisa dadnimo, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c.) shan ilaa shan iyo toban sano.

**Qod. 459**
**Dembiyada lagu galo dibadda**

Iyadoo laga reebay arrimaha Qod. 8, ayaa qodobbada Qaybtan loo cuskanayaa xataa marka falkan addonsiga lagu galo dibadda (4 x.c), iyadoo uu ku xiran yahay shardi keliya in dembiilaha lagu helo dhulka dowladda bilowga doodda dacwadda ciqaabta ah.

**Qaybta 2aad**
Dembiyada lidka ku ah xorriyadda shakhsiga ah

**Qod. 460**
**Xirasho ama haysasho qof**

Qof kasta oo ka qaada xorriyadda shakhsiyaadeed ee qof kale, waxa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) lix bilood ilaa siddeed sano.

**Qod. 461**
**Xarig sharci darro ah**

Sarkaalka guud (240 x.c) ee fuliya xarig ka soo horjeeda sida xeerkani qabo, amase aqbala in qof la xabiso amar la'aan madaxda awoodda u leh ama dheereeya fulinta ciqaabeed (90 x.c) ama tallaabo nabadgelyo oo xarig ah (172 x.c), waxaa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c) ilaa saddex sano.

**Qod. 462**
**Xad-gudub awooda xafiis oo lid ku ah kuwa xiran ama xabsiga lagu hayo.**

1. Sarkaalka guud (240 x.c) ee ku sameeya tallaabooyin aan xeerka waafaqsanayn qof xiran ama xabsiga lagu hayo, kaasoo ilaalintiisu haba ahaatee mid muddo gaban loo dhiibey ama lagu aaminey isaga fulin amar madax awood u leh, waxaa lagu ciqaabi xabsi ah (96 x.c) ilaa saddex sano.

2. Isla ciqaabtan waxaa loo cuskanayaa, haddii uu falkan galo sarkaal guud oo kale oo huwan sabab xafiiskiisa iyo mid kasta madaxda qofka ilaalisa

**Qod. 463**
**Fitishid shakhsi ahaaneed ee go'aan aan sabab lahayn**

Sarkaalka guud (240 x.c) ee ku xad-gudba awoodaha ku xiran hawshiisa, fuliya fitishaad shakhsiyadeed, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa hal sano.

**Qaybta 3aad**
Dembiyada lidka ku ah xorriyadda shaqada

**Qod. 464**
**Shaqada khasabka ah**

Marka laga reebo in aan falku ku dhisnayn dembi aad u culus, qofka si xoog ah ugu qabta dad kale shaqo khasah ah, ama ugu faa'iidaysta isagu shaqaale shaqo khasab ah qabtay, marka lagu reebo xaaladaha ciidanku u baahan yahay ma bulshada (civile) ama xukun ciqaabeed caddeeyey sida xeerku tilmaamay, waxa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c) u dhexeeya lix bilood ilaa shan sano iyo ganaax (96 x.c) u dhexeeya sh.so. 5000/= ilaa sh.so. 20.000/=.

**Qod. 465**
**Xad-xadgudub xooriyadda heshiiyada dadka shaqeeya ama ururka shaqaalaha**

1. Qof kasta oo isticmaala xoog ama hanjabaad si uu ugu khasbo loo shaqeeye ka mas'uul ah qof ama ka badan oo shaqaale ah ama is hortaaga isagoo soo jiidanaya iyaga, waxa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c) ilaa afar sano iyo ganaax ah ( 97 x.c) ilaa sh.so 10,000/=

2. Isla ciqaabtan, waxaa loo cuskanayaa qof kasta oo isticmaala xoog ama hanjabaad si uu ugu khasbo qof ama ka badan ka qayb galid Urur shaqaale ama is hor taaga ka qayb galkiisa.

**Qaybta 4aad**

Dembiyada lidka ku ah xoriyadda niyadda (moral)

**Qod. 466**

**Xad-gudub gaar ahaaneed**

Qof kasta oo si xoog ah ama hanjabaad ah ku khasba dad kale in ay sameeyaan ama ka tagaan falal marka xeerka loo eego isaga rabitaankiisa ah, waxaa lagu ciqaabayaa, marka falalku aanay ku dhisnayn dembi culus, xabsi ah (96 x.c) ilaa saddex sano.

**Qod. 467**

**Xoog ama hanjabaad si loo khasbo gelid dembi**

1. Qof kasta oo ku handada dad kale dhibaato sharci darro ah, waxaa lagu ciqaabayaa, marka uu codsado qofka dhibanaha ahi (81 x.c), ganaax ah (97 x.c) ilaa so.sh. 500/=

2. Haddii handadaaddu culus tahay ama lagu sameeyo hab ka mid ah kuwa uu tilmaamayo Qod. 266, ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi ah (96 x.c) ilaa hal sano, waxaana dacwadda dhaqaajinaya xafiiska (81 x.c).

**Qod. 468**

**Cagajuglayn**

1. Qof kasta oo ku handada dad kale dhibaato sharci darro ah, waxaa lagu ciqaabayaa, markuu codsado qofka dhibbanaha ahi (81 x.c), ganaax ah (97 x.c) ilaa sh.so 500/=

2. Haddu hanjabaadu culus tahay ama lagu sameeyo mid ka mid ah hababka ku tilmaaman Qod. 266, ciqaabtu waa xabsi ah (97 x.c) ilaa hal sano, waxaana dhaqaajinaya xafiiska (81 x.c)

**Qod. 469**

**Sabab maskaxdoorin ku timi si cunfi ah**

1. Qof kasta oo isagoo isticmaaliya ra'yi maskaxdoorin ama maamulis waxyaabaha laga sameeyo alkoolka (417 x.c) ama maandooriyaasha kale (56 x.c) ama seexiya ama habkastoo kale oo la mid ah isagoo aan raali ahayn, sabab awood la'aan rabitaankiisa (47 x.c), waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa hal sano.

2. Rabitaanka qofku bixiyo marka loo celiyo xubinta labaad ee Qod. 436 ma cafiyayso ciqaabta qofka.

3. Ciqaabtu waa xabsi ah (96 x.c) ilaa shan sano:

   a) marka uu sameeyo sabab keenta gelid dembi culus (15 x.c);
   b) marka qofka dhibanaha ah laga dhigay awood la'aan maskaxeed uu xaaladaas galo, fal xagga xeerka ku ah dembi (15 x.c).

**Qaybta 5aad**

Dembiyada lidka ku ah xurmaynta hoyga

**Qod. 470**
**Guri dadow u dhicid**

1. Qof kasta oo gala hoy ama guri cid kale ama meel kale oo gaar loo dagan yahay; si ka soo horjeeda rabitaanka qofka xaqa u leh amase ku gala si qarsoodi ah ama dhagar ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa seddex sano.

2. Isla ciqaabtan waxaa loo cuskanayaa qofka joogsada si liddi ku ah rabitaanka meelaha si cad u ah xaq gaar ahaaneed ee qof, amase u joogsada si qarsoodi ah ama dhagar ah.

3. Ciqaabtu dhaqaaqi mayso ilaa uu codsado dhinaca dhibanuhu (81 x.c).

4. Ciqaabtu waa xabsi (96 x.c) u dhexeeya hal sano ilaa shan sano, iyo dhaqaajinta xafiiska (81 x.c) marka lagu galo xagga alaabta iyo dadka amase marka dambiiluhu u hubaysan yahay si ku tala gal ah (541 x.

**Qod. 471**
**Xad-gudub hoy ee uu galay sarkaal guud**

1. Sarkaalka guud (240 X.C) oo isagu ku xad gudba awoodaha la xiriira howlahiisa gala ama joogsada meelaha uu tilmaamayo Qod. hore, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi (96 X.C) u dhexeeya hal sano ilaa shan sano.

2. Marka Xad-gudubka ku kooban yahay gelitaanka meelaha la soo sheegay iyadoo aan la dhowrin habka Xeerku u dajay, ciqaabtu waa xabsi (96 X.C) ah ilaa hal sano.

**Qaybta 6aad**
Dembiyada lidka ku ah xorriyadda asraarta

**Qod. 472**
**Xad gudubka xiriirka warqadaha qarintooda, baabi'intooda iyo kashifiddooda**

1. Qof kasta oo qaata warqad xiran oo aan isaga ku socon, amase qariya amase qof kale u fura si uu hubsado waxa ku qoran. amase baabi'iya dhammaanteed ama qayb ka mid ah, waxaa lagu ciqaabayaa. marka aan falka loo arag dembi qodob xeer kale oo qawaaniinta ka mid ah, xabsi ah (96 X.C) ilaa hal sano iyo ganaax dhan sh.so.300/- ilaa sh.so.5000/=.

2. Marka dembiilahu, sabab aan la garaysan karin, u kashifo dhammaan ama qayb waxa ku qoran warqadda, waxa lagu ciqaabayaa, marka waxyeelada natiijada ee falka ka yimid iyo falkuba aaney keenin dembi culus, xabsi ah (96 X.C) ilaa saddex sano.

3. Ciqaabta dembigani, waxay ku xiran tahay codsiga dhibbanaha (81 X.C).

4. Sida ku xusan qodobbada Qaybahan, "warqadaha ama war isdhaafsiga" waxaa lagu wadaa warqadaha la isu tebiyo, hadalka taararka ama taleefannada.

**Qod. 473**
**Dhagarta hubinta, dhexgalka xiriirka wada hadalka.**
**Taararka, telefoonada iyo qoraallada**

1. Qof kasta oo si dhagari ku jirto u akhriyo taar oo aan isaga u socon, amase dhegeysta xiriir wada hadal ee dad kale dhexdood, amase dhexgala ama joojiya, waxa lagu ciqaabayaa ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so.100/- ilaa Sh.So.3000/=.

2. Marka dembiiluhu, sabab aan la garaysan karin u kashifo dhammaan ama qayb ka mid ah nuxurka isgaarsiinta ama waxa lagu wada hadlay, waxaa lagu ciqaabayaa, marka falka ay ka dhalato natiijo waxyeello ah, xabsi ah (96 x.c) ilaa saddex sano.

3. Ciqaabta dembigani, waxay ku xiran tahay codsiga qofka dhibanaha ah (81 x.c).

**Qod. 474**
**Kashifidda nuxurka waxa la isu diray**

1. Qof kasta, marka laga reebo xaaladaha ku xusan qodobkan 472, u qaata si sharci darro ah waxa la isu diro oo aan isaga u socon, si uu u hubiyo nuxurka loogu talo galay oo sir ah, kashifa dhammaan ama qayb ka mid ah sabab si aan la garaysan karin, waxa lagu ciqaabayaa, marka falka ay ka timaado natiijo waxyeello ah, xabsi ah, (96 x.c) ilaa lix bilood ama ganaax (97 x.c) u dhaxeeya.sh.so. 1000/-ilaa sh.so.5000/=.

2. Ciqaabta dembigaani, waxay ku timaaddaa marka uu codsado dhibanuhu (83 X.C).

**Qod. 475**
**Xad-gudub ama qarin waxyaabaha la isu diro ee uu galay**
**Qof ka shaqeeya boostada, goobta taararka ama telefonnada**

1. Qof ka shaqeeya goobaha boostada, taararka ama taleefanada ee isagoo ku xadgudbaya hawlihiisa (240 X.C), gala mid ka mid ah falalka ku xusan faqradda 1aad ee qod. 472, waxa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 X.C) lix bilood ilaa saddex sano.

2. Marka dembiiluhu, sabab aan la garaysan karin, u kashifo dhammaan ama qayb nuxurka warqadaha ama warka la isu diray, waxa lagu ciqaabayaa, haddii aanu falku kudhisnayn dembi culus, xabsi (96 x.c) u dhaxeeya lix bilood ilaa shan sano iyo ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so.300/- ilaa Sh.So.5000/=.

**Qod. 476**
**Kashifaadda nuxurka waxa la isu diro ee uu galo**
**qofka leh shaqada boostada, taararka ama taleefannada.**

Qof leh shaqada boostada, taararka ama taleefannada ee bixiya war ku saabsan warqad furan ama war is-garansiin taar ama taleefan, u kashifa sabab aan la garaysan karin cidda aan khuseeynin, amase qof kale oo aan ahayn kuwa wax loo diray ama wada hadlaya soo dhex-galo, waxa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c) u dhaxeeya lix bilood ilaa saddex sano.

**Qod. 477**
**Kashifid nuxur qoraallo sir ah.**

1. Qof kasta oo si sharci darro ah u hela nuxur war la rabay inuu sir ahaado, waraaqo ama documenti guud ama gaar ahaaneed, ahayna wax la isu diray, kashifa sabab aan la garaysan karin, amase ka faa'iidaysta isagu ama cid kale uga faa'ideeya, waxa lagu ciqaabayaa, marka falalka waxyeello ka timaado, xabsi (96 x.c) ilaa saddex sano ah ama ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so.1000/- ilaa sh.so. 10.000/=.

2. Ciqaabta dembigan waxaa codsanaya qofka dhibanaha ah (81 x.c; 21 x.h.c.).

**Qod. 478**
**Kashifid sir xirfadeed.**

Qof kasta oo si sharci darro ah, u qaata war sir ah, sabab la xiriirta xaaladdiisa ama tan xafiiskiisa ama xirfadiisa farsamo, kashifa sabab aan daw ahayn ama uga faa'ideeya kan uu u shaqeeyo ama qof kale, waxaa lagu ciqaabayaa, marka natiijada falka waxyeello ka timaado, xabsi ah (96 x.c) ilaa hal sano ama ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so.300/-ilaa sh.so.5000/=.

**Qod. 479**
**Kashifaadda sir cilmiyeed ama warshadeed.**

1. Qof kasta oo si aan sharci ahayn ku qaata sabab ah xaaladdiisa ama xafiiskiisa ama xirfaddiisa farsamo awgeed, xog loogu talo galay inay sir ahaato ee la xariirta soo saarid ama hindisaad cilmi ama qalab farsamo ee warshadeed, kashifa ama u isticmaala si isaga faa'iido u leh ama cid kale, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c) ilaa laba sano.

2. Ciqaabta dembigan waxaa lagu dhaqaajin karaa codsiga qofka dhibbanaha ah.

**CINWAANKA 8AAD**
Dembiyada lidka ku ah hantida.

**Cutubka 1aad**
Dembiyada lidka ku ah hantida oo xoog lagu galo.

**Qod. 480**
**Xatooyo**

1. Qof kasta oo si sharci darro ah ku qaata shey guurto ah ee qof kale leeyahay, si uu uga faa'ideeysto isagu ama cid kale, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa saddex sano iyo ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so.300- ilaa sh.so.5000/-.

2. Xeerka ciqaabtu waxa uu u tixgalinayaa shey guurto ah xataa tamarta korantada iyo tamar kastoo leh qiime dhaqaale.

**Qod. 481**
**Duruufaha cuslaysiinta.**

1. Arrimaha ku xusan Qod. kore, ciqaabtu waxay noqoneeysaa xabsi ah (96 x.c) hal ilaa lix sano iyo ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so 1000/- ilaa sh.so. 10.000/=:

a) marka dembiiluhu si uu falka u galo, ku haro dhisme ama meel kale oo loogu talo galay hoy ahaan (470 x.c);
b) marka dembiiluhu uu isticmaalo xoog xagga sheyga ama uu sameeyo isagu hab ka mid ah sifaha wax lagu dhaqro;
c) marka dembiiluhu hub sito (541 x.c) ama uu ka mid yahay kuwa isticmaala maandooriyaasha, xataa hadduusan isticmaalin;
d) marka falka uu ku galo, inuu ka dafo gacanta qofka sheyga watey ama korkiisa ka dafo amase uu ka jeexo;
e) marka falka ay galaan saddex qof ama ka badan, amase xataa hal qof oo is qaab-baddalay, ama isu ekaysiiyo sarkaal guud (240 x.c) ama qof haya xil adeeg guud (240/t x.c);
f) marka falka lagu galo boorsooyinka dadka safra oo laga dhex helo nooc kasta ee gawaarida, goobaha gaadiidka laga raaco ama garoomada diyaaradaha ama deked markab, hoteelada ama meelaha kale ee cuntada ama cabitaanka;
g) marka falka lagu galay hanti ay leeyihiin xafiisyada ama meelaha lagu hayo shaqooyinka muhiimka ah ee bulshada ama shey kasta oo guurto ah oo xaalad qafaalo ama lala waregay ama daaha laga qaado sabab baahi ama caado ama kalsooni guud ama hawl guud ama adeeg shaqo guud, ama difaac ama cibaado;
h) marka falka lagu galo, saddex ama ka badan oo neef oo xoolo ah oo isku hal meesi ah, lo' ama gammaan ama geel, amase xoolo kale, yeyanba ahaan hal meesi.

2. Marka ay kulmaan laba durufood ama ka badan ee ah kuwa ku cad xubinta hore ee qodobkan, amase la kulanto mid ka mid ah kuwa xusan Qod. 39, ciqaabtu waxay noqoneeysaa xabsi (96 x.c) u dhaxeeysa saddex sano ilaa toban sano iyo ganaax (97 x.c) u dhaxeeysa sh.so. 2000/- ilaa sh.so. 15.000/=.

**Qod. 482**
**Ciqaabta xatooyo ee ku timaada codsiga dhibanaha.**

1. Marka loo noqdo Qod. 480, waxaa la cuskanayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa hal sano ama ganaax ah (97 x.c) ilaa sh.so.2000/=, haddii ciqaabta dembiga lagu dhaqaajiyo codsiga dhibanaha(81 x.c):
   a) marka eedaysanuhu falka u galay keliya ujeedo isticmaalid muddo sheyga guurtada ah ee uu qaatay, ka dibna celiyo si deg deg ah;
   b) marka falku yahay qaadasho wax yar oo aan qiima badan lahayn, oo loo sameeyay baahi halis ah markaa jirtay.
   c) Marka uu falku yahay dalag aruursasho, caws ama bal ka gurasho beer dad kale ee aan weli dhamaanteed la gurin mirihii.

2. Xaaladahan loo cuskan maayo, haddey wada kulmaan duruufaha ku tilmaaman xarfaha (b), (t), (j) iyo (x) ee xubinta 1aad ee Qod. 481 (25 x.h.c.).

**Qod. 483**
**Xadid shey la wadaago**

1. Kan wax la leh, kan xubin ka ah sharikad ama urur ama kan dhaxal wax ku leh oo isaga ama cid kale si ay faa'iido uga hesho, si sharci darro ah uga qaata qofkii hayay shey guurto ah oo la wadaago, waxa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa laba sano ama ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so.1000/- ilaa sh.so. 10.000/=.

2. La ciqaabimayo qofkii falka ku gala shey guurto ah ee la baddeli karo, marka qiimihiisa aanu ka badnayn saamiga qofkaas.

**Qod. 484**
**Dhac**

1. Qof kasta oo si uu u helo faa'iido sharci darro ah, adeegsada xoog (cunfi) ama hanjabaad lid ku ah qof, ka qaata shey guurto ah, waxa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) saddex sano ilaa toban sano iyo ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so.5000/- ilaa sh.so.20.000/=.

2. Isla ciqaabtan mid la mid ah, waxa lagu ciqaabayaa, qofkii isticmaala xooga ama hanjabaada isla markii la qaatay sheyga guurtada ah, xafida ama haya amarkiisa ama amar cid kale si uu uga hortago ciqaabta.

3. Ciqaabta waxaa la kordhinayaa saddex meelood hal ilaa kala bar:

   a) marka xoogga iyo hanjabada lagu galo hub (541 x.c) ama qofku isku sameeyo is-beddel dhagar leh ama dad badan oo is urursaday;
   b) marka xoogga (cunfiga) lagu sameeyo qofku uu lumiyo garaadkiisa iyo rabitaankiisa (47 x.c).

**Qod. 485**
**Khasbid ama baadid**

1. Qof kasta oo isagoo adeegsanaya xoog iyo hanjabaad, si uu qof ugu khasbo in uu sameeyo ama ka tago wax uun, si uu u helo faa'iido sharci darro ah isagu ama cid kale ee dhibaysa dad kale, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c) u dhaxeeysa saddex sano ilaa toban sano iyo ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so.5000/= ilaa sh.so.20.000/=.

2. Ciqaabta waa la kordhinayaa saddex meelood hal ilaa kala bar, marka ay wada .kulmaan mid ka mid ah duruufana ku tilmaaman xubinta dambe ee Qod. hore.

**Qod. 456**
**Afduubasho qof si wax loo dhaco ama handadaad wax lagu helo.**

1. Qof kasta oo xirta qof, ula jeeddo si uu u helo faa'iido sharci darro ah isaga ama cid kale oo ah qiimaha siideeynta qofka, waxa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c) u dhaxeeya siddeed sano ilaa shan iyo toban sano iyo ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so. 10.000/- ilaa sh.so.20.000/=.

2. Ciqaabtu waa xabsi (96 x.c) u dhaxeeya laba iyo toban sano ilaa siddeed iyo toban sano, marka dembiiluhu gaaro ujeedadiisa.

**Qod. 487**
**Hanti dad la wareegid**

Qof kasta oo si uu u milkiyo dhamaan ama qayb hanti maguurto ah ee dad kale, ka qaada ama wax ka beddelo soohdimeheeda, waxa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa saddex sano iyo ganaax ah (97 x.c) ilaa sh.so. 10.000/=.

## Qod. 488
## Leexinta biyaha iyo beddelidda muuqaalka meelo.

Qof kasta oo si uu u helo isagu ama cid kale faa'iido aan sharci ahayn, leexiyaa biyo la wada leeyahay ama gaar loo leeyahay, amase wax ka beddela muuqaalka meelo cid kale leedahay, waxa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c) ah ilaa saddex sano iyo ganaax ah (97 x.c) ilaa sh.so. 10.000/=.

## Qod. 489
## Qabsasho dhul ama dhismayaal.

1. Qof kasta oo si aan xeerka waafaqsanayn u qabsado dhul ama dhismayaal cid kale leedahay si guud ama gaar ahaaneed, ula jeedada qabsashadiina tahay si uu uga helo faa'iido, waxa lagu ciqaabayaa, marka uu codsado qofka dhibanaha ahi (81 x.c) xabsi ah (96 x.c) ilaa labo sano ama ganaax (97 x.c) u dhexeeya sh.so.l 000/- laa sh.so. 10.000/=.

2. Ciqaabta waa la isugu darayaa (xabsiga iyo ganaaxa), dacwadana waxaa dhaqaajinaya xafiiska, marka falka ay galaan shan qof ka badan oo midkood hubaysan yahay, amase toban qof ka badan, xataa yeyan hubaysnaane (541 x.c).

## Qod. 490
## Arbushaad xoog leh ku qabsasho hanti maguurto ah.

1. Qof kasta oo marka laga reebo xaaladaha ku xusan qodobkan kore, arbusha si xoog ah ama handadaad ah, hanti maguurto ah ee dad kale si nabad ah ku haystaan, waxa lagu ciqaabayaa xabsi ah (96 x.c) ilaa laba sano iyo ganaax (97xc) u dhaxeeya sh.so. 1000/-ilaa sh.so.3000./=.
2. Falkan waxaa loo tixgalinayaa in xoog (cunfi) ama hanjabaad lagu galo, marka ay galaan toban qof ka badan.

## Qod. 491
## Dhibaatayn hanti

1. Qof kasta oo burburiya, kala fardhiya ama ka yeela dhamaanteed ama qaybteed wax aan nafac lahayn hanti shey guurto ah ama maguurto ah ee dad kale, waxaa lagu ciqaabayaa, markuu codsado qofka dhibanaha ahi (81 x.c), xabsi ah (96 x.c) ilaa hal sano iyo ganaax ah (97 x.c) ilaa sh.so.3000/=.

2. Ciqaabtu waa xabsi (97 x.c) u dhaxeeya lix bilood ilaa saddex sano iyo inuu dhaqaajiyo xafiisku (81 x.c), marka falka lagu galo:

    a) xoog ama hanjabaad lagu sameeyo qofka;
    b) haddii loo shaqeeyaha waqti shaqojoojin gudaheeda uu ku kacoyo ama ay galaan shaqaaluhu marka shaqajoojinta jirta (390/2 x.c), amase ay jiraan mid ka mid ah dembiyada ku xusan qodobada 256, 257, iyo 259;
    c) hadduu falku ka dhaco dhismayaal guud ama loogu talo galay isticmaal guud ama shaqo caabudaad ama alaabta kale ee ku tilmaaman xarafka (r) ee Qod. 481;
    d) hadduu falke ku dhacay hawl loogu talo galay waraabinta beeraha;
    e) hadduu falku ku dhaco geed mirood ama beeritaankiisa ama dhisme geed mirood amase kaymaha, amase kobcin dhireed.

**Qod. 492**
**Gelin xoolo beer dad kale.**

1. Qof kasta oo geliya ama uga taga xoolo xayn ah beer dad kale, waxa lagu ciqaabayaa ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so. 100/- ilaa sh.sol000/=.

2. Haddii xoolaha la galiyay ama lagaga tegey beerta ayan ahayn xayne, daaqaan wixii beerta ku yiil, waxa lagu ciqaabi (96 x.c) ilaa hal sano ama'ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so.200/- ilaa sh.so.2000/=.

3. Marka daaqu si toos ah u dhaco amase ay baabi'yaan dhul beereedka xoolaha la galiyay ama lagaga tegey dhexdeeda, waxa lagu ciqaabayaa xabsi (96 x.c) ilaa laba sano ah iyo ganaax (97 x.c) u dhaxeeya sh.so.500/- ilaa sh.so.5000/=.

**Qod. 493**
**Gelid sharci darro ee beer dad kale.**

Qof kasfta oo gala beer dad kale xaydaankeed, teedkeeda ama soohdimeheeda meel ka mid ah, waxa lagu ciqaabayaa, marka uu codsado qofka dhibanaha ahi (81 x.c), ganaax ah (97 x.c) ilaa sh.so. 1000/=.

**Qod. 494**
**Dil ama dhaawicid xoolo dad kale.**

1. Qof kasta oo iyadoo aan loo baahnayn dila ama ka dhiga nafac beel amase dhib kale u geeysta neef qof kale leeyahay, waxa lagu ciqaabayaa, marka uu codsado qofka dhibanaha ahi (81 x.c), xabsi ah (96 x.c) ilaa hal sano ama ganaax (91 x.c) gaaraya ilaa sh. so. 3000/-.

2. Ciqaabtu waxay noqoneeysaa xabsi (96 x:c) u dhaxeeya lix bilood ilaa afar sano iyo xafiiska oo dhaqaajiyaa dacwada (81 x.c), marka falku lagu galay saddex ama ka badan oo neef oo xoolo ah, isku meesi, lo' gammaan ama geel, amase xoolo kale yeyanba ahaaane isku hal meesi.

3. Marka ay jirto xaalad xad-gudub xeereed ee nidaamka ee madaxda sare bixisay ee wakhtiga u dhigan in lagu dhiibo waxyaalaha qarxa, ciqaabtu waa xarig (98 x.c) u dhaxeeya hal bil ilaa hal sano ama ganaax (99 x.c) u dhaxeeyaa sh.so.300/- ilaa sh.so.5000/=.

**Qod. 532**
**Duruufaha cuslaynta**

Ciqaabaha dambiyada fudud ee ku xusan labada qodob ee aan soo dhaafnay waa la cuslaynayaa (118 x.c), marka falka ay galaan kuwo ka mid ah dadka xeerku ka mamnuucay siinta fasaxa, amaase loo diiday ama lagala noqday.

**Qod. 533**
**Furid xeerka khilaafsan ee meelo**
**daawasho fagaare ama maaweelo**

Qof kasta oo fura ama ka dhiga meel fagaare masraxiyad, maaweelo ama meel dalxiis, isagoo aan dhowrin habka maamulka u dejey ilaalinta babdaadada dadweynaha, waxa lagu ciqaabayaa xarig (98 x.c) ah ilaa lix bilood iyo ganaax (99 x.c) aan ka yarayn sh.so.1000.

**CINWAANKA 3AAD**
Dembiyada fudud ee khuseeya ka hortaga kuwo
ka mid ah dembiyada

**Qod. 534**
**Meelo aan la oggolayn gelidooda oo danta**
**ciidanka dowladda awgeed mamnuuc ah**

Qof kasta oo gala meelaha mariddoodu mamnuuca tahay danaha ciidanka dowladda awgiis, waxa lagu ciqaabayaa, haddii aan falku dhisnayn dembi culus, xarig (98 x.c) u dhaxeeya saddex bilood ilaa hal sano ama ganaax (99 x.c) u dhaxeeya sh.so.500/- ilaa sh.so.3000/=.

**Qod. 535**
**Haysasho miisanno iyo cabbirro aan xeerka waafaqsanayn**

1. Qof kasta oo isagoo awoodda hawlaha ganacsiga isticmaalaya ama meel ganacsi u furan tahay, haysta miisaanno ama cabbiro ka duwan kuwa xeer dejey, amase isticmaala miisaanno ama cabbirro isagoo aan dhowrin xeerka, waxa lagu ciqaabayaa ganaax (99 x.c) u dhaxeeya sh.so.100/- ilaa sh.so. 2.000/=.

2. Haddii dembiilaha hore loogu xukumay dembiyo lid ku ah hantida (480 x.c), ama lid ku ah aaminaada bulshada (348 x.c) ama lid ku ah dhaqaalaha guud, wershedaha ama ganacsiga (387 xc) ama dembiyada kale ee dabeecadoodu isku midka tahay (63 x.c), wuxuu hoos tegayaa ilku-haynta booliiska (178 x.c).

**Qod. 536**
**Diidmada lacagta leh dhaqdhaqaaqa sharci.**

Qof kasta oo diida qiimaha lacagta leh dhaqdhaqaaqa sharci ee dowladda. waxa lagu ciqaabayaa ganaax (99 x.c) ah ilaa sh.so.300/=.

**Qod. 537**
**Ka gaabin sheegidda lacag loo aqoonsaday been-abuur ah.**

Qof kasta qaata lacag been-abuur ah ama lagu sameeyay is-beddelka oo qiimaheedu dhan aan ka yarayn sh.so.20/, aan u geyn madaxda maamulka sare saddex maalmood gudahood, laga bilaabo markuu ogaaday been-abuurka ama is-bedelka, tilmaamina halkey ka soo gashay hadduu garanayo, waxa lagu ciqaabayaa ganaax (99 x.c) ah ilaa sh.so 2000; (eeg qoddobka349 iyo 350 x.c).

**Qod. 538**
**Faafin aan la oggolayn ee qoraallo ama warar la xiriira qaadis dacwad ciqaab ah.**

Qof kasta oo xaaladaha aan xeerku oggolayn, faafiya dhammaan ama qayb ama si kooban, qoraallo ama dokumenti qaadis dacwad ciqaab ah, amase faafiya magacyada garsoorayaasha oo ay la socoto tilmaanta cod-bixinta mid kasta ee qaadista dacwad ciqaab ah oo ay guddi ku galaan, waxa lagu ciqaabayaa ganaax (99 x.c) ah ilaa sh.so. l000/=.

**Qod. 539**
**Ka gaabin ilaalin hub.**

Waxa lagu ciqaabayaa ganaax (99 x.c) ah ilaa sh.so.1000/- qof kasta, xataa haddii uu haysto fasax qaadasho hub:

a) u dhiiba ama u oggolaanshaha hub(541 x.c) qof da'diisu ka yar tahay afar iyo toban sano, ama qof kasta oo dhimirkiisu dhiman yahay ama waayo aragnimo u lahayn qaadashadiisa;

b) dayicidda ilaalinta hubka (541 x.c) iyo ka xafidida lagama maarmaanka ah ee dadka ku xusan xarafka (b) ee isla qodonkan;

c) ku qaadasho buntukh cabbaysan meel dadku ku badan yahay.

**Qod. 540**
**Shidid iyo qaraxyo khatar ah.**

1. Qof kasta oo isagoo aan fasax ka haysan maamulka ku shaqada leh, meel la deggan yahay ama u dhow, ama meel ah wado fagaare ah ama jaho la mid ah ku rida hub dhaca, shida rash ama tuura rash cod weyn leh ama hawada laraaciyo buufimo shidan ama wax la mid ah, shida ama si khatar ah u qarxiya, waxa lagu ciqaabayaa ganaax ( 99 x.c) ah ilaa sh.so.1000/.

2. Haddii falka lagu galo meel dadku ku badan yahay, ciqaabtu waa xarig (98 x.c) ah ilaa hal bil.

**Qod. 541**
**Hub**

Ujeedada xeerka ciqaabta "hub" wuxuu u yaqaan:

a) hubka la rido iyo hubkii kale ee leh dabeecad waxyeelaysa dadka;

b) qalabka kale ee wax lagu weeraro ee ay mamnuuc tahay qaadashadoodu, amase loo qaato sabab aan cududaar lahayn;

c) bumbooyinka, matoor kasta ama sheyada ay ku jiraan maadooyinka qarxa iyo gaaska cabburinta ama indho la'aanta keena.

**Qod. 542**
**Haysasho aan cududaar lahayn ee beddelidda furayaal ama qafillo.**

Qof kasta oo hore loogu xukumay dembiyadda loo galo sabab faa'iido, ama dembiyada fudud ee khuseeya ka hortagga dembiyada lidka ku ah hantida (480 x.c), ama tuugsiga (523 x.c), ama looga digey ama hoostegey talaabooyinka badbaadada ee qofeed ee lagu qabto haysasho furayaal la beddelay ama la been-abuuray, amase furayaal run ah ama qalab ku hagaagsan furidda ama jebinta qafillada (sakatuura), waxa lagu ciqaaba xarig (98 x.c) u dhexeeya lix bilood ilaa labo sano.

**Qod. 543**
**Haysasho aan cududaar lahayn ee alaabo qaali ah**

Qof kasta ee leh shuruudaha shakhsiyadeed ee ku xusan Qod. 532, laguna qabto haysasho lacag ama qalab qaalli ah, ama qalab kale ee aanu haysan karin xaaladda uu yahay iyo cududaar la'aanta xeereed ee lahaanshohooda, waxa lagu ciqaabayaa xarig u dhexeeya saddex bilood ilaa hal sano (99 x.c).

**Qod. 544**
**Haysaho cududaar la'aan ee xayawaan.**

Qof kasta oo lagu helo isagoo haysta geel, lo' ama gammaan, laguna tuhmay in ay ku yimaadeen sabab dembi iyo cududaar la'aanta xeerka ee haystaha (possessore) lahaanshohooda, waxa lagu ciqaabayaa xarig ah ilaa lix bilood (99x.c), ama ganaax ah ilaa sh.so. 5000/=.

**Qod. 545**
**Ka gaabin sheegid alaab ka timi dembi.**

Qof kasta oo hela lacag ama gata amase haysta alaab ka timi dembi oo aanu garaneyn halkey ka soo jeedo ee ka gaabiya, kadib markuu gato, la socodsiin waaya isla markaas maddaxda sare ee maamulka ku shaqada leh, waxa lagu ciqaabayaa xarig (99 x.c) ah ilaa lix bilood ama ganaax (99 x.c) ah ilaa sh.so.5000/=.

**Qod. 546**
**Iibin ama u geyn furayaal ama qafilo qof aan la aqoon**

Qof kasta ee u sameeya furayaal nooc kasta, qof ka duwan milkiilaha ama haystaha meel ama shey, furayaal loola jeedo qof isaga wakiil ka ah, amase isticmaala xirfad bir-tume ama xirfad la mid ah ama qalab kale ee ku hagaagsan furidda iyo jebinta qafillada (sakatuurada), waxa lagu ciqaabayaa xarig (98 x.c) ah ilaa lix bilood iyo ganaax (99 x.c) u dhaxeeya sh.so. 100/- ilaa sh.so. 1000/=.

**Qod. 547**
**Furid aan cududdaar lahayn ee meelo ama sheeyo**

Qof kasta oo isagoo isticmaalaya xirfad bir-tume ama xirfad kale oo la mid ah, fura qafillo (sakatuuro) ama qalab kale oo la mid ah ee ku xiran difaaca meel ama shey, uuna waydiistay qof aanu isagu u aqoon milkiilihii ama kii hayey meesha ama sheyga ama aan wakiil u ahayn, waxa lagu ciqaabayaa xarig (98 x.c) ah ilaa saddex bilood ama ganaax (99 x.c) ah ilaa sh.so.2000/=.

**Qod. 548**
**Gadasho alaab la tuhunsan yahay halkey ka soo jeeddo**

1. Qof kasta oo isagoo aan marka horeba xaqiijin lahaanshaha xeereed, gata ama hela si kasta ha ahaatee, alaab tayadeeda ama shuudeheeda qofka soo bandhiga ama inta uu yahay qiimaheedu, lagu tuhumi karo in ay dembi ka soo jeeddo, waxa lagu ciqaabayaa xarig (98 x.c) ah ilaa lix bilood ama ganaax (99 x.c.) aan ka yarayn Sh.So.100 (504, 548).

2. Isla ciqaabtan waxa loo cuskanayaa qofkii ku dadaala in la gato ama gacanta lagu hayo si kastaba ha ahaatee, alaabta aan soo sheegnay ee aan marka horeba la xaqiijin lahaanshaheeda xeereed (eeg 504 *x.c).*

**Qod. 549**
**Ka baaqsasho ama aan la oggolaan ilaalinta kuwa waalan ama da'da yar meelaha lagu xannaaneeyo.**

1. Qof kasta oo isagoo aan haysan amar maamul sare ama oggolanshiihisa gacanta ku haya meel lagu daryeelo dadka la cadeeyey in aan maskaxdoodu dhammayn ama meel lagu dhaqan-celiyo dadka da'doodu yar lahay, waxa lagu ciqaabayaa ganaax (99 x.c) u dhaxeeya Sh.So. 300 ilaa Sh. So. 3000/=.

2. Isla ciqaabtaas waxa loo cuskanayaa, qofka ka baaqsada inuu la socodsiiyo madaxda booliiska, codsi la'aanta amarka ama oggolaanshaha maamulka sare ee arrimaha ku xusan xubinta 1aad ee qodobkan.

3. Waxaa lagu qaadayaa xarig (98 x.c) ah ilaa lix bilood ama ganaax (99 x.c) u dhaxeeya sh.so.300/-. ilaa sh.so.5000/=, qofkii, isagoo aan dhawrin sida xeerku dhigayo, ka siidaaya mid ka mid ah xarumaha aan soo sheegnay qof lagu daawaynayay ama lagu xannaaneynayey si sharci ah.

**Qod. 550**
**Ka gaabin ama oggolaansho la'aan ilaalin gaar ah ee dadka dhimmirkooda dhiman.**

1. Qof kasta oo marka laga reebo xaaladaha xubinta 2aad ee Qod. hore (549 x.c), oggolaansho la'aanta haya ilaalin dad dhimirkoodu dhiman yahay, waxa lagu ciqaabaya xarig (98 x.c).ah ilaa saddex bilood ama ganaax (99 x.c) u dhaxeeya sh.so.100/- ilaa sh.so.2000/=.

2. Isla ciqaabtan mid la midah waxaa qaadanaya qofkii dhawri waaya waajibaadka la xiriira ilaalinta dadka aan ku soo sheegnay xubinta hore ee qodobkan.

**Qod. 551**
**Ka gaabin ogeysiin maamulka sare, baxsasho ama fakasho kuwa maskaxda lagaga jiro ama kuwa da'doodu yar tahay.**

1. Sarkaalka guud (240/b x.c) ama qof ka mid ah xarun ciqaabta lagu fuliyo (90 x.c) ama tallaabooyinka badbaadada (172 x.c), amase xarunta daaweynta dadka maskaxda wax uga dhiman yihiin ama xarunta dhaqan-celinta da'yarta, ka gaabiya in uu isla markiiba ogeysiis siiyo madaxda sare ee booliiska xagga baxsashada (305 x.c) ama fakashada dadka xiran ama isbitaal jiife ah, waxa lagu ciqaabayaa ganaax (99 x.c) u dhaxeeya sh.so. 100/- ilaa sh.so.2000/=.

2. Isla ciqaabtan mid la mid ah, waxa loo cuskanayaa qofkii xeer ahaan ama amar maamulka sare lagu aaminey qof sabab ilaalin iyo maareeyn.

**Qod. 552**
**Ka gaabin sheegid waalli khatar ah.**

